# Jannada Raxmaanka

**Copyright**

Title book: Jannada Raxmaanka

Author: Abdulaziz Mohamed Oogle

© 2019, Abdulaziz Mohamed Oogle

Email: oogleabadle@hotmail.com

Website: www.gaaldiid.com

ALL RIGHTS RESERVED. This book contains material protected under International and Federal Copyright Laws and Treaties. Any unauthorized reprint or use of this material is prohibited. No part of this book may be reproduced or transmitted in any form or by any means, electronic or mechanical, including photocopying, recording, or by any information storage and retrieval system without express written permission from the author.

## Gogoldhig

Mahaddu dhamaanteed waxay u sugnaatay rabbiga barbaariyey caalamiinta, isaga ayaan talo saaranaynaa, isaga ayaan kaalmo iyo gargaar waydiisanaynaa, isaga ayaan usoo noqonaynaa.

Waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Allah mooyee iyo in Muxamed uu yahay adoonkiisii iyo rasuulkiisii oo loo soo diray dhammaan basharka si looga saaro mugdiyada looguna bixiyo nuurka iyo iftiinka. Waxaan Ilaahay u waydiinayaa inuu korkiisa yeelo nabadgalyo, naxariis iyo barakooyin isaga, ehelkiisii, saxaabadiisii iyo qof kasta oo jidkiisa raacay.

**Intaa kadib:**

Waxay ahayd bil Ramadaan, waxaan diyaariyey barnaamij ka kooban 21 xalqadood oo ka warramaya hoyga Ilaahay u diyaariyey mu'miniinta, anigoo u bixiyey barnaamijkaas "Jannada Raxmaanka".

Ujeedada barnaamijkuna wuxuu ahaa in dadka muslimiinta ah la xasuusiyo abaalmarinta wayn ee Ilaahay udiyaariyey cidii qaadata awaamirtiisa, kana fogaata wixii uu reebay.

Maadaama bisha barakaysan ee Ramadaan la furo albaabada Jannada, lana xidho albaabada naarta sidoo kalena la silsiladeeyo madaxda shayaadiinta waxa ila qumanaatay inay haboontahay in dadka lagu dhiirigaliyo cibaadooyinka iyo inay ku dadaalaan camalada saalixa ah.

Si dadka oo dhan uga faa'idaystaan waxaan go'aansaday inaan qoro kitaabkan oo la magac baxay isla magicii barnaamijkii maqal iyo muuqaalka ahaa ee "Jannada Raxmaanka".

Kitaabkan markii aan qorayey waxaan ku laabtay kutubta asalka u ah diinta Islaamka sida Quraanka Kariimka, Tafsiirka Imaamu Dabari, Tafsiirka Imaamu Ibnu Kathiir, Saxiixa Imaamu Bukhaari, Saxiixa Imaamu Muslim, Sunanka Tirmadi, Nisaa'i, Abudaawuud, Ibnu Maajah iyo Musnadka Imaamu Axmed.

Kutubta aan sida wayn uga faa'idaystay waxa kamida kutubka uu qoray caalimkii waynaa ee Ibnu Al-Qayyim Ilaahay ha u naxariistee sida kutubtan ”Arruux” ”Xaadi Al-arwaax fii bilaadi Al-afraax”

Sidoo kale waxaan ka faa'idaystay kutubta ay qoreen culumada mucaasiriinta ah (casirgeenan nool) sida kutubta uu qoray Sheekh Maxamuud Al-Misriyy Abu Cammaara ”Daar Al-aakhirah” iyo ”Yawmun fil Jannah”. Ilaahay ha xifdiyo sheekha, wuxuu si wanaagsan usoo bandhigay nicmooyinka iyo raaxada jannada taala.

Jannadu waxay kamid tahay umuuraha qaybka ah (maqan) sidaa darteed waxaan ku dadaalay in aan ku koobnaado daliilka soo arooray, anigoo si wayn xooga u saaray inaan muujiyo meesha aan kasoo xigtay xadiiska iyo lanbarkiisa.

Kitaabkan wuxuu ka koobanyahay cutubyo dhawra, cutubkastana wuxuu usii qaybsamayaa cinwaano yaryar oo kasii farcamaya.

Muhiimada kitaabkan uu leeyahay waxa kamida inaad hesho macluumaad faahfaahsan oo aad ka dab qaadato kuuna horseedaya inshallah inaad sii laba laabto camalada wanaagsan ee aad Ilaahay ugu dhowaanayso.

Waxaan Ilaahay ka baryayaa inuu iga aqbalo camalkan yar oo uu ka yeelo mid isaga kalidii loo qabtay iyo mid ay ka

faa'idaystaan dhamaan bulshada soomaaliyeed ee akhrisan doonta.

## HIBEYN

Kitaabkan "Jannada Raxmaanka" wuxuu soo bandhigaya masiirka iyo cidhib danbeedka dadka wanaagsan ee Ilaahay ka cabsaday intii ay aduunka joogeen, kuwaasoo Ilaahay ku abaalmarinayo jannadiisa balaadhan ee uu ku diyaariyey wax aan il arag, dhagna maqal, qalbi aadamana aan kusoo dhicin.

Waxaan kitaabkan u hibeynayaa dhamaan Ummada Islaamka ah ee hammigooda iyo hiigsigooduba yahay sidii ay ay ku hanan lahaayeen raali ahaanshaha Ilaahay subxaanahu wa tacaala.

Si gaara waxaan kitaabkan ugu hibeynayaa hooyaday macaan "Caasha Cabdi Khayre" oo nafteeda iyo maalkeedaba u hurtay sidii aan horumar u gaadhi lahaa, waxaan leeyahay: Hooyo, aduunyada nimco ku noolow, aakhirana jannada raxmaanka kuwa ku raaxaysta Alle hakaa yeelo.

*Abdulaziz Mohamed Oogle*

# Jannada Raxmaanka

Jannada Raxmaanku waa hadafka, ujeedada, himilada, hammiga iyo yoolka qofka muslimka ah uu rabo inuu gaadho. Ruux kasta oo mu'min ah wuxuu ku hammiyaa siduu u raali galin lahaa Rabbigii iyo siduu ugu guulaysan lahaa liibaanta balaadhan ee Jannada Raxmaanka.

Ilaahay (swt) wuxuu yiri:

فَمَن زُحْزِحَ عَنِ النَّارِ وَأُدْخِلَ الْجَنَّةَ فَقَدْ فَازَ

Ruuxii laga fogeeyo naarta ee la galiyo Jannada wuu guulaystay. [1]

Haddaba Jannada Raxmaanka sidee u ekaan doontaa? Yaa galaya? Maxaa lagu kasabadaa raali ahaanshaha Ilaahay iyo guushaas wayn?

Ilaahay xadiis Qudsiya wuxuu ku yiri:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : يَقُولُ اللَّهُ تَعَالَى : أَعْدَدْتُ لِعِبَادِي الصَّالِحِينَ مَا لَا عَيْنٌ رَأَتْ وَلَا أُذُنٌ سَمِعَتْ وَلَا خَطَرَ عَلَى قَلْبِ بَشَرٍ ذُخْرًا بَلْهَ مَا أُطْلِعْتُمْ عَلَيْهِ ، ثُمَّ قَرَأَ ( فَلَا تَعْلَمُ نَفْسٌ مَا أُخْفِيَ لَهُمْ مِنْ قُرَّةِ أَعْيُنٍ جَزَاءً بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ) .

Abihurayra waxa laga wariyey (Rc) inuu kasoo wariyey nabiga (scw): "Ilaahay wuxuu leeyahay: adoomadayda wanaagsan waxaan u diyaariyey wax aanay ishoodu arkin, dhagtooduna maqlin, qalbigoodana aan kusoo dhicin, kaydin ah iska dhaaf intii aan tusay (marka laga reebo intii aan tusay) markaasuu akhriyey: (Ma oga nafna wixii loo

[1] Suuratu Alcimraan: 185

qariyey ee indho doogsiya abaal marin wixii ay camal faleen darteed)[2]”

## Waynida Jannada

Jannadu way ka wayntahay aduunyada iyo waxa yaalaba, raaxada aduunka iyo raaxada jannaduna isku mid maaha, isumana dhigmaan. Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

( مَوْضِعُ سَوْطِ أَحَدِكُمْ مِنَ الْجَنَّةِ خَيْرٌ مِنَ الدُّنْيَا وَمَا عَلَيْهَا )

”Meel midkiin ul dhigto oo Jannada ah ayaa ka khayr badan aduunyada iyo waxa dusheeda yaala”[3]

Xadiis kale Rasuulkii Ilaahay wuxuu ku yiri:

وَلَقَابُ قَوْسِ أَحَدِكُمْ فِى الْجَنَّةِ خَيْرٌ مِمَّا طَلَعَتْ عَلَيْهِ الشَّمْسُ أَوْ تَغْرُبُ

”Midkiin leebkiisu meel uu ka baxo (dalool) oo Jannada ah ayaa ka khayr badan wixii Qorrax usoo baxdo ama ay ka dhacdo”[4]

Xadiis kale nabigu (scw) wuxuu ku sheegay in marada afka la iska mariyo ee jannada taala ay ka khayr badan tahay xariirta aduunyada ayna ka jilicsantahay:

فَقَالَ وَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ إِنَّ مَنَادِيلَ سَعْدِ بْنِ مُعَاذٍ فِي الْجَنَّةِ أَحْسَنُ مِنْ هَذَا

Wuxuu yiri (nabigu): ”Kay naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, marada afka la iska mariyo ee Sacad ibnu Mucaad Jannada ku leeyahay ayaa ka wanaagsan tan (xariirtan)”[5]

---

[2] Bukhaari 3072 iyo Muslim: 2824
[3] Bukhaari: 2735
[4] Bukhaari: 2643
[5] Bukhaari: 2473 iyo Muslim: 2469

Dhanka kale Rabbiga wayn (swt) oo jannada ka hadlaya ayaa tusaale usoo qaatay meel beera oo wabiyayaal ay qulqulayaan. Dabcan jannadii rasmiga ahayd maaha tusaalahani ee kaliya waxa la rabaa in maskaxda aadamaha loogusoo dhoweeyo:

مَّثَلُ الْجَنَّةِ الَّتِي وُعِدَ الْمُتَّقُونَ ۖ فِيهَا أَنْهَارٌ مِّن مَّاءٍ غَيْرِ آسِنٍ وَأَنْهَارٌ مِّن لَّبَنٍ لَّمْ يَتَغَيَّرْ طَعْمُهُ وَأَنْهَارٌ مِّنْ خَمْرٍ لَّذَّةٍ لِّلشَّارِبِينَ وَأَنْهَارٌ مِّنْ عَسَلٍ مُّصَفًّى ۖ وَلَهُمْ فِيهَا مِن كُلِّ الثَّمَرَاتِ وَمَغْفِرَةٌ مِّن رَّبِّهِمْ ۖ

"Tusaalaa Jannada Ilaahay ugu yaboohay dadka Alle ka cabsada (waxa weeye Janno) ay dhexdeeda ahaatay biyo aan is badalayn iyo wabiyo caano ah oo aan dhadhankoodu is badalayn iyo wabiyo khamriya oo u macaan dadka cabaya iyo wabiyo malab saafiya ah, waxayna dhexdeeda ku leeyihiin dhamaan midhaha iyo danbidhaaf ka ahaaday xaga rabbigooda…"[6]

Sidoo kale aayadan ayuu Ilaahay tusaale ugusoo qaatay qaabka Jannadu u ekaanayso:

مَّثَلُ الْجَنَّةِ الَّتِي وُعِدَ الْمُتَّقُونَ ۖ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ۖ أُكُلُهَا دَائِمٌ وَظِلُّهَا ۚ تِلْكَ عُقْبَى الَّذِينَ اتَّقَوا ۖ وَّعُقْبَى الْكَافِرِينَ النَّارُ ﴿٣٥﴾

"Tusaalaha Jannada Ilaahay ugu ballan qaaday kuwa Alla ka dhawrsada, waxa soconaya hoosteeda wabiyoyaalkii, midhaheedu waa daayim (ma dhamaanayaan) iyo hadhkeeduba, waa taas masiirka kuwa Alle ka dhawrsaday, masiirka gaaladuna waa Naar (35)"[7]

---

[6] Suuratu Muxamed: 15

[7] Suuratu Al-Racdi:35

Waxa laga wariyey rasulkii Ilaahay (scw):

قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لَقَيْدُ سَوْطِ أَحَدِكُمْ مِنْ الْجَنَّةِ خَيْرٌ مِمَّا بَيْنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: "midkiin xadhiga ushiisa ee Jannada ayaa ka khayr badan Samada iyo Dhulka inta u dhaxaysa"[8]

## Farqiga u dhaxeeya Dhaldhalaaka Aduunka iyo Raaxada Aakhiro

Dhaldhalaaka Aduunyada ee bani aadamku u kala baratamaan ayaa Ilaahay agtiisa ka ah raaxo yar oo waqtigeedu dhamaanayo. Ilaahay wuxuu Quraankiisa ku yiri:

زُيِّنَ لِلنَّاسِ حُبُّ الشَّهَوَاتِ مِنَ النِّسَاءِ وَالْبَنِينَ وَالْقَنَاطِيرِ الْمُقَنطَرَةِ مِنَ الذَّهَبِ وَالْفِضَّةِ وَالْخَيْلِ الْمُسَوَّمَةِ وَالْأَنْعَامِ وَالْحَرْثِ ۗ ذَٰلِكَ مَتَاعُ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا ۖ وَاللَّـهُ عِندَهُ حُسْنُ الْمَآبِ ﴿١٤﴾ قُلْ أَؤُنَبِّئُكُم بِخَيْرٍ مِّن ذَٰلِكُمْ ۚ لِلَّذِينَ اتَّقَوْا عِندَ رَبِّهِمْ جَنَّاتٌ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا وَأَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ وَرِضْوَانٌ مِّنَ اللَّـهِ ۗ وَاللَّـهُ بَصِيرٌ بِالْعِبَادِ ﴿١٥﴾

Dadka waxa loo qurxiyey jacaylka waxay naftoodu doonto ee dumarka, wiilal, lacag badan oo dahab iyo fidho ah, fardaha carbisan, xoolaha iyo beeraha. Kuwaasi waa dhaldhalaaka duunyada, Ilaahay agtiisa ayaa noqosho fiican leh. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) ma idiinka warramaa wax ka khayr badan kuwaas, kuwa Alle ka cabsada waxa Rabbigood agtiisa ku leeyihiin jannooyin ay soconayso hoosteeda wabiyoyaalkii ayagoo dhexdooda ku waaraya iyo

[8] Musnadu Axmed: 27384

dumar (xaasas) daahira iyo raali ahaansho Ilaahay, Ilaahayna wuu arkaa adoomadiisa” [9]

Waxa kale oo Rabbi dhahay:

قُلْ مَتَاعُ الدُّنْيَا قَلِيلٌ وَالْآخِرَةُ خَيْرٌ لِّمَنِ اتَّقَىٰ وَلَا تُظْلَمُونَ فَتِيلًا ﴿٧٧﴾

”Waxaad dhahdaa (nabiyow) raaxada aduunyo waa mid yar, aakhiraana u khayr badan ruuxa Alle ka cabsanaya, la idinmana dulminayo haba yaraatee”[10]

Ilaahay wuxuu yiri:

فَمَا مَتَاعُ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا فِي الْآخِرَةِ إِلَّا قَلِيلٌ ﴿٣٨﴾

”Raaxada aduunyadu (marka loo barbardhigo) ta aakhiro waa wax aad u yar”[11]

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

وَلَوْ أَنَّ رَجُلًا مِنْ أَهْلِ الْجَنَّةِ اطَّلَعَ فَبَدَا أَسَاوِرُهُ لَطَمَسَ ضَوْءَ الشَّمْسِ كَمَا تَطْمِسُ الشَّمْسُ ضَوْءَ النُّجُومِ

”Hadii nin ehelka Jannada kamida soo baxo oo uu muujiyo shuuliyadiisa (dahabka gacanta uu ku sito) waxay daminaysaa ilayska Qorraxda sida cadceedu u shiikhiso ilayska xidigaha”[12]

Sidoo kale rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

وَلَوْ أَنَّ امْرَأَةً مِنْ نِسَاءِ أَهْلِ الْجَنَّةِ اطَّلَعَتْ إِلَى الْأَرْضِ لَأَضَاءَتْ مَا بَيْنَهُمَا وَلَمَلَأَتْ مَا بَيْنَهُمَا رِيحًا وَلَنَصِيفُهَا يَعْنِي الْخِمَارَ خَيْرٌ مِنْ الدُّنْيَا وَمَا فِيهَا

[9] Suuratu Alcimraan: (14,15)
[10] Suuratu Nisaa’i: 77
[11] Suuratu Tawbah: 38
[12] Tirmadi: 2538

”Hadii gabadh kamida haweenka ehelka Jannadu ay usoo baxdo dhulka waxay ifiimin lahayd inta u dhaxaysa (dhulka iyo Jannada), waxayna ka buuxin lahayd inta u dhaxaysa udug (caraf udgoon), khamaarkeeda ama shalmadeeda ayaa ka khayr badan Aduunyada iyo waxa dhex yaala”[13]

## Qaar kamida waxyaalaha ay ku kala duwanyihiin aduunyada iyo jannadu

- Jannadu waxay ka madhantahay ceebaha aduunyada sida kaadi, saxaro, dhiig, candhuuf, xaako, ur qadhmuun, dhalmo, walwal, walbahaar iyo dhibaato oo dhan.
- Khamriga jannada laguma sarkhaamo, lagumana wareero waana mid u macaan dadka cabaya, halka khamriga aduunyada ka yahay mid qadhaadh, sarkhad iyo madax wareer leh sidoo kalena xaaraana.
- Aduunyada dadku way isu cadhoodaan, is xaasidaan, cuqdad iyo cadho ayay ku kala tagaan, balse jannada dadka qalbigoodu waa saafi oo colaad iyo cuqdad toona kama dhaxayso.
- Nicmada aduunyadu waa mid dhamaanaysa halka ta aakhiro aanay marnba nuqsaamayn.

[13] Bukhaari: 6199

# Dadkii u xiisooday Jannada Raxmaanka

Tani waa jannadii ay u xiisoodeen dadkii ugu wanaagsanaa ummada nabi Muxamed (scw), dadkaasna waxa kamida:

## Cumayr ibnu Alxamaam (Rc)

Saxaabigan sharafta leh wuxuu ka qayb galay dagaalkii Badar, wuxuuna maqlay rasuulkii Ilaahay (scw) oo leh: ”Ukaca janno ballaceedu la eegyahay samada iyo dhulka”

Saxaabigii Cumayr ibnu Xamaam wuxuu yiri: Rasuulkii Ilaahayow, ma janno ballaceedu cirka iyo dhulka la eegyahaybaa? Nabiguna (scw) wuxuu yiri: Haa.

Saxaabigii wuxuu yiri: Bakhin Bakhin (waa eray afcarbeeda oo ku tusinaya la yaab). Nabiguna (scw) wuxuu waydiiyey: Maxaa ku kallifay inaad dhahdo Bakhin Bakhin? Wuxuu ku jawaabay: waa rajo aan rajaynayo inaan kamid noqdo ehelkeeda. Rasuulkii Ilaahay wuxuu yiri: ”Adigu ehelka Jannada kamid baad tahay.”

Saxaabigii intuu farxay oo uu kala batay ayuu lasoo baxay dhawr xabo oo timira, markaasuu dhahay: ”Ilaahbaan ku dhaartee waa nolol dheer intaan cunayo tan (timirta)”

Kadibna goobtii dagaalka ayuu isku tuuray waanu shahiiday, Ilaahay raali haka ahaadee. Sidaasbaanu uga mid noqday ehelka jannada.

## Thaabit ibnu Qays

Saxaabigan reer ansaareed ee Thaabit ibnu Qays waxa jannada loogu bishaareeyey laba jeer. Markii ay soo dagtay aayada ku jirta suuratu Al-xujuraat oo reebaysa in cod laga sarreysiiyo codka rasuulka ayuu Thaabit u maleeyey in camaladiisii bureen.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَرْفَعُوا أَصْوَاتَكُمْ فَوْقَ صَوْتِ النَّبِيِّ

Kuwa Allah rumeeyow haka sarreysiinina codkiina codka Rasuulka..[14]

Thaabit markii aayadani soo dagtay wuxuu fadhiistay gurigiisa, kamanuu soo bixin wuxuuna yiri: anigu codkayga ayaan ka sarreysiin jiray codka rasuulka, markaa ehelka naarta ayaan kamid ahay.

Sacad ibnu Mucaad ayaa arrintiisa u sheegay rasuulka (scw). Rasuulkuna wuxuu yiri: ”Isagu waa ehelka Jannada”

Haddaba saxaabigan qaaliga ah sidee ayuu ku geeriyooday?

Markii lagugu gudo jiray dagaalkii Yamaama ee lagula dagaalamayey beenaalihii Musaylama, ayaa bilowgii waxa jabay saxaabadii. Dabadeedna Thaabit ibnu Qays oo dhiiri galinaya saxaabada iyo muslimiinta ayaa qotay god, wuxuuna galiyey qeybta hoose ee jidhkiisa, wuxuuna qaatay hubkiisii waanu dagaalamay, waanu shahiiday Ilaahay raali haka ahaadee.

## Bilaal ibnu Rawaaxa

Bilaal Ilaahay raali haka ahaadee waa mid kamida saxaabada rasuulka kuwa ugu caansan, wuxuuna ahaa nin xabashiya oo adoona, waxa xoreeyey oo Ilaahay dartii usii daayey Abubakar Ilaahay raali haka ahaadee.

Bilaal markii uu geeriyoonayey waxa la joogtay xaaskiisii markaasay tidhi: Murugoodayeey, shallaytaydeey! Bilaalna

---

[14] Suuratu alxujuraat: 2

wuxuu yiri: Farxadaydiiyeey! Barri ayaan la kulmayaa dadkii aan jeclaa, Muxamed iyo xisbigiisii.

## Jacfar ibnu Abudaalib

Dagaalkii Mu'tah waxa la dilay amiirkii ciidamada ee Zayid ibnu Xaaritha (Rc), waxa xilkii amiirnimo qabtay Jacfar, kadibna wuxuu tiriyey gabay uu naftiisa ku dhiiri galinayo wuxuuna yiri:

يَا حَبَّذَا الْجَنَّةُ وَاقْتِرَابُهَا طَيِّبَةٌ بَارِدَةٌ شَرَابُهَا وَالرُّومُ رُومٌ قَدْ دَنَا عَذَابُهَا عَلَيَّ إِنْ لاقَيْتُهَا ضِرَابُهَا

Maxaa ka fiican Jannada iyo soo dhowaanshaheeda, way wanaagsantahay oo qabowyahay cabitaankeedu. Roomaankuna cadaabka ayaa usoo dhowaaday, markaan la kulmo waa inaan la dagaalamo.[15]

Jacfar calankii ayuu gacanta midig ku qaaday waanu dagaalamay, waxa la gooyey gacantii midigta, hadana gacantii bidixda, markaasuu labada cududood ku qabsaday calankii ilaa uu ka shahiiday Ilaahay raali haka ahaadee.

Labadii gacmood ee Ilaahay dartii loo gooyey waxa Ilaahay ugu badalay laba baalood oo uu jannada ku duulo. Waxa nabiga (scw) lagasoo wariyey inuu yiri:

" دَخَلْتُ الْجَنَّةَ الْبَارِحَةَ فَنَظَرْتُ فِيهَا فَإِذَا جَعْفَرٌ يَطِيرُ مَعَ الْمَلَائِكَةِ وَإِذَا حَمْزَةُ مُتَّكِئٌ عَلَى سَرِيرٍ " .

"Jannada ayaan galay xalaytoole waanan fiiriyey mise Jacfar ayaa la duulaya Malaa'ikta, Xamsana wuxuu ku dingiigaa sariir dusheeda"[16]

---

15 السنن الكبرى للبيهقي » كِتَابُ الأَشْرِبَةِ وَالْحَدُّ فِيهَا » بَابُ الصَّمْتِ عِنْدَ اللِّقَاءِ

16 المستدرك على الصحيحين » كتاب معرفة الصحابة رضي الله تعالى عنهم » ذكر مناقب جعفر بن أبي طالب بن عبد المطلب بن هاشم

## Camru ibnu Jamuux (Rc)

Camru ibnu Jamuux Ilaahay raali haka ahaadee wuxuu ahaa nin ka dhutiya lug, wuxuuna doonay inuu ka qaybgalo dagaalkii Uxud, hase ahaatee waxa u diiday wiilashiisii.

Kadibna wuxuu u tagay rasuulkii Ilaahay (scw), wuxuuna ku yiri: ubadkaygii ayaa ii diiday inaan dagaalka ka qaybgalo.

Nabigu (scw) wuxuu ku yiri: ”adiga laguguma laha jihaad” caruurtiisiina wuxuu ku yiri: ”laga yaaba in Ilaahay ku arsaaqo shahaadada”

Sidaas ayuu dagaalkii Uxud uga qaybgalay waanu ku shahiiday, wuxuuna dhihi jiray: ”lugtaydan jiiska ah (laangadhada ) ah ayaan galinayaa Jannada.[17]

## Anas ibnu Nadhar

Ilaahay raali haka ahaadee saxaabiga Anas ibnu Nadhar wuxuu ka qayb galay dagaalkii Uxud, wuxuuna arkay saxaabadii oo la jabiyey. Kadibna isagoo dhawaaqaya ayuu yiri:

اللهم إني أعتذر إليك مما صنع هؤلاء يعني أصحابه وأبرأ إليك مما صنع هؤلاء يعني المشركين ثم تقدم فاستقبله سعد بن معاذ فقال يا سعد بن معاذ الجنة ورب النضر إني أجد ريحها من دون أحد

”Ilaahow waxaan kaaga cudurdaaranyaa wixii ay sameeyeen kuwaasi (asxaabtiisa) waxaan kaa magan galayaa wixii ay sameeyeen kuwaasi (gaalada) kadibna wuu dhaqaaqay, waxaana kahor yimid Sacad ibnu Mucaad, markaasuu ku yiri: Sacad ibnu Mucaadow, waa tan Jannadii

---

17 السنن الكبرى » كتاب السير » باب من له عذر بالضعف والمرض والزمانة والعذر في ترك الجهاد

Rabbiga Nadhar ayaan ku dhaartee, udugeeda waxaan ka helayaa buurta Uxud sokodeeda”[18]

Goobtii dagaalka ayuu isku tuuray waanu dagaalamay oo waa la dilay, sidaasbaanu ku shahiiday saxaabigaasi, Ilaahay raali haka ahaadee.

## Xaraam ibnu Malxaan

Saxaabigan wuxuu kamid ahaa saxaabadii lagu shirqoolay goobta la dhaho Bi’ir Macuuna, waxa xaga danbe lagaga dhuftay warankii, markaasuu yiri:

فزت ورب الكعبة

” Waan guulaystay Rabbiga kacbadaan ku dhaartee”[19]

## Caamir ibnu Fahiira

Saxaabigan wuxuu ahaan jiray adoon, waxa xoreeyey Abubakar (Rc). Waana saxaabigii adhiga Abubakar raacayay markii nabiga iyo Abubkar ay hijroodeen ee ay galeen godka. Wuxuu adhiga ku tirtiray raadkii Cabdullahi ibnu Abubakar oo habeenkii u iman jiray nabiga iyo aabihii.

Caamir isagana waxa lagu dilay goobta Bi’ir Macuuna. Markii la dilayey ayuu isna ku dhawaaqay: ”Waan guulaystay rabbiga kacbadaan ku dhaartee” markuu dhintay waxa la waayay maydkiisii, ninkii dilayna wuu islaamay.

## Sacad ibnu Khaythamah ibnu Xaarith

Maalintii Badar ayaa Sacad iyo aabihii Khaythamah ay u baratameen qofka ka qaybgalaya dagaalkii Badar, wayna

---

[18] Bukhaari: 2651

[19] Bukhaari: 3865

qoryo tuurtaan waxa qori tuurkii kusoo baxay Sacad ibnu Khaythamah.

Khaythamah ayaa wiilkiisii ku yiri: ”Aabe maanta i horreysii oo dumarka lasii joog” Sacad ayaa yiri: ”Aabe meel aan Janno ahayn waan ku horreysiin lahaa”

Sacad wuxuu ku shahiiday dagaalkii Badar halka Khaythamana uu ku shahiiday dagaalkii Uxud hal sano kadib, Ilaahay raali haka ahaadee.[20]

## Mucaad ibnu Jabal

Saxaabigii waynaa ee Mucaad ibnu Jabal Ilaahay raali haka ahaadee, wuxuu ku geeriyooday daacuunkii Camwaas oo dhacay khilaafadii Cumar ibnu Khadaab (Rc).

Wuxuuna ku ducaystay in daacuunkan dheeftiisa uu ka helo, maadaama uu rumaysnaa in qofka u geeriyooda cudurka daacuunku uu yahay shahiid siduu cadeeyey rasuulkii Ilaahay.

Dabcan isaga iyo ehelkiisiiba way ku dhinteen daacuunkaas, wuxuuna nolosha aduunyo ka door biday nolosho aakhiro ee baaqiga ah.

## Cusmaan ibnu Cafaan

Markii Khawaarijtii habaarka qabay ay go’doon ku qabteen gurigii Cusmaan ibnu Cafaan ayay u diideen xataa biyihii uu ku afuri lahaa maadaama uu soomanaa. Habeenkii isagoon afurin ayuu ku riyooday Rasuulkii Ilaahay, Abubakar iyo Cumar oo ku leh: caawa waad nala afuraysaa.

---

20 سير أعلام النبلاء » الصحابة رضوان الله عليهم » سعد بن خيثمة

Wuxuuna gartay in khawaarijtu ay dilayso, wayna dileen isagoo akhrinaya kitaabka Ilaahay ee Quraanka, sidaasbaanu ku shahiiday.

## Cumar ibnu Khadaab

Ilaahay raali haka ahaado Cumar ibnu Khadaab, markuu xajay xajkiisii ugu danbeeyey ayuu Ilaahay ka baryay inuu dhinto isagoo shahiida, uuna ku geeriyoodo baladkii rasuulkii Ilaahay (Scw).

Saxaabadii ayaa waydiisay sidee ayaad ku rabtaa shahaado adigoo jooga magaalada Madiina oo ahayd caasimadii dawladiisa. Wuxuu yiri: qofka haduu Ilaahay run u sheego, wuu u rumeeyaa.

Sidii uu jeclaa ayaana dhacday oo habaar qabe majuusiya ayaa tooray ka taagay isagoo muslmiinta tujinaya salaadii Subaxa.

## Xandalah ibnu Caamir

Saxaabigan qaaliga ah ee reer Ansaareed wuxuu ka qaybgalay dagaalkii Uxud isagoo dhowaan aroostay. Markuu maqlay dhawaaqa dagaalka ayuu soo baxay isagoon ka qubaysanin janaabada, wuxuuna ku shahiiday dagaalkii Uxud. Maydkiisiina waxa dhaqday malaa'iktii Ilaahay.

## Julaybiib

Julaybiib Ilaahay raali haka ahaadee isagoo aroosa ayuu maqlay dagaalka dhawaaqiisii, waanu soo baxay isagoo ajiibaya Ilaahay iyo rasuulkiisa, una xiiso qaba raali ahaanshaha Ilaahay iyo jannadiisa. Dagaalkii ayuu ku geeriyooday isagoo gaalada ka dilay todoba nin, markaasuu rasuulku (scw) yiri:

"قَتَلَ سَبْعَةً. ثُمّ قَتَلُوهُ. هَذَا مِنّي وَأَنَا مِنْهُ. هَذَا مِنّي وَأَنَا مِنْهُ"

”Todoba ayuu dilay, kadibna way dileen, Kani anigu iga ahaaday, aniguna isaga ayaan ka ahaaday Kani anigu iga ahaaday, aniguna isaga ayaan ka ahaaday”[21]

## Raggii loogu bishaareeyey Jannada:

Dadka Jannada loogu bishaareeyey way badanyihiin, hadii aan si guud u tilmaamno; qof kasta oo Ilaahay rumeeyey lana yimid camal wanaagsan waxa loogu bishaareeyey jannada sida Allah ku cadeeyey kitaabkiisa Quraanka:

وَبَشِّرِ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أَنَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ۖ

”Ugu bishaaree kuwa Ilaahay rumeeyey ee camal wanaagsan layimid inay u sugnaatay Jannooyinka ay soconayso hoosteeda wabiyayaalkii”[22]

Haddana waxa jira rag magacyadooda la inoo sheegay inay kamid yihiin ehelka Jannada, waxa kamida:

### Tobanka saxaabi ee hal mar loogu bishaareeyey

عَنْ عَبْدِ الرَّحْمَنِ بْنِ عَوْفٍ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَبُو بَكْرٍ فِي الْجَنَّةِ وَعُمَرُ فِي الْجَنَّةِ وَعُثْمَانُ فِي الْجَنَّةِ وَعَلِيٌّ فِي الْجَنَّةِ وَطَلْحَةُ فِي الْجَنَّةِ وَالزُّبَيْرُ فِي الْجَنَّةِ وَعَبْدُ الرَّحْمَنِ بْنُ عَوْفٍ فِي الْجَنَّةِ وَسَعْدٌ فِي الْجَنَّةِ وَسَعِيدٌ فِي الْجَنَّةِ وَأَبُو عُبَيْدَةَ بْنُ الْجَرَّاحِ فِي الْجَنَّةِ.

Cabdiraxmaan ibnu Cawf waxa laga wariyey inuu yiri: Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Abubakar Jannada ayuu

[21] Muslim: 2472
[22] Suuratu Albaqarah: 25

ku jiraa, Cumar Jannada ayuu ku jiraa, Cusmaan Jannada ayuu ku jiraa, Cali Jannada ayuu ku jiraa, Dalxa Jannada ayuu ku jiraa, Zubayr Jannada ayuu ku jiraa, Cabdiraxmaan binu Cawf Jannada ayuu ku jiraa, Sacad Jannada ayuu ku jiraa, Saciid Jannada ayuu ku jiraa iyo Abucubayda binu Aljarraax Jannada ayuu ku jiraa”[23]

## Sacad ibnu Mucaad

فَقَالَ وَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ إِنَّ مَنَادِيلَ سَعْدِ بْنِ مُعَاذٍ فِي الْجَنَّةِ أَحْسَنُ مِنْ هَذَا

Wuxuu yiri (nabigu): ”Kay naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, marada afka la iska mariyo ee Sacad ibnu Mucaad Jannada ku leeyahay ayaa ka wanaagsan tan (xariirtan)”[24]

## Bilaal ibnu Rabaax

أَبِي بُرَيْدَةَ قَالَ أَصْبَحَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَدَعَا بِلَالًا فَقَالَ يَا بِلَالُ بِمَ سَبَقْتَنِي إِلَى الْجَنَّةِ مَا دَخَلْتُ الْجَنَّةَ قَطُّ إِلَّا سَمِعْتُ خَشْخَشَتَكَ أَمَامِي دَخَلْتُ الْبَارِحَةَ الْجَنَّةَ فَسَمِعْتُ خَشْخَشَتَكَ أَمَامِي فَأَتَيْتُ عَلَى قَصْرٍ مُرَبَّعٍ مُشْرِفٍ مِنْ ذَهَبٍ فَقُلْتُ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ فَقَالُوا لِرَجُلٍ مِنْ الْعَرَبِ فَقُلْتُ أَنَا عَرَبِيٌّ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ قَالُوا لِرَجُلٍ مِنْ قُرَيْشٍ قُلْتُ أَنَا قُرَشِيٌّ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ قَالُوا لِرَجُلٍ مِنْ أُمَّةِ مُحَمَّدٍ قُلْتُ أَنَا مُحَمَّدٌ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ قَالُوا لِعُمَرَ بْنِ الْخَطَّابِ فَقَالَ بِلَالٌ يَا رَسُولَ اللَّهِ مَا أَذَّنْتُ قَطُّ إِلَّا صَلَّيْتُ رَكْعَتَيْنِ وَمَا أَصَابَنِي حَدَثٌ قَطُّ إِلَّا تَوَضَّأْتُ عِنْدَهَا وَرَأَيْتُ أَنَّ لِلَّهِ عَلَيَّ رَكْعَتَيْنِ فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِهِمَا

Abiburayda waxa laga wariyey inuu yiri: “Rasuulkii Ilaahay (scw) ayaa waabariistay, wuxuuna u yeedhay Bilaal, wuxuuna ku dhahay: Bilaalow maxaad iiga hormartay Jannada? Jannada ma galoba ilaa waxaan maqlaa sanqadhaada hortayda, xalay ayaan galay Jannada waxaan maqlay sanqadhaada. Waxaan tagay qasri afar geesooda oo

---

[23] Sunan Tirmadi: 3747

[24] Bukhaari: 2473 iyo Muslim: 2469

muuqda kana samaysan dahab, waxaan idhi: Qasrigan yaa iska leh? Waxay dhaheen: nin carbeed. Waxaan idhi: aniga ayaa ah Carab! Waxay dhaheen: nin reer Qureesheeda. Waxaan idhi: aniga ayaa ah Qureesh, waxay dhaheen: waa nin ummada Muxamed ka tirsan. Aniga weeye Muxamed, ee Qasriga yaa leh? Waxay dhaheen: Cumar ibnu Khadaab. Bilaalna wuxuu yiri: rasuulkii Ilaahayow, ma adaamo (hadaan adaamaba) waxaan tukadaa laba rakcadood, waysaduna haday iga jabtaba waan wayso qaataa, waxaan u arkaa in Ilaahay laba rakcadood igu leeyahay, markaasuu dhahay Rasuulkii Ilaahay: labadaa (rakcadood darteed ayaad Janno ku gashay)”[25]

## Zayid ibnu Camru ibnu Nufayl

Zayid wuxuu ahaa nin aan soo gaadhin diinta Islaamka hase ahaatee haystay diintii tawxiidka ee ka dabar go’day reer Qureesheed, waana aabihii dhalay Saciid ibnu Zayid iyo Caatika bintu Zayid xaaskii Cumar ibnu Khadaab.

" دخلت الجنة فرأيت لزيد بن عمرو بن نفيل درجتين "

“Jannadaan galay waxaan arkay Zayid ibnu Camruu ibnu Nufayl oo leh laba darajo.”*[26]*

## Xaaritha ibnu Nucmaan

Saxaabigan wuxuu ahaa nin u samo fali jiray waalidkii oo baariya, waxa rasuulka lagasoo wariyey:

عَنْ عَائِشَةَ ، قَالَتْ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " نِمْتُ فَرَأَيْتُنِي فِي الْجَنَّةِ فَسَمِعْتُ صَوْتَ قَارِئٍ يَقْرَأُ ، فَقُلْتُ : مَنْ هَذَا ؟ " ، فَقَالُوا : هَذَا حَارِثَةُ بْنُ

[25] Sunan Tirmadi: 3689
[26] Ibnu Casaakir (2/337/6)

النُّعْمَانِ ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " كَذَلِكَ الْبِرُّ ، كَذَلِكَ الْبِرُّ ، وَكَانَ أَبَرَّ النَّاسِ بِأُمِّهِ " .

Caasha waxa laga wariyey inay tiri: Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: "Waan seexday oo waxaan isku arkay anigoo jooga Jannada, waxaan maqlay cod quraan akhrinaya, waxaan iri: waa kuma? Waxay dhaheen: waa Xaarith binu Nucmaan, rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: "Waa taas baarinimado, waa taas baarinimado, wuxuuna ahaa dadka ka ugu baarisan hooyadii"[27]

## Waraqa ibnu Noofal

Waraqa waa odaygii ay marwo Khadiijo u gaysay nabiga (scw) markii waxyigu kusoo dagay, ee lahaa hadii aan soo gaadho maalinta lagu saarayo waan kuu hiilin lahaa. Odaygan wuxuu haystay diintii tawxiidka, waanu rumeeyey rasuulka (scw), nabiguna wuxuu ku arkay Jannada isagoo jooga.

عن عائشة رضي الله عنها : " أن النبي صلى الله عليه وسلم قال : ( لا تسبوا ورقة فإني رأيت له الجنة ، أو جنتين )

Caasha waxa laga wariyey (Rc) in nabiga (scw) yiri: "Ha caayina Waraqa, maxaa yeelay waxaan arkay isagoo leh janno ama laba janno"[28]

### Zayid ibnu Xaaritha

عن ابن بريدة ، عن أبيه أن رسول الله - صلى الله عليه وسلم - قال : " دخلت الجنة ، فاستقبلتني جارية شابة . فقلت : لمن أنت ؟ قالت : أنا لزيد بن حارثة "

Ibnu Burayda wuxuu aabihii kasoo wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: "Jannada ayaan galay waxa iga hortimid

[27] Musnadu Axmed: 1332
[28] Xaakim (4221)

gabar dhalinyaro ah, waxaan idhi: yaa ku leh? Waxay tidhi: Zayid ibnu Xaaritha”[29]

## Abudaxdaax

Markii ay soo dagtay aayadan

مَّن ذَا الَّذِي يُقْرِضُ اللَّـهَ قَرْضًا حَسَنًا فَيُضَاعِفَهُ لَهُ أَضْعَافًا كَثِيرَةً

(Kiineebaa amaahimaya Ilaahay amaah wanaagsan oo Ilaahayna u laablaabaa laablaabid fara badan).*[30]*

Aayadan waxa maqlay saxaabiga Abudaxdaax oo nabiga (scw) agtiisa fadhiyey, markaasuu dhahay: Rasuulkii Ilaahayoow: Ilaahay ma amaah ayuu inaga rabaa? wuxuu dhahay Nabigu (scw): “Haa, Abudaxdaaxoow” wuxuu yiri: ii dhiib gacantaada Rasuulkii Ilaahayoow, waanu u dhiibay nabigu gacantiisa, wuxuuna yiri: Waxaan beertayda amaahiyey Rabbigay! Abudaxdaax beertiisa waxa ku yaalay lix boqol oo geed timireed, beertana waxa daganayd xaaskiisii Umu Daxdaax iyo caruurtiisii. Kadibna Abudaxdaax wuxuu yimid beertiisii wuxuuna ku dhahay haweenaydiisii: “Umu Daxdaaxeey, kasoo bax beerta waxaan amaahiyey Rabbigaye!” Markaasay tiriUmu Daxdaax: “Wuu guulaystay ganacsigaagii, wuu guulaystay ganacsigaagii”

Rasuulkuna wuxuu yiri:

كم من عذق معلق أو مدلى في الجنة لابن الدحداح

Badanaa inta geed timireed ugasoo lusha jannada Ibnu Daxdaax*[31]*

---

[29] Siyar Aclaam alnubalaa, Dahabi: Zayid ibnu Xaaritha.

[30] Suuratu Albaqarah: 245

[31] Saxiix Muslim: 965

## Jacfar ibnu Abudaalib

" دَخَلْتُ الْجَنَّةَ الْبَارِحَةَ فَنَظَرْتُ فِيهَا فَإِذَا جَعْفَرٌ يَطِيرُ مَعَ الْمَلَائِكَةِ وَإِذَا حَمْزَةُ مُتَّكِئٌ عَلَى سَرِيرٍ " .

”Jannada ayaan galay xalaytoole waanan fiiriyey mise Jacfar ayaa la duulaya Malaa'ikta, Xamsana wuxuu ku dingiigaa sariir dusheeda”[32]

## Cabdilaahi ibnu Salaam

Waa saxaabi reer bani israa'iila oo islaamay, waxa loogu bishaareeyey Jannada:

عَنْ عَامِرِ بْنِ سَعْدِ بْنِ أَبِي وَقَّاصٍ عَنْ أَبِيهِ قَالَ مَا سَمِعْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ لِأَحَدٍ يَمْشِي عَلَى الْأَرْضِ إِنَّهُ مِنْ أَهْلِ الْجَنَّةِ إِلَّا لِعَبْدِ اللَّهِ بْنِ سَلَامٍ

Caamir ibnu Sacad ibnu abi waqaas wuxuu aabihii kasoo wariyey inuu dhahay: ”Maan maqlin nabiga (scw) oo ku leh qof soconaya dhulka dushiisa inuu yahay ehelka Jannada Cabdilaahi ibnu Salaam mooyee”[33]

## Cukaasha ibnu Muxsin

Cukaasha wuxuu kamid yahay todobaatanka kun ee jannada xisaab la'aan ku galaya.

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ يَدْخُلُ مِنْ أُمَّتِي الْجَنَّةَ سَبْعُونَ أَلْفًا بِغَيْرِ حِسَابٍ فَقَالَ رَجُلٌ يَا رَسُولَ اللَّهِ ادْعُ اللَّهَ أَنْ يَجْعَلَنِي مِنْهُمْ قَالَ اللَّهُمَّ اجْعَلْهُ مِنْهُمْ ثُمَّ قَامَ آخَرُ فَقَالَ يَا رَسُولَ اللَّهِ ادْعُ اللَّهَ أَنْ يَجْعَلَنِي مِنْهُمْ قَالَ سَبَقَكَ بِهَا عُكَّاشَةُ

Abihurayra waxa laga wariyey in nabigu (scw) yiri:
“Jannada waxa umadayda ka galaya todobaatan kun oo aan xisaab lahayn, nin ayaa yiri: rasuulkii Ilaahayow:

---

32 المستدرك على الصحيحين » كتاب معرفة الصحابة رضي الله تعالى عنهم » ذكر مناقب جعفر بن أبي طالب بن عبد المطلب بن هاشم

33 Bukhaari: 3601

Ilaahay ii bari inuu iga yeelo, wuxuu dhahay: Ilaahow ka yeel kuwaas. Mid kale ayaa istaagay oo yiri: Rasuulkii Ilaahayow, Ilaahay ii bari ha iga yeelo kuwaase, wuxuu yiri: Cukaasha ayaa kaagasoo horreeyey.[34]

## Cumayr ibnu Xamaam

Saxaabigan sharafta leh wuxuu ka qayb galay dagaalkii Badar, wuxuuna maqlay rasuulkii Ilaahay (scw) oo leh: ”Ukaca Janno ballaceedu la eegyahay samada iyo dhulka”

Saxaabigii Cumayr ibnu Xamaam wuxuu yiri: Rasuulkii Ilaahayow, ma janno ballaceedu cirka iyo dhulka la eegyahaybaa? Nabigu wuxuu yiri: Haa. Saxaabigii wuxuu yiri: Bakhin Bakhin (waa eray afcarbeeda oo ku tusinaya la yaab).

Nabiga (scw) wuxuu waydiiyey: Maxaa kugu kallifay inaad dhahdo Bakhin Bakhin? Wuxuu ku jawaabay: waa rajo aan rajaynayo inaan kamid noqdo ehelkeed. Rasuulkii Ilaahay wuxuu ku yiri: ”Adigu ehelka Jannada kamid baad tahay.”

Saxaabigii wuu farxay, wuxuuna lasoo baxay dhawr xabo oo timira, markaasuu yiri: Ilaahbaan ku dhaartee waa nolol dheer intaan cunayo tan (timirta) kadibna goobtii dagaalka ayuu isku tuuray waanu shahiiday, Ilaahay raali haka ahaadee.

## Thaabit ibnu Qays:

يا ثابت ، ألا ترضى أن تعيش حميدا ، وتقتل شهيدا ، وتدخل الجنة ؟ " قال :
بلى ، يا رسول الله ، قال : فعاش حميدا ، وقتل شهيدا يوم مسيلمة الكذاب .

”Thaabitow miyaanad raali ku ahayn inaad ku noolaato nolol la mahadiyey, lagu dilo adigoo shahiida iyo inaad

[34] Saxiix Muslim: 216

gasho Jannada? Wuxuu yiri: haa, rasuulkii Ilaahayow. Wuxuu yiri: nolol la mahadiyey ayuu noolaa, shahiid isagoo ahna waa la dilay maalintii Musaylamihii beenaalaha ahaa"[35]

## Ninkii Ilaahay runta u sheegay Ilaahayna u rumeeyey

Waxa nabigeena (scw) u yimid nin reer baadiye ahaa, wuxuuna ka dalbaday inuu raaco. Nabigu (scw) wuu ka aqbalay, wuxuuna saxaabadiisa u dardaarmay inay daryeelaan.

Maalintii danbe ayey muslimiintii weerar qaadeen, wayna guulaysteen kadibna qaniimadii ayaa qeybtiisa la siiyey ninkii reer baadiyaha ahaa. Ninkii ayaa waydiiyey, maxaa xoolahan la igu siiyey? Nabiga (scw) ayaa ku dhahay: waa dheeftii ama qeybtii aad qaniimada ku lahayd.

Ninkii wuxuu yiri: Anigu inaan xoolo qaato kuuman soo raacin, waxaan kuusoo raacay in leeb igaga dhaco halkaas hunguriga oo dhinaca kale ka baxo, kadibna aan dhinto oo aan jannada galo. Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu ku yiri: "Hadaad Ilaahay run u sheegto wuu kuu rumayn"

Mudo yar kadib, waxa dib u bilowday dagaalkii waxaana nabiga (scw) hortiisa la mariyey ninkii oo la sido, sidoo kalena hunguriga ay kaga dhacday leeb oo dhinaca kale uga baxay, markaasuu Rasuulku (scw) dhahay: "Isagu ma isagiibaa?" Waxay dhaheen saxaabadii: Haa. Wuxuu

[35] Mustadrak cala alsaxiixay: 5084

Rasuulku (scw) dhahay: “Run ayuu Ilaahay u sheegay, Ilaahayna wuu u rumeeyey”[36]

## Ninkii reer baadiyaha ahaa ee faralka ilaaliyey

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ أَعْرَابِيًّا أَتَى النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَقَالَ دُلَّنِي عَلَى عَمَلٍ إِذَا عَمِلْتُهُ دَخَلْتُ الْجَنَّةَ قَالَ تَعْبُدُ اللَّهَ لَا تُشْرِكُ بِهِ شَيْئًا وَتُقِيمُ الصَّلَاةَ الْمَكْتُوبَةَ وَتُؤَدِّي الزَّكَاةَ الْمَفْرُوضَةَ وَتَصُومُ رَمَضَانَ قَالَ وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ لَا أَزِيدُ عَلَى هَذَا فَلَمَّا وَلَّى قَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَنْ سَرَّهُ أَنْ يَنْظُرَ إِلَى رَجُلٍ مِنْ أَهْلِ الْجَنَّةِ فَلْيَنْظُرْ إِلَى هَذَا

Abihurayra waxa laga wariyey  (Rc) in nin reer baadiye ahaa u yimid nabiga (scw) oo uu ku yiri: waxaad i tustaa camal hadii aan la yimaado aan janno ku galayo, wuxuu yiri: ”waa inaad Ilaahay caabudaa oo aanad shirki ula imanin, salaada waajibka ah aad oogtaa, zakada waajibka ahna aad bixisaa iyo soonka ramadaan ood soomtaa” wuxuu yiri: ilaahbaan ku dhaartee waxna kuma darayo, markuu jeestay ayuu yiri nabigu (scw): ”cidii ay farxad galinayso inay aragto nin ehelka jannada kamida ha eego ninkaas”[37]

## Ninkii jeclaaday suuratu al-ikhlaas:

Waxa Imaamu Albukhaari kusoo saaray Saxiixiisa, in Caasha tidhi: "Nabiga ayaa nin ku daray koox duulaysa, wuxuuna ahaa (ninkaasi) mid salaada tujin jiray, isagoo ku gabogabaynaya (Qul huwa Allahu Axad), markii ay soo laabteen ayey saxaabadii u sheegtay nabiga (scw), markaasuu dhahay: "Waydiiya sababtuu sidaa u samaynayey" way waydiiyeen, wuxuuna dhahay: Sababtoo ah waa sifooyinka Raxmaanka, aniguna waan jeclahay inaan

[36] [Sunan Al-nisaa:1953 ]

[37] Bukhaari:1333

akhriyo, markaasuu Rasuulku (scw) dhahay; "U sheega inuu Ilaahay jecelyahay" 38

## Ninkii qalbigiisu wanaagsanaa

Maalin nabiga iyo saxaabadiisii oo wada fadhiya ayuu rasuulku ku dhahay: “Iminka waxa idiinsoo baxay nin kamida ehelka Jannada” kadibna waxa soo baxay nin soo wayso qaatay oo biyihii gadhkiisa ay ka da’ayaan oo gacantana ku sita kabihiisa. Maalintii ku xigtay iyo maalintii sadexaadba isla ninkii ayaa soo baxay.

Dabadeedna saxaabiga Cabdilaahi ibnu Camaru ayaa doonay inuu ogaado sababta ninkan sadex jeer loogu bishaareeyey jannada. Cabdilaahi ninkii wuxuu ka dalbaday inuu marti qaado sadex maalmood maadaama ay isku dhaceen isaga iyo aabihii.

Sadexdii maalmood ayuu Cabdilaahi baadhayey xaalada ninkan, ilaa uu ku dhowaaday inuu xaqiro ninkan camalkiisa. Maalintii sadexaad ayuu Cabdilaahi yiri: adeer ismaanan qabsanin aabahay ee nabi Muxamed ayaa sadex jeer kuugu bishaareeyey jannada, waxaanan doonay inaan ogaado sababta jannada aad ku gashay, manaan arkin camal badan oo aad qabato. Ninkii ayaa yiri: xaaladaydu waa sidaa aad aragtay, kaliya hadii laga maarmi waayo anigu qof Muslima ma xaasido, cuqdadna uguma qaado nicmo Ilaahay siiyey. Cabdilaahi wuxuu yiri: waa taas ta ku gaadhsiisay darajadaas ee aanan anagu awoodin[39]

[38] Saxiix Albukhaari, xadiiska 7375

[39] Musandu Axmed:12720

## Ninkii shaqo yar qabtay ee ajar wayn loogu abaal guday

أَتَى النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ رَجُلٌ مُقَنَّعٌ بِالْحَدِيدِ فَقَالَ يَا رَسُولَ اللَّهِ أُقَاتِلُ أَوْ أُسْلِمُ قَالَ أَسْلِمْ ثُمَّ قَاتِلْ فَأَسْلَمَ ثُمَّ قَاتَلَ فَقُتِلَ فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَمِلَ قَلِيلًا وَأُجِرَ كَثِيرًا

Nabiga (scw) waxa uyimid nin xidhan biraha (dagaalka) wuxuuna yiri: rasuulkii Ilaahayow ma dagaalama mise waan islaamaa? Wuxuu yiri (nabigu): islaam kadibna dagaalan. Waanu dagaalamay oo la dilay, wuxuuna yiri rasuulkii Ilaahay (scw): "camal yar ayuu la yimid, waxa lagu abaal mariyeyna wax badan"[40]

## Maaciz ibnu Maalik

Maaciz ibnu Maalik wuxuu ahaa saxaabi kamid ah saxaabada Rasuulka (scw), waxa dhagar u maleegay Shaydaanka oo wuxuu la kali noqday gabadh reer ansaar ah, kadibna shaydaan ayaa sadaxeeyey oo wuxuu ku dhacay faaxishadii, Ilaahaybaan ka magan galnaye.

Kolkuu danbigii waynaa ku dhacay saxaabigaasi ayuu shaydaankii wax qurxinayeyna iskaga tagay, kolkaasuu Maaciz murugooday, wuxuuna canaantay naftiisa, isagoo ka cabsanaya ciqaabka Ilaahay.

Maaciz oo danbigii waynaa gubayo qalbigiisa ayaa u yimid Rasuulka (scw) wuxuuna ku yiri: Rasuulkii Ilaahayoow idaahiri, kolkaasuu Rasuulku (scw) kasii jeestay, hadana Maaciz wuxuu ku celiyey eraydiisii, Rasuulkii Ilaahow waan

[40] Bukhaari: 2653

zinaystaye i daahiri, markaasuu nabigu dhahay (scw): dib u noqo oo Ilaahay danbi dhaaf waydiiso, hadana Maaciz intuu tagay ayuu dib usoo laabtay markaasuu dhahay: Rasuulkii Ilaahayoow idaahiri, hadana nabigu wuxuu ku dhahay: dib u noqo oo Ilaahay u toobad keen, hadana mar sadexaad ayuu uyimid, nabiguna wuxuu lahaa waar hoog kuu sugnaaye iska tag oo Ilaahay danbi dhaaf waydiiso, balse Maaciz markii afaraad ayuu soo laabtay markaasuu yiri: Rasuulkii Ilaahayow i daahiri, markaasuu Nabigu dhahay: Ninkan miyuu waalanyahay? Ma caqligiisa ayaan taam ahayn? waxay saxaabadii tiri: Rasuulkii Ilaahayoow wuu fayo qabaa, wuu qabaa caqligiisa. Hadana nabigu (scw) wuxuu dhahay: waar ma garanaysaa Zinadu waxay tahay? wuxuu dhahay: Haa, Rasuulkii Ilaahayoow, waxaan u tagay gabadh sida ninka iyo xaas is qabaa ay u dhex marto xiriirka qoysnimo.

Markaasuu Rasuulku dhahay: malaha khamri ayuu soo cabay ee bal ursada afkiisa, saxaabadiina afkiisa ayey ursatay waxayna dhaheen: Muu cabin khamri, kadibna nabigu markuu arkay in Maaciz afar jeer isku markhaati furay oo aanu ordina ayuu faray in la rajmiyo, waana la rajmiyey.[41]

Kolkii uu dhintay saxaabigii ayaa laba nin waxay dhaheen: Ma aragtay kan Ilaahay intuu asturay aan naftiisa u joojin illamaa laga rajmiyey sida eyda oo kale!!

Nabigu wuu maqlay hadalkodii kolkaasuu ka aamusay mudo yar, kadibna waxay soo mareen wado uu yaalo dameer bakhtiyey oo lugtiisu faaxday, markaasuu dhahay: aaway

[41] Bukhaari: 4970

hebel iyo hebel? waxay dhaheen: waanakan Rasuulkii Ilaahow. Wuxuu dhahay: Cuna dameerkaas bakhtiyey!! markaasay dhaheen: Nabigii Ilaahow yaa cuni karay bakhtigan? wuxuu dhahay: xantii aad xamateen walaalkiin Maaciz ayaa ka xun inaad cuntaan dameer bakhtiyey. Markaasuu dhahay nabigu (scw): Ilaahbaan ku dhaartee Maaciz hada wuxuu ku dabaalanayaa wabiyada Jannada. [42]

## Ninkii madoobaa ee Jannada ku guulaystay

عَنْ أَنَسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ ، أَنَّ رَجُلا أَسْوَدَ أَتَى النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَآلِهِ وَسَلَّمَ ، فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ ، إِنِّي رَجُلٌ أَسْوَدُ ، مُنْتِنُ الرِّيحِ ، قَبِيحُ الْوَجْهِ ، لا مَالَ لِي ، فَإِنْ أَنَا قَاتَلْتُ هَؤُلاءِ حَتَّى أُقْتَلَ ، فَأَيْنَ أَنَا ؟ قَالَ : " فِي الْجَنَّةِ " ، فَقَاتَلَ حَتَّى قُتِلَ ، فَأَتَاهُ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَآلِهِ وَسَلَّمَ فَقَالَ : " قَدْ بَيَّضَ اللَّهُ وَجْهَكَ ، وَطَيَّبَ رِيحَكَ ، وَأَكْثَرَ مَالَكَ "

Anas ibnu Maalik waxa laga wariyey in nin madow u yimid nabiga (scw) oo ku yiri: rasuulkii Ilaahayow, anigu waxaan ahay nin madow oo urtiisu qadhmuuntahay, wajigiisuna foolxunyahay, lacagna ma haysto, ee hadii aan la dagaalamo kuwaas ilamaa la i dilo, xageen tagayaa? Wuxuu yiri: jannada. Wuu dagaalamay, waana la dilay, waxaana loo keenay nabiga (scw) wuxuuna yiri: ”Ilaahay wajigaagii wuu kuu nuuriyey, urtaadiina wuu udgooneeyey, xoolahaagana wuu badiyey” [43]

## Cabdilaahi ibnu Camru ibnu Xaraam:

Cabdilaahi wuxuu kamid ahaa saxaabadii ku shahiida dagaalkii Uxud, waana aabihii dhalay Jaabir ibnu Cabdilaahi.

---

[42] Abudawuud: 4428

[43] المستدرك على الصحيحين: 2395

Markuu dhintay wuxuu rasuulku ka warramaya in Ilaahay si toosa ula hadlay oo uu ka dalbaday inuu aduunkii dib ugu laabto si markale Ilaahay jidkiisa loogu dilo. Ilaahay wuxuu yiri: maya, hadda kahor ayaan go'aamiyey in qof dhintay aanu dib ugu laabanin aduunyada. Cabdilaahi wuxuu yiri: hadaba rabbiyow, warkayaga gaadhsii kuwii naga danbeeyey.[44] Waana sababta ay kusoo dagtay aayadani:

وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّـهِ أَمْوَاتًا ۚ بَلْ أَحْيَاءٌ عِندَ رَبِّهِمْ يُرْزَقُونَ ﴿١٦٩﴾

Ha u malaynin in kuwa loo dilay jidka Ilaahay ay dhinteen, way noolyihiin oo rabbigood agtooda ayaa laga arzaaqaa (169)[45]

## Xaadib ibnu Abi Baltaca

Saxaabigan wuxuu ka qaybgalay dagaalkii Badar, dadkii ka qaybgalay dagaalkaasina waa ehlu janno dhamaantood.

عَنْ جَابِرٍ أَنَّ عَبْدًا لِحَاطِبٍ جَاءَ نَبِيَّ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَشْكُو حَاطِبًا ، فَقَالَ : يَا نَبِيَّ اللَّهِ ، لَيَدْخُلَنَّ حَاطِبٌ النَّارَ . فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " كَذَبْتَ لَا يَدْخُلُهَا ، إِنَّهُ قَدْ شَهِدَ بَدْرًا وَالْحُدَيْبِيَةَ "

Jaabir waxa laga wariyey in adoon uu lahaa Xaadib u yimid nabiga (scw) isagoo cabanaya, wuxuuna yiri: nabigii Ilaahayow, xaadib naartuu galayaa. Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: "Beenbaad sheegtay, isagu wuxuu ka qaybgalay Badar iyo Xudaybiya"[46]

---

[44] Tirmadi:3010

[45] Suurat Alcimraan:169

[46] المعجم الكبير : 3064

# Haweenkii Jannada loogu bishaareeyey

## Khadiija bintu Khuweylid

Xaaskii nabiga (scw) ee Khadiija bintu Khuweylid waxa loogu bishaareeyey Jannada. Maalin ayaa Malakul Jibriil u yimid nabiga (scw) wuxuuna ku dhahay: Rasuulkii Ilaahayoow, waa tan Khadiija soo sida weel cunto ku jirto ee marka ay kuu timaado iga gaadhsii salaan katimid xaga Ilaahay iyo anigaba, uguna bishaaree guri jannada ku yaala oo ka samaysan macdanta dheemanta oo aan buuq iyo daal toona lahayn.[47]

## Caasha bintu Abibakar

Nabigu wuxuu arkay riyo tusinaysa inuu guursanayo Caasha waxaanu yiri; (Hurdada ayaa laygu kaa tusay laba jeer, waxaan arkay nin kugu sida dacal xariira oo dhahaya: Tani waa xaaskaagii, waanan daahfuray, mise waa adiga. Aniguna waxa dhahay: hadii ay xaga Ilaahay ka sugnaatey way ahaan) [48]

Dhanka kale Caasha waxay nabiga waydiisay: Rasuulkii Ilaahayoow, yaa kamid ah xaasaskaaga Jannada, wuxuu dhahay: ”Adigu kamid ayaad tahay.”[49]

## Faadima bintu Muxamed

Nabigu (scw) wuxuu ku qoray dhulka afar khad, kolkaasuu yiri: “ma garanaysaan khadadkan? Waxay dhaheen: Ilaahay

---

[47] Muslim [2432]

[48] [Sahih Al-Jamic: 915]

[49] Xaakim fi Almustadrak [4/14]

iyo Rasuulkiisa ayaa og, wuxuu yiri: Haweenka Jannada waxa ugu fadli badan Khadiija bintu khuweylid, Faadima bintu Muxamed, Aasiya bintu Musaaxim, iyo Maryama bintu Cimraan..”[50]

Sidoo kale Faadima waa marwada hogaaminaysa dumarka caalamiinta sida Caasha Ilaahay raali haka ahaadee ay kasoo warisay:
Markii nabigii Ilaahay bukooday (furaashkii geerida) ayay Faadima usoo gashay, markaasuu nabigu dhagta war ugu sheegay wayn oyday, hadana war kale ayuu u sheegay wayna qososhay.
Caasha (Rc) ayaa waydiisay Faadima kadib markii rasuulka la oofsaday, waxayna Faadima tiri: markii hore wuxuu ii sheegay inuu xanuunkan u ugeeriyoonayo waanan ooyay, markii danbana wuxuu ii sheegay inaan ahay madaxda dumarka jannada waanan qoslay. [51]

## Umu Suleym Alqumaysaa (hooyadii Anas ibnu Maalik)

Umu Suleym waxay wiilkeedii Anas ibnu Maalik adeege uga dhigtay Rasuulka (scw), waana gabadhii maherkeedu ahaa islaamka, ee arrintii la yaabka ahaydna ku samaysay odaygeedii Abudalxa Ilaahay raali haka ahaadee.
Waxa imaamu Muslim soo saaray in Rasuulku dhahay: “Jannada ayaan galay, waxaanan maqlay sanqadh socod,

[50] Imaam Axmed musnadka [4/409]
[51] Bukhaari: 3426

waxaana iri waa kuma? Waxay dhaheen: waa Qumaysaa bintu Malxaan (Umu Sulaym).[52]

## Haweenaydii suuxi jirtay Saciira Al-asadiya, ama Umu Zufar

Haweenaydana way suuxi jirtay waxaana muuqan jiray cawradeeda, kadibna nabiga (scw) ayey u timid oo waydiisatay inuu Allah u baryo inuu ka dulqaado dhibka suuxitaanka, markaasuu Rasuulku dhahay: hadaad rabto waad ku sabri oo Jannada ayaad gali, hadaad rabtana Alle ayaan kuu baryi hakaa dulqaadee, markaasay tiri: Rasuulkii Ilaahayoow, waan ku sabrayaa ee ii bari Ilaahay markaan suuxo inaanay cawradaydu muuqan, kadibna Rasuulkaa u baryey Ilaahay.[53]

## Miskiinadii timirta ukala jeexday labadeedii hablood

Sida Imaamu Muslim soo saaray waxay Caasha tidhi: Haweenay miskiinad ah oo wadata laba hablood oo yaryar ayaa ii timid, waxaanan siiyey sadex xabo oo timir ah, kadibna gabdhihii yaryaraa mid kasta xabad timir ah ayey siiyey, kii sadexaadna ayadaa is tiriafka gasho, balse labadii hablood ayaa ka dalbaday (inay siiso) kadibna intay xabadii timirta ahayd kala jeexday ayey siiyey gabdhihii yaryaraa.

[52] Muslim [2456]
[53] Bukhaari [5328]

Arrintaa ayey Caasha la yaabtay markaasay uga warrantay nabiga (scw) wuxuuna nabigu dhahay: “Janno ayaa u waajibtay, ama Naarta ayaa laga xoreeyey”[54]

## Haweenaydii wanaajisay jiiraankeeda

Nabiga waxa lagu dhahay: Rasuulkii Ilaahayoow heblaayo waxay tukataa habeenka, wayna soomtaa balse waxay carrabkeeda ku dhibtaa jiiraankeeda, wuxuu dhahay nabigu: Khayr malaha ayadu waa ehelka naarta.

Waxay dhaheen Rasuulkii Ilaahayo: heblaayo salaadaha waajibka ah oo kaliya ayey tukataa, cidna ma dhibto, wuxuu dhahay nabigu “Ayadu waa ehelka Jannada”[55]

## Umu Ayman, Barka Alxabashiyah

Umu Ayman waa haweenaydii soo korisay nabiga (scw), waxaanu nabigu ugu bishaareeyey Jannada, wuxuuna dhahay: cidii ay farxad galinayso inuu guursado haweenay ehelka Jannada kamid ah ha guursado Umu Ayman.[56]

Waxa guursaday Zayid ibnu Xaaritha oo ahaa mawlihii rasuulka iyo saxaabigii nabigu aadka u jeclaa, waxayna u dhashay Usaama ibnu Zayid oo isagana nabigu (scw) aad u jeclaa.

## Umu Camaara

Umu Camaara waxay kamid ahayd labadii haween ee nabiga islaamnimada kula heshiiyey habeenkii baycada

---

[54] Muslim [2630]

[55] Adab almufrad, bukhaari [114]

[56] Siyar aclaam alnubalaa [umu ayman]

Caqabada labaad, sidoo kale Umu Camaara waxay ka qayb gashay dagaalkii Uxud ayadoo difaacaysa nabiga (scw), kolkaasuu nabiguna ugu duceeyey isagoo leh: Ilaahayoow reer Umucamaara rafiiqayga Jannada ka yeel"

Dhanka kale Umu Camaara waxay ka qaybgashay heshiiskii saxaabadu geedka hoostiisa ay nabiga kula galeen, ee Ilaahayna kaga raalida noqday (baycatu Alridwaan).

عَنْ جَابِرٍ عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنَّهُ قَالَ لَا يَدْخُلُ النَّارَ أَحَدٌ مِمَّنْ بَايَعَ تَحْتَ الشَّجَرَةِ

Jaabir waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) inuu dhahay: "Naarta ma galayo qof heshiiska (baycada) ku galay geedkan hoostiisa"[57]

## Sumaya bintu Khayaad

Sumaya bintu Khayaad waa shahiidadii ugu horeysay ee Islaamka, waxa islaamay ayada, odaygeedii Yaasir, seedigeed Cabdulaahi iyo wiilkeeda Cammaar, kadibna waxa lagu dhibay islaamnimadooda kolkaasuu Rasuulku dhahay: "Samra reer aala-Yaasiroow, ballanteenu waa Jannadee" Dabadeedna habaarqabe Abujahal ayaa dilay oo waran kaga dhuftay xubinkeeda taranka.

## Umu Xaraam bintu Malxaan

Umu Xaraam bintu Malxaan waxa qabay saxaabiga Cubaada ibnu Saamit, waxayna habaryar u ahayd nabiga (scw), nabiguna gurigeeda wuu booqan jiray. Kadibna maalin ayuu nabigu gurigeeda seexday wuxuuna soo kacay isagoo

[57] Sunan Tirmadi: 4653

qoslaya, markaasay Umu Xaraam tiri: Rasuulkii Ilaahayow maxaa kaa qosliyey? Wuxuu dhahay: waxa la iisoo bandhigay qoom umadayda kamid ah oo fuulaya badda ayagoo duulaya, markaasay tiri: rasuulkii Ilaahayoow Alle ii bari aan kamid noqdo kuwaase? Nabiguna wuu u baryey…

Dabadeedna xilligii Mucaawiya ayay fuushay dooni ayada iyo ninkeedii, waxayna ku duuleen Qubrus kadibna faras ayey ka dhacday, waxayna dhimatay ayadoo shahiidad ah.[58]

## Xafsa bintu Cumar

Xaaskii nabiga ee Xafsa bintu Cumar (Rc) waxay is qabteen Rasuulka (scw) kolkaasu nabigu ku furay hal dalqad, kadibna Malakul Jibriil ayaa u yimid nabiga (scw) oo ku dhahay: "Soo cesho Xafsa, waa gabadh soon badan oo salad badane, waana xaaskaaga Jannada"[59]

## Asma bintu Abibakar

Asma waxay u diyaarisay nabiga iyo aabaheed Abubakr cunto saad ah maalintii uu hijroonayey nabiga iyo saaxiibkii Abubakar. Kadibna waxay halmaantay xadhigii lagu xidhayey weelkii cuntadu ay ku jirtay, markaasay maradeedii ka jeexday laba daraf waxayna ku xidhay weelkii cuntadu ku jirtay, kolkaasuu nabigu dhahay: "labadaas dacal wuxuu Ilaahay kuugu badalay laba dacal oo Jannada ah"[60]

---

[58] Bukhaari [2636]

[59] Dabari, Mucjam Alkabiir [934]

[60] Ibnu Casaakir, taariikh dimishiq [6/69]

## Faadima bintu Asad: (Cali ibnu Abidaalib hooyadii):

Faadima Ilaahay raali haka ahaadee way islaamtay, wayna hijrootay. Markii ay geeriyootayna nabiga (scw) ayaa aaskeedii ka qaybgalay, waxa kafan looga dhigay qamiiskii rasuulka (scw). Nabiguna wuxuu seexday xabaasheedii.[61]

### Rubayac bintu Mucawad

Rubayac waxa dhalay Mucawad ibnu Xaarith oo isaga iyo walaalkii Cawf ay ahaayeen labadii dhalinyaro ee dagaalkii Badar dilay gaalkii Abujahal.

Rubayac waxay ka qaybgashay heshiiskii Ridwaan ee geedka hoostiisa, dadka baycadaas ka qaybgalayna waa ehlu janno.

عَنْ جَابِرٍ عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنَّهُ قَالَ لَا يَدْخُلُ النَّارَ أَحَدٌ مِمَّنْ بَايَعَ تَحْتَ الشَّجَرَةِ

Jaabir waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) inuu dhahay: ”Naarta ma galayo qof heshiiska (baycada) ku galay geedkan hoostiisa”[62]

## Kabshah bintu Raafic: (Sacad ibnu Mucaad hooyadii)

Kabshah waxa wiilkeedii Camru ibnu Mucaad ku geeriyooday dagaalkii Uxud. Dagaalkii markuu dhamaaday ayuu nabigu soo galay Madiina isagoo saaran faras uu hogaaminayo Sacad ibnu Mucaad, waxaana ka hortimid Kabshah. Sacad ayaa rasuulka ku yiri: waa hooyaday.

---

[61] Siyar aclaam alnubalaa: faadima bintu asad
[62] Sunan Tirmadi: 4653

Rasuulkuna wuxuu ku yiri: ”Umu Sacadeey ku bishaarayso una bishaaree ehelkoodii (shuhadadii Uxud) in ay isu raaceen jannada dhamaantood ayna u shafeeco qaadayaan ehelkooda”

## Zaynab bintu Jaxsh

Zaynab waxay kamid tahay hooyooyinka mu’miniinta, waana gabadhii lagasoo maheriyey samada. Rasuulku (scw) wuxuu yiri: ”ta idiinku gacmo dheer ayaa ii hor imanaysa” [63]

Dabcan rasuulku (scw) waa ehlu janno, dumarkiisuna waa ehlu janno. Gabadhii ugu hor dhimatay haweenkii rasuulkuna waxay ahayd Zaynab bintu Jaxsh. Gacma dheeraantana waxa looga jeeda sadaqada badan.

---

[63] Muslim: 2452

# Jannadu miyey abuurantahay iminka mise waa la abuuri doonaa?

Ibnu Qayyim (AHU) wuxuu yidhi:

Kamaysan suulin saxaabadii rasuulkii Ilaahay, taabiciintii, ehlu sunnaha iyo xadiisku, fuqahada islaamka, ehelka tasawufka iyo suhdigu, inay rumaysanyihiin (jiritaanka Jannada) iyo sugideedaba, ayagoo xiganaya daliilada kitaabka iyo sunnada iyo waxa lagama maarmaanka ay tahay in la ogaado ee ah wararkii rususha kii u horeeyey ilaa kii u danbeeyey ay ugu yeedhayeen ummdaha iyo wixii ay u sheegayeen.

Marka laga reebo Muctasilada iyo Qadariyada oo inkiray in jannadu abuurantahay iminka, waxayna dhaheen: Ilaahaybaa abuuri doona maalinta Qayaame.[64]

Waxayna dhaheen: hadii boqor daar dhiso oo uu ku diyaariyo noocyo kala duwan oo cunto ah oo uu dadkana u diido, oo aanay usuurtoobayn inay galaan qarniyo badan, wixii boqorku sameeyey kuma jirto xikmad.

Caqligooda ayay ku qiyaaseen, ficilkii bani aadamkana waxay ku shabaheen ficilkii Ilaahay (swt). Salafkuna waxay caqiidadooda ku cadeeyeen in jannada iyo naartuba ay abuuranyihiin oo ay jiraan.

---

[64] حادي الأرواح إلى بلاد الأفراح/ 24

## Daliilada ku tusinaya jiritaanka Jannada:

### Daliilka 1aad:

وَلَقَدْ رَآهُ نَزْلَةً أُخْرَىٰ ﴿١٣﴾ عِندَ سِدْرَةِ الْمُنتَهَىٰ ﴿١٤﴾ عِندَهَا جَنَّةُ الْمَأْوَىٰ ﴿١٥﴾

Dhab ahaantii nabigu wuu arkay Jibriil mar kale (13) Sidratul Muntahaa agteeda (14) Halkaana waxa ahaatay Jannadii hoyga ahayd (15)[65]

Sida aayadan sharafta leh cadaynayso nabigu wuxuu malaku Jibriil ku arkay Sidaratu Almuntahaa agteeda, halkaana waxa ahaatay Jannadii Raxmaanka. Sida xadiiska saxiixaynka ku yaalana uu tilmaamayo, wuxuu rasuulku sheegay inuu galay jannada

ثُمَّ انْطَلَقَ حَتَّى أَتَى بِي السِّدْرَةَ الْمُنْتَهَى فَغَشِيَهَا أَلْوَانٌ لَا أَدْرِي مَا هِيَ ثُمَّ أُدْخِلْتُ الْجَنَّةَ فَإِذَا فِيهَا جَنَابِذُ اللُّؤْلُؤِ وَإِذَا تُرَابُهَا الْمِسْكُ

Kadibna wuu baxay illaamaa uu i keenay Sidratu Almutaha, waxaana daboolay midabyo aan garanayn waxay yihiin, kadibna waxa la i galiyey jannada mise waxa ahaaday xidhmooyin dheemana, ciideeduna waa miski[66]

### Daliilka 2aad:

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عُمَرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ إِنَّ أَحَدَكُمْ إِذَا مَاتَ عُرِضَ عَلَيْهِ مَقْعَدُهُ بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ إِنْ كَانَ مِنْ أَهْلِ الْجَنَّةِ فَمِنْ أَهْلِ الْجَنَّةِ وَإِنْ كَانَ مِنْ أَهْلِ النَّارِ فَمِنْ أَهْلِ النَّارِ فَيُقَالُ هَذَا مَقْعَدُكَ حَتَّى يَبْعَثَكَ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ

Cabdilaahi ibnu Cumar waxa laga wariyey Ilaahay raali haka ahaadee in rasuulkii Ilaahay (scw) yidhi: ”Midkiin markuu dhinto waxa loo bandhigaa booskiisa galin hore iyo galin

---

[65] Suuratu Annajmi: 13, 14, 15

[66] Bukhaari:3164

danbeba, haduu ehelka jannada kamid yahay waa ehelka jannada, haduu ehelka naarta yahayna waa ehelka naarta, waxa la dhahayaa: kani waa booskaagii illamaa Ilaahay kaasoo saarayo maalinta Qayaame”[67]

## Daliilka 3aad:

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

فينادي مناد من السماء أن قد صدق عبدي فأفرشوه من الجنة وافتحوا له بابا إلى الجنة وألبسوه من الجنة قال فيأتيه من روحها وطيبها قال ويفتح له فيها مد بصره

”Waxa laga dhawaaqaya xaga samada (ayadoo la leeyahay) adoonkaygu runbuu sheegay, ee furaash uga keena jannada, albaabna uga fura jannada, una galiya dharka jannada, wuxuu yiri: waxa u imanaya udugeedii iyo wanaageedii, waana loo furayaa araggiisu meesha uu gaadho”[68]

## Daliilka 4aad:

عن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال إنما نسمة المؤمن طائر في شجر الجنة حتى يبعثه الله عز وجل إلى جسده يوم القيامة

Rasuulkii Ilaahay (scw) waxa la wariyey inuu yiri: ”Ruuxda mu’minku waa shinbir joogta dhirta jannada illamaa Ilaahay kasoo bixinayo jidhkiisa maalinta Qayaame”[69]

## Daliilka 5aad:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ ، عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : " لَمَّا خَلَقَ اللَّهُ الْجَنَّةَ وَالنَّارَ أَرْسَلَ جِبْرِيلَ إِلَى الْجَنَّةِ ، فَقَالَ : انْظُرْ إِلَيْهَا وَإِلَى مَا أَعْدَدْتُ لِأَهْلِهَا فِيهَا ، قَالَ : فَجَاءَهَا وَنَظَرَ إِلَيْهَا وَإِلَى مَا أَعَدَّ اللَّهُ لِأَهْلِهَا فِيهَا ، قَالَ : فَرَجَعَ إِلَيْهِ قَالَ : فَوَعِزَّتِكَ لَا يَسْمَعُ بِهَا أَحَدٌ إِلَّا دَخَلَهَا

[67] Bukhaari: 1313
[68] Abudawud: 4753
[69] Sunanu Al-Nisaa’i: 2073

Abihurayra waxa laga wariyey, inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) inuu yiri: ”Markuu Ilaahay abuuray jannada iyo naarta, wuxuu Jibriil u diray Jannada, wuxuuna yiri: fiiri xageeda iyo waxaan ugu diyaariyey ehelkeeda. Wuxuu yiri: wuu tagay, waanu fiiriyey ayada (jannada) iyo wixii Ilaahay ugu diyaariyey ehelkeeda. Wuxuu yiri: wuu soo noqday, wuxuuna yiri (Jibriil): Sharftaadaan ku dhaartee, qof ma maqlo (haduu maqlaba) wuu galayaa…”[70]

Xujada ay ku doodayaan Muctasilada iyo Qadariyadu waa mid liidata oo tamaryar, sababtoo ah dhulka oo Ilaahay ku diyaariyey cunto iyo cabitaano iyo wax kasta oo nolosha aadamuhu ubaahnayd waxa la abuuray sanado badan kahor abuuridii nabi Aadam (scw). Dhulka abuuridiisuna tolow ayaga agtooda xikmad kuma jirto miyaa? Ileen dhulkaba cuntadii iyo cabidii aadamuhu cunayeen diyaar ayay ku ahaydee!

## Nabi Aadam jannadii lagu abuuray xagay ku taalay?

Dadku way isku khilaafeen jannadii nabi Aadam lagu abuuray. Qolo waxay dhaheen: jannadaasi waxay ku taalay dhulka ayagoo xujo ka dhigtay: hadii jannadu ahayd tii lagu waarayey, sidee ayaa Rabbi dhexdeeda loogu caasiyey? Sidee ayuu Ibliis ku galay?

Jamaahiirtuna waxay qabaan in jannada lagu waarayo nabi Aadam la galiyey, ayagoo daliishanaya kitaabka iyo sunnada.

[70] Tirmadi: 2499

## Daliilka 1aad:

عَنْ حُذَيْفَةَ قَالَا قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَجْمَعُ اللَّهُ تَبَارَكَ وَتَعَالَى النَّاسَ فَيَقُومُ الْمُؤْمِنُونَ حَتَّى تُزْلَفَ لَهُمْ الْجَنَّةُ فَيَأْتُونَ آدَمَ فَيَقُولُونَ يَا أَبَانَا اسْتَفْتِحْ لَنَا الْجَنَّةَ فَيَقُولُ وَهَلْ أَخْرَجَكُمْ مِنْ الْجَنَّةِ إِلَّا خَطِيئَةُ أَبِيكُمْ

Xudayfa waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri ”Ilaahay wuxuu kulminayaa dadka, waxa istaagaya mu’miniintii illamaa loo soo dhoweeyo jannada, waxay u tagayaan Aadam ayagoo leh: aabahyow, noo fur jannada, wuxuu dhahayaa: ”Jannada waxa idinka soo saaray miyayna ahayn danbigii aabihiin.”[71]

Sida xadiiskan saxiixa ah tilmaamayo, dadkii ayaa u imanaya aabahood oo nabi Aadaama maalinta Qayaame, waxayna dhahayaan: albaabka jannada noofur, isaguna wuu ka cudur daaranayaa, isagoo leh: waxa jannad idinka soo saarayba saw maaha danbigii aabihiin galay.

Xadiiskan si toosa ayuu u cadaynayaa in jannadii nabi Aadam lagu abuuray ay ahayd jannada lagu waarayo ee maalinta Qayaamahana lagu abaal marinayo dadka wanaagsan.

## Daliilka 2aad:

Nabigii Ilaahay waxa lagasoo wariyey inuu yiri:

احْتَجَّ آدَمُ وَمُوسَى فَقَالَ لَهُ مُوسَى يَا آدَمُ أَنْتَ أَبُونَا خَيَّبْتَنَا وَأَخْرَجْتَنَا مِنْ الْجَنَّةِ

”Waxa dooday Aadam iyo Muuse, wuxuuna Muuse ku yiri: Aadamow, adigu waxaad tahay aabahayo, waad xumaysay ood nagasoo saartay jannadii…”[72]

---

[71] Muslim: 195

[72] Bukhaari: 6240

Hadii jannadu ay ahayd beer ku taala dhulka, nabi Muuse muu la doodi lahayn aabihii Aadam. Sababtoo ah wuxuu ogyahay in aduunyadu ay burburayso ayna baa'bayso, sidaa darteed dooda nabi Museese iyo Aadam waxay daliil u tahay in meeshaasi ahayd jannada rasmiga ah ee lagu waarayo.

## Daliilka 3aad:

Ilaahay Quraankiisa wuxuu yiri:

اهْبِطُوا بَعْضُكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ ۖ وَلَكُمْ فِي الْأَرْضِ مُسْتَقَرٌّ وَمَتَاعٌ إِلَىٰ حِينٍ ﴿٣٦﴾

"Ka hoobta badhkiinba badhka kale idinkoo col isu ah (Aadam iyo Ibliis), dhulkana waxa idiinku sugan nagaansho (deganaansho) iyo raaxo tan iyo mudo ah"[73]

Ilaahay wuxuu yiri: ka hoobta oo dhulka ayaad ku nagaanaysaane. Ereyga hoobashadu waa in lagasoo dago meel sare oo la yimaado meel hoose. Kuwa diiday in jannadii nabi Aadam ay ahayd jannada lagu waarayo, waxay dhaheen: Meesha lagasoo hoobanyo waa meel buura oo dhulka ku taala!

Waxaan waydiinaynaa, hadii meeshaasi dhulka ku taalo, muxaa rabbi u dhahay: dhulka ayaad ku nagaanaysaan oo aad ku raaxaysanayaan tan iyo mudo.

## Daliilka 4aad:

قَالَ فِيهَا تَحْيَوْنَ وَفِيهَا تَمُوتُونَ وَمِنْهَا تُخْرَجُونَ (25)

"Wuxuu yiri (dhulka) dhexdeeda ayaad ku noolaan, kuna dhiman la idinkana soo bixin"[74]

[73] Suuratu Al-Baqarah: 36

[74] Suuratu Al-acraaf: 25

Aayadana Ilaahay wuxuu ku cadeeyey in dhulkii ay yimaadeen nabi Aadam, Xaawa iyo Ibliis ay ku noolaanayaan, kadibna ay ku dhimanayaan, lagana soo saarayo maalinta Qayaame.

Hadii jannadaasi ay ku taalo dhulka, waxa la is waydiinayaa waa halkee meesha dhulka ku taala ee aan lagu dhimanin? Qayaamadana aan la iska soo saarayn?

## Daliilka 5aad:

إِنَّ لَكَ أَلَّا تَجُوعَ فِيهَا وَلَا تَعْرَىٰ (118) وَأَنَّكَ لَا تَظْمَأُ فِيهَا وَلَا تَضْحَىٰ (119)

”Adigu (Aadam) kuma gaajoonaysid dhexdeeda (jannada) mana ku arrad beelaysid (dhar beelaysid) (118) Adiguna maku dhex harraadaysid mana ku qabanayo kulayl (119)[75]

Sifooyinkan waxa leh oo kaliya jannada lagu waarayo, ee Ilaahay ku abaalmarinayo mu'miniinta.

## Daliilka 6aad:

Ilaahay Quraankiisa wuxuu yiri:

فَوَسْوَسَ إِلَيْهِ الشَّيْطَانُ قَالَ يَا آدَمُ هَلْ أَدُلُّكَ عَلَىٰ شَجَرَةِ الْخُلْدِ وَمُلْكٍ لَّا يَبْلَىٰ (120)

”Waxa waswaasiyey shaydaan oo ku dhahay Aadamow maku tusiyaa geedka waarida iyo boqortooyada aan dhamaan”[76]

Lama dhihin Ibliis jannada ayuu galay ee rabbi wuxuu yiri: Shaydaanka ayaa waswaasiyey Aadam oo beena u sheegay. Ibliisna wuxuu ahaa qareenkii nabi Aadam, sida caruutii

---

[75] Suuratu Daaha: 118,119

[76] Suuratu Daaha: 120

nabi Aadam ay uleeyihiin qareeno shayaadiina oo ku waswaasiya xumaanta.

## Noocyada Jannada:

Ereyga janno waa erey guud oo loo adeegsado dhammaan waxa jannada hoosteeda yaala sida beeraha, guryaha, weelka, dhirta iyo cuntooyinka jannada. Jannaduna maaha hal janno oo kaliya ee waxa jira jannooyin fara badan sida rasuulkii Ilaahay (scw) ka marag kacay markii hooyadii dhashay Xaaritha ibnu Suraaqa ay waydiisay masiirka wiilkeedii oo ku shahiida dagaalkii Badar, wuxuuna ku yiri:

يَا أُمَّ حَارِثَةَ إِنَّهَا جِنَانٌ فِي الْجَنَّةِ ، وَإِنَّ ابْنَكِ أَصَابَ الْفِرْدَوْسَ الْأَعْلَى

Ummu Xaarithooy waa jannooyin badan oo jannada kamida, wiilkaaguna wuxuu galaya Firdawsta sarreysa.[77]

### Noocyada Jannada:

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

جَنَّتَانِ مِنْ فِضَّةٍ آنِيَتُهُمَا وَمَا فِيهِمَا وَجَنَّتَانِ مِنْ ذَهَبٍ آنِيَتُهُمَا وَمَا فِيهِمَا وَمَا بَيْنَ الْقَوْمِ وَبَيْنَ أَنْ يَنْظُرُوا إِلَى رَبِّهِمْ إِلَّا رِدَاءُ الْكِبْرِ عَلَى وَجْهِهِ فِي جَنَّةِ عَدْنٍ

Laba janno waa fidho, weelkooda iyo waxa dhexdooda yaalaaba, laba jannana waa dahab, weelkooda iyo waxa dhexdooda yaalaaba. Umana dhaxeeyo qoomka (ehelka jannada) iyo inay arkaan rabbigood huga kibirka ee wajigiisa mooyee ee Jannada Cadan dhexdeeda ahaaday.[78]

Si aan wax uga ogaano noocyada kala duwan ee jannada, waxaynu soo qaadanaynaa laba nooc oo jannada kamida oo Ilaahay quraankiisa ku sifeeyey. Ilaahay wuxuu yiri:

وَلِمَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِ جَنَّتَانِ ﴿٤٦﴾

[77] Bukhaari:2611

[78] Bukhaari:7001

Qofka rabbigii hor istaagiisa ka cabsada waxa u sugan laba janno (46)[79]

Isla suuratu Arraxmaan waxa Ilaahay ku yiri:

وَمِن دُونِهِمَا جَنَّتَانِ ﴿٦٢﴾

Waxa ka sokeeya (labadii janno ee hore) laba janno oo kale (62)

Eryega ah (ka sokeeya) wuxuu yeelan karaa laba macne. Ta koowaad waxa weeye waa laba janno oo ka hooseeya xaga darajada labadii janno ee hore. Ta labaadna waxa weeye waa laba janno oo ka dhow labadii hore. Si aan u ogaano labadaas nooc ee jannooyinka ah iyo ka fadli badan waa inaan is barbardhignaa sifooyinka ay labaduba leeyhiin.

## Sifada labada Janno ee hore:

ذَوَاتَا أَفْنَانٍ ﴿٤٨﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٩﴾ فِيهِمَا عَيْنَانِ تَجْرِيَانِ ﴿٥٠﴾ فَبِأَيِّ
آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥١﴾ فِيهِمَا مِن كُلِّ فَاكِهَةٍ زَوْجَانِ ﴿٥٢﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا
تُكَذِّبَانِ ﴿٥٣﴾ مُتَّكِئِينَ عَلَىٰ فُرُشٍ بَطَائِنُهَا مِنْ إِسْتَبْرَقٍ ۚ وَجَنَى الْجَنَّتَيْنِ دَانٍ ﴿٥٤﴾
فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٥﴾ فِيهِنَّ قَاصِرَاتُ الطَّرْفِ لَمْ يَطْمِثْهُنَّ إِنسٌ قَبْلَهُمْ وَلَا
جَانٌّ ﴿٥٦﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٧﴾ كَأَنَّهُنَّ الْيَاقُوتُ وَالْمَرْجَانُ ﴿٥٨﴾ فَبِأَيِّ
آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٩﴾ هَلْ جَزَاءُ الْإِحْسَانِ إِلَّا الْإِحْسَانُ ﴿٦٠﴾

Waa janno leh caleemo barwaaqaysan (48) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (49) waxa dhex soconaya laba ilood (50) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (51) dhexdooda waxa ahaaday faakiho dhamaanteed oo laba nooca (52) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (53) waxay ku dingiigaan (ku jiifaan) furaashyo

---

[79] Suuratu Arraxmaan: 46

calooshooda ay ku jirto istabraq (xariir), midhaha jannaduna aadbay ugu dhow yihiin (54) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (55) waxa dhexdooda jooga dumar indhahoodu ku koobanyihiin (ragooda oo kaliya) oo aanay taabanin (dumar bikro ah) insi ka horeeyey iyo jinni toona (56) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (57) waxaad moodaa (quruxda dumarkaas) yaaquut (macdan qaaliya) iyo marjaan (dheeman) (58) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (59) Samo falka abaalkiisu miyaanu ahayn wanaag (60)[80]

## Sifada labada Janno ee danbe:

وَمِن دُونِهِمَا جَنَّتَانِ ﴿٦٢﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٣﴾ مُدْهَامَّتَانِ ﴿٦٤﴾ فَبِأَيِّ
آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٥﴾ فِيهِمَا عَيْنَانِ نَضَّاخَتَانِ ﴿٦٦﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ
﴿٦٧﴾ فِيهِمَا فَاكِهَةٌ وَنَخْلٌ وَرُمَّانٌ ﴿٦٨﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٩﴾ فِيهِنَّ
خَيْرَاتٌ حِسَانٌ ﴿٧٠﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧١﴾ حُورٌ مَّقْصُورَاتٌ فِي الْخِيَامِ
﴿٧٢﴾ فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٣﴾ لَمْ يَطْمِثْهُنَّ إِنسٌ قَبْلَهُمْ وَلَا جَانٌّ ﴿٧٤﴾ فَبِأَيِّ
آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٥﴾ مُتَّكِئِينَ عَلَىٰ رَفْرَفٍ خُضْرٍ وَعَبْقَرِيٍّ حِسَانٍ ﴿٧٦﴾

Waxa ka sokeeya (labadii janoo ee hore) laba janno oo kale (62) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (63) waa laba janno oo cagaar madoobaaday (64) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (65) waxa dhexdooda ahaaday laba ilood oo burqanaya (66) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (67) waxa dhexdooda ahaaday faakiho, timir iyo ruumaan (68) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (69) waxa dhexdooda ahaaday dumar (qurux iyo dhaqanba) ka wanaagsan (70)

[80] Suuratu Arraxmaan: 48-60

nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (71) xuurul cayn ku asturan taandhadooda (72) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (73) may taabanin insi ka horeeyey iyo jinniba (74) nicmooyinka Ilaahay keebaad beeninaysaan (jinni iyo insiyow) (75) waxay ku dingiigaan (ku jiifaan) barkimooyin cagaaran iyo furaash qurxoon (76)[81]

Hadii labadii nooc ee jannooyinka ahaa la inoo sifeeyey maxaa farqiya ee u dhexeeya? Miyey kala sarreeyaan? Jadwalkan hoose ayaa inoo cadaynaya sida ay ukala fadilanyihiin.

| **Labada Janno ee hore** | **Labada janno ee danbe** |
|---|---|
| فِيهِمَا عَيْنَانِ تَجْرِيَانِ ﴿٥٠﴾<br>waxa dhex soconaya laba ilood (50)<br><br>Sida aayada ka muuqata labada ilood way qulqulayaan oo way soconayaan. Labada ilood waxa lagu tilmaamay inay yihiin Tasniim iyo Salsabiil | فِيهِمَا عَيْنَانِ نَضَّاخَتَانِ ﴿٦٦﴾<br>waxa dhexdooda ahaaday laba ilood oo burqanaya (66)<br><br>Burqashada iyo socodka waxa xoogan socodka, sidaa darteed labada ilood ee labada janno ee hore ayaa ka sarreeya. |

[81] Suuratu Arraxmaan: 62-76

| | |
|---|---|
| فِيهِمَا مِن كُلِّ فَاكِهَةٍ زَوْجَانِ ﴿٥٢﴾<br>dhexdooda waxa ahaaday faakiho dhamaanteed oo laba nooca (52)<br><br>Jannadan waxa laga helayaa dhamaan faakihooyinka aduunka iyo kuwa aakhiraba. | فِيهِمَا فَاكِهَةٌ وَنَخْلٌ وَرُمَّانٌ ﴿٦٨﴾<br>waxa dhexdooda ahaaday faakiho, timir iyo ruumaan (68)<br>Jannadan lama socoto ereyga dhamaan, taasoo inoo cadaynaysa in labada janno ee hore ay ka fadli badan yihiin. |
| مُتَّكِئِينَ عَلَىٰ فُرُشٍ بَطَائِنُهَا مِنْ إِسْتَبْرَقٍ ۚ<br>waxay ku dingiigaan (ku jiifaan) furaashyo calooshooda ay ku jirto istabraq (xariir).<br><br>Furaashka wixii lagu guray hoostoodii oo xariira ayaa la sheegay, dusha sarena waa laga aamusay quruaxda ay leeyihiin awgeed. | مُتَّكِئِينَ عَلَىٰ رَفْرَفٍ خُضْرٍ وَعَبْقَرِيٍّ حِسَانٍ ﴿٧٦﴾<br>waxay ku dingiigaan (ku jiifaan) barkimooyin cagaara iyo furaash qurxoon (76)<br><br>Dushii sare ayaa la sifeeyey inay cagaaranyihiin oo qurux badanyihiin. Labadii Janno ee hore ayaga waa laga aamusay, waxaana la sifeeyey caloosha furaashkooda. Badanaa furaashka xagiisa hoose waxa lagu guraa cudbi iyo buush. Hadii xariir lagu guray maxaad u malayn dushooda! |

| | |
|---|---|
| فِيهِنَّ قَاصِرَاتُ الطَّرْفِ<br>waxa dhexdooda jooga dumar indhahoodu ku koobanyihiin (ragooda oo kaliya).<br><br>Dumarka jooga labada janno ee hore waa kuwo ayagu indhahoodu ku daboolanyihiin ninka qaba oo kaliya. | حُورٌ مَّقْصُورَاتٌ فِي الْخِيَامِ ﴿٧٢﴾<br>xuurul cayn ku asturan taandhadooda (72)<br><br>Dumarka labada janno ee danbe waa kuwo ku asturan taandhooyinkooda. Isku midna maaha gabadh naftoodu asturantahay iyo kuwo taandhadu asturayso. |
| كَأَنَّهُنَّ الْيَاقُوتُ وَالْمَرْجَانُ ﴿٥٨﴾<br>waxaad moodaa (quruxda dumarkaas) yaaquut (macdan qaaliya) iyo marjaan (dheeman) (58)<br><br>Labada janno ee hore dumarka jooga waxa rabbi ku ekeysiiyey inay u eegyihiin sida Yaaquut iyo Marjaan quruxda ay leeyihiin darteed. | Labada janno ee danbe lama sheegin waxa ay u eegyihiin dumarka dhexdooda jooga. |

## Natiijada isbarbardhiga:

Is barbardhigaa kadib waxa inoo soo baxay dhawr arrimood:

- In jannooyinka badanyihiin.
- In jannooyinku kala duwanyihiin.

- Labada janno ee hore ayaa ka fadli badan labada danbe.
- Ereyga ah (ka sokeeya) macnaheedu waa laba janno oo kuwii hore ka hooseeya.

Dabcan jannadu waa nicmada Ilaahay ugu deeqayo kuwa isaga ka cabsada, cidii gashaana nasiib leh. Janno qof galayna ma hooseeyo ee kaliya waxa la rabaa in laguu bayaamiyo in jannadu ay leedahay darajooyin kala sarreeya.

# Magacyada Jannada iyo macnahooda:

Jannada Raxmaanku u diyaariyey dadka mu'miniinta ah waxay leedahay magacyo badan, waxa kamida:

## Jannah (الجنة):

Ereyga Jannah waa erey guud oo ka dhaxeeya dhamaan jannooyinka. Ereyga macnihiisu waa meel dhirtu qarisay oo asturan. Ilmaha caloosha hooyadii ku jira waxa loogu yeedhaa (الجنين) sababtoo ah wuxuu ku qarsoonyahay caloosha hooyadii. Jinkana waxa loogu yeedhaa (الجن) sababtoo ah waxay ka qarsoonyihiin araga bani aadamka.

Jannadana waxa Janno loogu bixiyey waa meel markaad gasho ay dhirteedu ku qarinayso, waana dhulka bustaanka ah ee dhirtu ku badantahay. Jannada beerahoodu waa cagaar madoobaaday sidii ay caleemaheedu isu dhex galayeen.

## Daaru Salaam (دار السلام):

Daaru Salaam waxa looga jeeda daarta nabadgalyada, waxa lagaga nabad galay dhibaatooyinka iyo aafooyinka sida cudurrada, dhulgariir, duufaano, fatahaado iwm.

لَهُمْ دَارُ السَّلَامِ عِندَ رَبِّهِمْ ۖ

Waxay leeyihiin daarta nabadgalyada ee Rabbigood agtooda ah[82]

Salaanta oo ah nabadgalyada ayaa ehelka jannadu isku salaamayaan:

وَتَحِيَّتُهُمْ فِيهَا سَلَامٌ ۚ

[82] Suuratu Al-ancaam:127

Salaantoodu dhexdeeda (jannada) waa nabadgalyo.[83]

Malaa'ikta Ilaahay ayaa nabadgalyo ku salaamaya ehelka Jannada:

وَالْمَلَائِكَةُ يَدْخُلُونَ عَلَيْهِم مِّن كُلِّ بَابٍ (23) سَلَامٌ عَلَيْكُم بِمَا صَبَرْتُمْ ۚ فَنِعْمَ عُقْبَى الدَّارِ (24)

Malaa'iktuna waxay kasoo galayaan albaab kasta (23) (waxayna leeyihiin) nabadgalyo korkiina ha ahaato wixii aad u samirteen darteed, meel loo noqdo halkaasa u fiican. (24)[84]

Rabbiga wayn ayaa nabadgalyo isaguna ku salamaaya ehelka Jannada:

سَلَامٌ قَوْلًا مِّن رَّبٍّ رَّحِيمٍ (58)

Waa salaan nabadgalo oo katimid rabbiga naxariista (58)[85]

Run ahaantii jannadu waa daartii nabadgalyada ee nabada la isku salaamayey, Ilaahay kuwa galaya hanaga yeelee.

## Daarta lagu waarayo:

Daartan waa lagu waarayaa lagumana dhimanayo, lagumana gaboobayo oo cimrigii isma badalayo.

خَالِدِينَ فِيهَا ۚ حَسُنَتْ مُسْتَقَرًّا وَمُقَامًا (76)

Way ku waarayaan, waxa fiicnaaday deganaashaheeda iyo ku nagaanshaheeda (76)[86]

---

[83] Suuratu Yuunus:10
[84] Suuratu Arracdi: 23, 24
[85] Suuratu Yaasiin: 58
[86] Suuratu Alfurqaa:76

## Daaru Almuqaam (دار المقام):

Daaru almuqaam waxa looga jeedaa daartii lagu xasilayay ee lagu nagaanayay.

الَّذِي أَحَلَّنَا دَارَ الْمُقَامَةِ مِن فَضْلِهِ لَا يَمَسُّنَا فِيهَا نَصَبٌ وَلَا يَمَسُّنَا فِيهَا لُغُوبٌ (35)

Kaasoo na dajiyey daarta lagu nagaanayo fadligiisa awgeed nama taabanayso dhexdeeda daal namana taabanayso dhexdeeda dhibaato (35)[87]

## Jannatu Al-ma'waa (جنة المأوى):

Jannatu al-ma'waa waxa looga jeedaa jannadii loo hooyanayey, waxa u hooyanaya arwaaxda shuhadada, malaa'ikta iyo dadka saalixiinta ah.

عِندَهَا جَنَّةُ الْمَأْوَىٰ (15)

Halkaa agteeda waxa ah jannadii hoyga ahayd (15)[88]

## Jannatu Cadan (جنة عدن):

Jannada Cadan waxa looga jeedaa jannada lagu waarayo ee deegaankeedu yahay mid rasmiya oo aan guurguurayn. Dhamaan jannooyinkoo dhan way ku sifaysanyihiin sifadan, waana loogu yeedhi karaa janno kasta.

جَنَّاتِ عَدْنٍ مُّفَتَّحَةً لَّهُمُ الْأَبْوَابُ (50) مُتَّكِئِينَ فِيهَا يَدْعُونَ فِيهَا بِفَاكِهَةٍ كَثِيرَةٍ وَشَرَابٍ (51)

Jannooyinka Cadneed oo ay u furantahay albaabadu (50) dhexdooda ayay dingiigaan una yeedhanayaan faakihooyin badan iyo cabitaan (51)[89]

---

[87] Suuratu Faatir: 35
[88] Suuratu Ann-najmi:15
[89] Suuratu Saad: 50,51

## Daaru al-xayawaan (دار الحيوان):

Daartii nolosha, sababtoo ah nolosha dhabta ah waa jannada.

وَإِنَّ الدَّارَ الْآخِرَةَ لَهِيَ الْحَيَوَانُ ۚ لَوْ كَانُوا يَعْلَمُونَ (64)

Daarta aakhiro waa nolol, hadaad ogtihiin (64)[90]

## Jannaatu Naciim (جناة النعيم):

Jannooyinka nicmaysan ee lagu barwaaqoobayo, waana sifo ka dhaxaysa dhamaan jannooyinka oo dhan.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ جَنَّاتُ النَّعِيمِ (8)

Kuwa Ilaahay rumeeyey ee camal saalixa la yimid waxay leeyihiin jannooyin nicmaysan (8)[91]

## Firdawsa (الْفِرْدَوْس)

Firdawsa waa jannada ta ugu sarreysa, una dhaxaysa ee saqafkeeda sare yahay carshiga raxmaanka. Taasoo nabigeenu (scw) in faray inaan Ilaahay waydiisano. Firdawsan macnaheedu waa dhulka beerta ah ama bustaanka.

الَّذِينَ يَرِثُونَ الْفِرْدَوْسَ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ (11)

Kuwa dhaxlaya Firdawsa ayagu dhexdeeda way ku waarayaan (11)[92]

## Almaqaam al-amiin: (مقام أمين):

Maqam al-amiin waxa looga jeedaa deegaanka aaminka ah ee ka nabadgalay dhibaatooyinka dabiiciga ah sida duufaanada, dabaylaha, fulkaanayaasha sidoo kale waxa

---

90 Suuratu Cankabuut:64

91 Suuratu Luqmaan: 8

92 Suuratu Mu'minuun: 11

laga aamin noqday colaad, dagaalo iyo dhamaan aafooyinka aduunyada oo dhan.

إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي مَقَامٍ أَمِينٍ (51)

Kuwa Alle ka cabsada waxa u sugnaaday deegaan aamina (51)[93]

## Maqacadi Sidqi (مَقْعَدِ صِدْقٍ):

Maqcadi Sidqi waxa looga jeedaa daartii sharafta, karaamada iyo fadliga ilaahay, waa daar run ah oo xaqiiqo ah.

إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي جَنَّاتٍ وَنَهَرٍ (54) فِي مَقْعَدِ صِدْقٍ عِندَ مَلِيكٍ مُّقْتَدِرٍ (55)

Kuwa Allah ka cabsada waxay ku jiraan jannooyin iyo wabiyo (54) waa daar run ah oo Ilaaha boqorka ah ee wax walba awoda agtiisa ah (55)[94]

---

[93] Suuratu Dukhaan: 51

[94] Suuratu Qamar: 54,55

## Albaabada Jannada iyo dadka galaya:

هَٰذَا ذِكْرٌ ۚ وَإِنَّ لِلْمُتَّقِينَ لَحُسْنَ مَآبٍ ﴿٤٩﴾ جَنَّاتِ عَدْنٍ مُّفَتَّحَةً لَّهُمُ الْأَبْوَابُ ﴿٥٠﴾

Kaasi waa dikri (xus), kuwa Alle ka cabsada waxa u sugan noqosho wanaagsan (49) jannooyinka Cadan ayaa u furan albaabadeedu (50)[95]

جَنَّاتُ عَدْنٍ يَدْخُلُونَهَا وَمَن صَلَحَ مِنْ آبَائِهِمْ وَأَزْوَاجِهِمْ وَذُرِّيَّاتِهِمْ ۖ وَالْمَلَائِكَةُ يَدْخُلُونَ عَلَيْهِم مِّن كُلِّ بَابٍ ﴿٢٣﴾ سَلَامٌ عَلَيْكُم بِمَا صَبَرْتُمْ ۚ فَنِعْمَ عُقْبَى الدَّارِ ﴿٢٤﴾

Jannooyinka Cadan ayay galayaan iyo kuwa wanaagsan aabayaashooda, xaasaskooda iyo ubadkoodaba, malaa'iktuna waxay ugasoo galaysaa albaaab kasta (23) Nabadgalyo korkiina ha ahaato wixii aad u samirteen, meel loo noqday u fiicantahay (24)[96]

وَسِيقَ الَّذِينَ اتَّقَوْا رَبَّهُمْ إِلَى الْجَنَّةِ زُمَرًا ۖ حَتَّىٰ إِذَا جَاءُوهَا وَفُتِحَتْ أَبْوَابُهَا وَقَالَ لَهُمْ خَزَنَتُهَا سَلَامٌ عَلَيْكُمْ طِبْتُمْ فَادْخُلُوهَا خَالِدِينَ ﴿٧٣﴾

Waxa loo kaxeeyey kuwa Rabbigood ka cabsaday xaga jannada ayagoo kooxo ah, illamaa ay yimaadeen oo la furay albaabadeedii oo ay dhaheen khasnad-hayayaasheedii nabadgalyo korkiina ha ahaato waad fiicnaydeen ee gala idinkoo ku waaraya (73)[97]

فَآخُذُ بِحَلْقَةِ بَابِ الْجَنَّةِ فَأُقَعْقِعُهَا

"Waxaan qabanayaa handaraabka albaabka jannada oo waan garaacayaa"[98]

---

[95] Suuratu Saad: 49, 50
[96] Suuratu Arracdi: 23, 24
[97] Suuratu Zumur: 73
[98] Tirmadi: 3148

## Albaabka Jannadu siduu u eegyahay?

Albaabada Jannada dushooda ayaa laga arkayaa hoostooda, hoostoodana dushooda laga arkayaa. Waana albaabo waaweyn oo leh laba fardood oo ay kala duwantahay waynidoodu maadaama jannadu ay darajooyin kala duwan leedahay. Albaabada qaar waxa galaya dad gaara, markay galaana waa la xidhayaa.

## Waynida albaabadeeda

Jannada albaabadeedu way waynyihiin, rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu dhahay:

فأقول يا رب أمتي أمتي فيقال يا محمد أدخل الجنة من أمتك من لا حساب عليه من الباب الأيمن من أبواب الجنة وهم شركاء الناس فيما سوى ذلك من الأبواب والذي نفس محمد بيده إن ما بين المصراعين من مصاريع الجنة لكما بين مكة وهجر أو كما بين مكة وبصرى

"Waxaan odhanayaa: Rabbiyoow Ummadaydii Ummadaydii! Waxa la dhahayaa: Muxamadow, jannada ka gali ummadaada kuwa aan la xisaabinayn albaabka midigeed ee albaabada jannada, dadkana waxay shuraako kula yihiin wixii albaabo soo hadhay, waxaan ku dhaartay Allaha gacantiisa ay ku jirto nafta Muxamede, labadeeda fardadood ee kamida albaabada jannada waxay isu jiraan intay isu jiraan Makkah iyo Hajar (magaalo Sacuudiga ku taala) ama Makkah iyo Busra (magaalo Shaam ku taala)"[99]

Xadiiskan wuxuu tilmaamay in fardada alabaabka jannadu isu jiraan intay isu jiraan Makkah iyo Busra oo runtii aad u wayn.

Haddana waxa jira xadiis kale oo tilmaamaya in fardadaha albaabada loo kala soconayo afartan sanadood, taasoo inoo

[99] Muslim: 194

cadaynaysa in albaabada jannadu kala waynyihiin oo kala duwan yihiin. Rasuulkii Ilaahay wuxuu yiri:

وما بين مصراعين من مصاريع الجنة مسيرة أربعين عاما وليأتين عليه يوم وإنه لكظيظ

”laba fardadood oo kamida fardadaha Jannadu waxa loo socdaa afartan sanadood, waxa iman doona maalin ay cidhiidhi noqon doonto”[100]

Maadaama jannadu ay kala darajo wayntahay albaabadeeduna way kala waynyihiin, wayna kala sarreeyaan. Sidoo kale albaabada qaarna cid kooban ayaa galaya sida albaabka midigeed ee ay galayaan todobaatan kun ee xisaab la’aanta ah.

Albaabada jannadu waa sideed sida xadiisyo badan tilmaameen, waxaana suurtagal ah in alabaabadaas ay usii qaybsamaan qeybo kale, sida alabaabada naartuba ay u qeybsamayaan:

لَهَا سَبْعَةُ أَبْوَابٍ لِّكُلِّ بَابٍ مِّنْهُمْ جُزْءٌ مَّقْسُومٌ (44)

”Waxay leedahay (naartu) todoba alabaab oo albaabkasta u qaybsamo qeybo (44)”[101]

## Alabaabada jannada waxa la furaa Isniinta iyo Khamiista:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ تُفْتَحُ أَبْوَابُ الْجَنَّةِ يَوْمَ الِاثْنَيْنِ وَيَوْمَ الْخَمِيسِ فَيُغْفَرُ لِكُلِّ عَبْدٍ لَا يُشْرِكُ بِاللَّهِ شَيْئًا إِلَّا رَجُلًا كَانَتْ بَيْنَهُ وَبَيْنَ

[100] Axmed: 1952

[101] Suuratu Xijri: 44

أَخِيهِ شَحْنَاءُ فَيُقَالُ أَنْظِرُوا هَذَيْنِ حَتَّى يَصْطَلِحَا أَنْظِرُوا هَذَيْنِ حَتَّى يَصْطَلِحَا أَنْظِرُوا هَذَيْنِ حَتَّى يَصْطَلِحَا

Abihurayra waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: "waxa la furaa albaabada jannada maalinta isniinta iyo maalinta khamiista, waxa loo danbi dhaafaa adoon kasta oo aan Ilaahay shirki ula imanin, marka laga reebo nin isaga iyo walaalkii ay u dhaxayso cuqdad, waxa la dhahaa: dib u dhiga labadan illamaa ay ka heshiinayaan, dib u dhiga labadan illamaa ay ka heshiinayaan, dib u dhiga labadan illamaa ay ka heshiinayaan."[102]

Sidaa darteed ayuu nabigu u jeclaysan jiray inuu soomo isniinta iyo khamiista:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ تُعْرَضُ الْأَعْمَالُ يَوْمَ الِاثْنَيْنِ وَالْخَمِيسِ فَأُحِبُّ أَنْ يُعْرَضَ عَمَلِي وَأَنَا صَائِمٌ

Abihurayra waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: "Camalada waxa la bandhigaa maalinta

## Jannada waxa la furaa bisha barakaysan ee Ramadaan:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ إِذَا جَاءَ رَمَضَانُ فُتِّحَتْ أَبْوَابُ الْجَنَّةِ وَغُلِّقَتْ أَبْوَابُ النَّارِ وَصُفِّدَتْ الشَّيَاطِينُ

[102] Muslim:2565

Abihurayra (Rc) waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) dhahay: ”Marka Ramadaan yimaado waxa la furaa albaabada jannada, waxa la xidhaa albaabada naarta, waxa la silsiladeeyaa shayaadiinta”[103]

## Albaabada Jannadu waxa kamida:

### Albaabka Rayaan:

عَنْ سَهْلٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ إِنَّ فِي الْجَنَّةِ بَابًا يُقَالُ لَهُ الرَّيَّانُ يَدْخُلُ مِنْهُ الصَّائِمُونَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ لَا يَدْخُلُ مِنْهُ أَحَدٌ غَيْرُهُمْ يُقَالُ أَيْنَ الصَّائِمُونَ فَيَقُومُونَ لَا يَدْخُلُ مِنْهُ أَحَدٌ غَيْرُهُمْ فَإِذَا دَخَلُوا أُغْلِقَ فَلَمْ يَدْخُلْ مِنْهُ أَحَدٌ

Sahal (ilaahay raali haka ahaadee) waxa laga wariyey inuu nabiga (scw) kasoo wariyey inuu yiri: “Jannada waxa ahaaday albaab la dhaho Rayyaan, waxa ka gala dadka sooma maalinta Qayaame, cid aan ayaga ahayn ma gasho, waxa la dhahaa: meeye dadkii soomi jiray? Ayaga mooyee cid kale ma gasho, markay galaana waa la xidhaa, cid kalena ma gasho”[104]

Ereyga Rayyaan wuxuu la macno yahay waraabin, wuxuu kasoo horjeedaa harraadka ama oonka. Dadka Ilaahay dartii usoomay ee u harraaday waxa laga waraabinayaa albaabkan rayyaan, mana harraadi doono dib oo u danbaysa.

وَرَأَيْتُ رَجُلًا مِنْ أُمَّتِي يَلْهَثُ عَطَشًا مِنَ الْعَطَشِ فَجَاءَهُ صِيَامُ رَمَضَانَ فَسَقَاهُ

[103] Muslim: 1079
[104] Bukhaari: 1797

“waxaan arkay nin kamida ummadayda oo u laaladinaya carrabaka harraad darteed, waxa u yimid soonkii ramadaan oo waraabiyey”[105]

### Albaabka dadka aan la xisaabinayn:

فأقول يا رب أمتي أمتي فيقال يا محمد أدخل الجنة من أمتك من لا حساب عليه من الباب الأيمن من أبواب الجنة وهم شركاء الناس فيما سوى ذلك من الأبواب والذي نفس محمد بيده إن ما بين المصراعين من مصاريع الجنة لكما بين مكة وهجر أو كما بين مكة وبصرى

”Waxaan dhahayaa: Rabbiyoow Ummadaydii Ummadaydii! Waxa la dhahayaa: Muxamadow, jannada ka gali ummadaada kuwa aan la xisaabinayn albaabka midigeed ee albaabada jannada, dadkana waxay shuraako kula yihiin wixii albaabo soo hadhay, waxaan ku dhaartay Allaha gacantiisa ay ku jirto nafta Muxamede, labadeeda fardadood ee kamida albaabada jannada waxay isu jiraan intay isu jiraan Makkah iyo Hajar (magaalo Sacuudiga ku taala) ama Makkah iyo Busra (magaalo Shaam ku taala)”[106]

## Dadka looga yeedhayo sideeda albaab ee Jannada:

### Ehelka Sadaqada:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ مَنْ أَنْفَقَ زَوْجَيْنِ فِي سَبِيلِ اللَّهِ نُودِيَ فِي الْجَنَّةِ يَا عَبْدَ اللَّهِ هَذَا خَيْرٌ فَمَنْ كَانَ مِنْ أَهْلِ الصَّلَاةِ دُعِيَ مِنْ بَابِ

---

[105] المعجم الكبير » الأحاديث الطوال » حديث عبد الرحمن بن سمرة في رؤيا رسول الله صلى الله عليه وسلم: 39

[106] Muslim: 194

الصَّلَاةِ وَمَنْ كَانَ مِنْ أَهْلِ الْجِهَادِ دُعِيَ مِنْ بَابِ الْجِهَادِ وَمَنْ كَانَ مِنْ أَهْلِ الصَّدَقَةِ دُعِيَ مِنْ بَابِ الصَّدَقَةِ وَمَنْ كَانَ مِنْ أَهْلِ الصِّيَامِ دُعِيَ مِنْ بَابِ الرَّيَّانِ فَقَالَ أَبُو بَكْرٍ بِأَبِي أَنْتَ وَأُمِّي مَا عَلَى مَنْ دُعِيَ مِنْ هَذِهِ الْأَبْوَابِ مِنْ ضَرُورَةٍ فَهَلْ يُدْعَى أَحَدٌ مِنْ تِلْكَ الْأَبْوَابِ كُلِّهَا قَالَ نَعَمْ وَأَرْجُو أَنْ تَكُونَ مِنْهُمْ

Abihurayra waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: ”Cidii laba nooc (oo xoolo ah sida laba halaad, laba riyaad) ku bixisa jidka Ilaahay waxa looga dhawaaqa jannada dhexdeeda (ayadoo la leeyahay) adoonkii Ilaahayow waa khayr, qofkii ehelka salaada ah waxa looga yeedhaa albaabka salaada, qofkii ehelka jihaadka waxa looga yeedhaa albaabka jihaadka, qofkii ehelka sadaqada waxa looga yeedhaa albaabka sadaqada, qofkii ehelka soomka ahna waxa looga yeedhaa albaabka Rayyaan, markaasuu Abubakar yiri: aabahay iyo hooyadaybaan kugu furtee, qof looga yeedhay alabaabadaas muu khasaarine ee ma majiraa cid albaabada oo dhan looga yeedhayo? Wuxuu yiri: haa, oo waxaan rajaynayaa inaad kamid tahay”[107]

## Waysada:

قَالَ مَا مِنْكُمْ مِنْ أَحَدٍ يَتَوَضَّأُ فَيُبْلِغُ أَوْ فَيُسْبِغُ الْوَضُوءَ ثُمَّ يَقُولُ أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُ اللَّهِ وَرَسُولُهُ إِلَّا فُتِحَتْ لَهُ أَبْوَابُ الْجَنَّةِ الثَّمَانِيَةُ يَدْخُلُ مِنْ أَيِّهَا شَاءَ

Cumar ibnu Khadaab waxa laga wariyey inuu yiri: ”majiro mid idinka mida oo wayso qaata oo ku xeel dheeraada

[107] Tirmadi: 3674

waysada kadibna dhaha: waxaan qirayaa in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Allah mooyee iyo in muxamedna yahay adoonkii Ilaahay iyo rasuulkiisii waxa loo furaa albaabada jannada ee sideeda ah, kuu doonana wuu ka galayaa”[108]

## Ilmaha saqiiray:

عَنْ عُتْبَةُ بْنُ عَبْدٍ السُّلَمِيُّ فَقَالَ سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ مَا مِنْ مُسْلِمٍ يَمُوتُ لَهُ ثَلَاثَةٌ مِنْ الْوَلَدِ لَمْ يَبْلُغُوا الْحِنْثَ إِلَّا تَلَقَّوْهُ مِنْ أَبْوَابِ الْجَنَّةِ الثَّمَانِيَةِ مِنْ أَيِّهَا شَاءَ دَخَلَ

Cutba ibnu Cabdi Sulamiyyu wuxuu yiri: ”Waxaan maqlay rasuulkii Ilaahay (scw) oo leh: ”Majiro qof muslima oo ay ka dhimato sadex caruura oo aan qaangaadhin (haduu jiraba) wuxuu kula kulmaa albaabada jannada ee sideeda ah, kuu doonana ayuu ka galaa”[109]

## Tawxiidka:

عَنْ عُبَادَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ مَنْ شَهِدَ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ وَأَنَّ عِيسَى عَبْدُ اللَّهِ وَرَسُولُهُ وَكَلِمَتُهُ أَلْقَاهَا إِلَى مَرْيَمَ وَرُوحٌ مِنْهُ وَالْجَنَّةُ حَقٌّ وَالنَّارُ حَقٌّ أَدْخَلَهُ اللَّهُ الْجَنَّةَ عَلَى مَا كَانَ مِنْ الْعَمَلِ. وَزَادَ مِنْ أَبْوَابِ الْجَنَّةِ الثَّمَانِيَةِ أَيَّهَا شَاءَ

Cubaada (Ilaahay raali haka ahaadee) waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Qofka qira in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Ilaahay mooyee, kalidiina uu yahay, cibaadadiisana cid kale aanay la wadaagin, ee qira in Muxamedna yahay adoonkiisii iyo rasuulkiisii, iyo in Ciisana yahay adoonkii Ilaahay iyo rasuulkiisii iyo ereygiisii uu ku tuuray Maryama iyo ruux katimid xagiisa iyo in

[108] Muslim: 234
[109] Ibnu Maajah: 1604

jannadu tahay xaq, naartuna ay tahay xaq, Ilaahay wuxuu galiyaa jannada wuxuu doona camal hakaga sugnaadee. Waxa lagu siyaadiyey: albaabada jannada ee sideeda ah kuu doono."[110]

## Gabadha wanaagsan:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ ، أَنّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ، قَالَ : " إِذَا صَلَّتِ الْمَرْأَةُ خَمْسَهَا ، وَصَامَتْ شَهْرَهَا ، وَحَصَّنَتْ فَرْجَهَا ، وَأَطَاعَتْ بَعْلَهَا ، دَخَلَتْ مِنْ أَيِّ أَبْوَابِ الْجَنَّةِ شَاءَتْ

Abihurayra waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: "Hadii gabadhu ay tukato shanteeda, ay soomto bisheeda, ay dhawrto xubinkeeda, ay adeecdo ninkeeda, waxay ka gashaa jannada albaabkii ay doonto"[111]

## Albaabada la mooganyahay ku dadaal:

Maadaama Albaabada jannadu sideed yihiin lagana yaabo inay usii qaybsamaan qeybo kala duwan sida albaabada naarta oo kale. Waa inaan ogaano in albaabada qaar faylkoodu dheeryahay oo dad badan kayuu ugu jiraan, sida albaabka salaada, soonka, xajka, sadaqada.

Waa ianaan ku dadaalno albaabada dadku ay mooganyihiin sida talo saarashada, dikriga, quraan akhrinta, jihaadka, daacada ninka, samirka iyo dacwada diinta.

## Albaabada Jannada iyo malaa'ikta khasnadooda haya:

وَسِيقَ الَّذِينَ اتَّقَوْا رَبَّهُمْ إِلَى الْجَنَّةِ زُمَرًا ۖ حَتَّىٰ إِذَا جَاءُوهَا وَفُتِحَتْ أَبْوَابُهَا وَقَالَ لَهُمْ خَزَنَتُهَا سَلَامٌ عَلَيْكُمْ طِبْتُمْ فَادْخُلُوهَا خَالِدِينَ ﴿٧٣﴾

---

[110] Bukhaari:3252

[111] المعجم الأوسط للطبراني » بَابُ الْعَيْنِ » مَنِ اسْمُهُ : عَبْدَانُ/4738

Waxa loo kaxeeyey kuwa Rabbigood ka cabsaday xaga jannada ayagoo kooxo ah, illamaa ay yimaadeen oo la furay albaabadeedii oo ay dhaheen khasnad-hayayaasheedii nabadgalyo korkiina ha ahaato waad fiicnaydeen ee gala idinkoo ku waaraya (73)[112]

Waxa lagasoo wariyey nabiga (scw) in qofka ugu horeeya ee jannada laga furayo inuu isaga yahay:

عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ آتِي بَابَ الْجَنَّةِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فَأَسْتَفْتِحُ فَيَقُولُ الْخَازِنُ مَنْ أَنْتَ فَأَقُولُ مُحَمَّدٌ فَيَقُولُ بِكَ أُمِرْتُ لَا أَفْتَحُ لِأَحَدٍ قَبْلَكَ

Anas ibnu Maalik waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Albaabka jannada ayaan imanayaa maalinta qayaame, waxaan dalbanayaa in la iga furo, wuxuu dhahayaa khasnad-hayihii: waa kuma? Waxaan odhanayaa: waa Muxamed. Wuxuu dhahayaa: adiga ayaa la i faray (inaan ka furo) cid adiga kaa horreysa kama furayo”[113]Dadka ugu horreeya ee Jannada galaya.

## Waa tuma ummada u horeysa ee jannada galaysa?

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ نَحْنُ الْآخِرُونَ الْأَوَّلُونَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَنَحْنُ أَوَّلُ مَنْ يَدْخُلُ الْجَنَّةَ بَيْدَ أَنَّهُمْ أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِنَا وَأُوتِينَاهُ مِنْ بَعْدِهِمْ فَاخْتَلَفُوا فَهَدَانَا اللَّهُ لِمَا اخْتَلَفُوا فِيهِ مِنْ الْحَقِّ فَهَذَا يَوْمُهُمْ الَّذِي اخْتَلَفُوا فِيهِ هَدَانَا اللَّهُ لَهُ قَالَ يَوْمُ الْجُمُعَةِ فَالْيَوْمَ لَنَا وَغَدًا لِلْيَهُودِ وَبَعْدَ غَدٍ لِلنَّصَارَى

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Anagaa u danbayna uguna horeyna (umadaha) maalinta Qayaame, anaga ayaa ah kuwa ugu

[112] Suuratu Zumur: 73
[113] Muslim: 197

horeeya ee galaya Jannada, halka ayaga la inaga horesiiyey kitaabka horeteen, anagana nala siiyey ayaga kadib, wayna is khilaafeen, Ilaahayn wixii ay isku khilaafeen ayuu xaqii nagaga hanuuniyey, waa kan maalintii ay isku khilaafeen ee Ilaahayna nagu hanuuniyey, wuxuu yiri: maalinta jimce, maanta anagaa iska leh, barrina yahuuda maalinta xigtana Nasaarada”[114]

Ummada nabi Muxamed (scw) ayaa ah ummada u horeysa ee galaysa jannada, maadaama ay tahay ummadii ugu khayrka badnayd, lana siiyey kitaabkii ugu khayrka badnaa, laganasoo saaray nabigii ugu fadliga waynaa.

## Waa tuma ummada ugu tirada badan jannada?

عن عبد الله قال كنا مع النبي في قبة فقال أترضون أن تكونوا ربع أهل الجنة قلنا نعم قال أترضون أن تكونوا ثلث أهل الجنة قلنا نعم قال أترضون أن تكونوا شطر أهل الجنة قلنا نعم قال والذي نفس محمد بيده إني لأرجو أن تكونوا نصف أهل الجنة.

Cabdilaahi waxa laga wariyey inuu yiri: ”Nabiga ayaan la joognay meel taandho ah, wuxuuna yiri: ”Raali maku tihiin inaad noqotaan afar meelood hal meel ehelka jannada, waxaanu nidhi: haa. Wuxuu yiri: raali maku tihiin inaad noqotaan sadex meelood hal meel jannada, waxaanu nidhi: haa. Wuxuu yiri: raali maku tihiin inaad noqotaan kalabadh ehelka jannada, waxaanu nidhi: haa. Wuxuu yiri: ilaahbaan ku dhaartee, waxaan rajaynayaa inaad noqotaan kala badh ehelka jannada.[115]

[114] Muslim: 855
[115] Bukhaari: 6163

Waa ummada nabi Muxamed (scw), jannada waxay ka yihiin kala badh, halka ummadihii kale oo dhan ay yihiin badhka kale. Si kastaba ha ahaatee, waxa jira xadiis kale oo cadynaya in ummada nabi Muxamed (scw) ay yihiin sadex meelood laba meel dadka galaya jannada.

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم أهل الجنة عشرون ومائة صف ثمانون منها من هذه الأمة وأربعون من سائر الأمم

Rasuulki Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Ehelka jannadu waa boqol iyo labaatan saf, sideetan kamida waa ummadan, afartana waa ummadaha kale”[116]

Ummada nabi Muxamed (scw) ayaa ah kuwa ugu badan ee jannada galaya, waana sadex meelood laba meelood ehelka jannada. Si kale hadii aan u tilmaano, ummada nabi Muxamed ayaa laba jeer kusoo laba laabmaysa ummadaha kale ee jannada galaya.

## Dadka ugu horreeya ee jannada galaya:

عن أبي سعيد قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم فقراء المهاجرين يدخلون الجنة قبل أغنيائهم بخمس مائة سنة[117]

Abisaciid waxa laga wariyey inuu yiri: rasuukii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”fuqarada muhaajiriinta ayaa galaya jannada kahor maalqabeenadooda shan boqol oo sano”

Fuqarada muhaajiriinta ayaa ugu hor galaya jannada, waxayna dadka ka horaynayaan sanado badan. Sidoo kale fuqarda laftigoodu way sii kala fadli badanyihiin oo jannada way usii kala horreynayaan, qaarkood shan boqol oo sano ayay dadka kale ka horraynayaan, qaarna afartan sanadood,

[116] Tirmadi: 2546

[117] Tirmadi: 2351

sida xadiiskan uu tilmaamayo. Mana iska hor imanayso ee waxay tilmaamaysaa in fuqaraduna ay kala horreynayaan.

عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنه قال : قال لي رسول الله صلى الله عليه وآله وسلم : " أتعلم أول زمرة تدخل الجنة من أمتي ؟ " قال : الله ورسوله أعلم . فقال : " المهاجرون يأتون يوم القيامة إلى باب الجنة ويستفتحون ، فيقول لهم الخزنة ، وقد حوسبتم ، فيقولون بأي شيء نحاسب ، وإنما كانت أسيافنا على عواتقنا في سبيل الله ، حتى متنا على ذلك قال : فيفتح لهم ، فيقيلون فيه أربعين عاما قبل أن يدخلها الناس " .[118]

Cabdilaahi ibnu Camruu (Rc) waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (Scw) wuxuu dhahay: ”Ma ogtihiin kooxda ugu horreysa ee jannada galaysa ummadayda? Waxay dhaheen: Ilaahay iyo rasuulkiisa ayaa og. wuxuu yiri: ”Muhaajiriinta ayaa imanaya maalinta qayaame albaabka jannada, waxay dalbanayaan in laga furo, khasnad-hayayaashii waxay ku dhahayaan: ma la idin xisaabiyey? Waxay dhahayaan: maxaa nalaga xisaabinayaa, kaliya seefahaygu garbaha ayay noo saarnaayeen anagoo ku dagaalamayna jidka Ilaahay, illamaa aan sidaa ku dhimanay. Wuxuu yiri: waa laga furayaa. Waxayna ku nasanayaan jannada afartan sanadood kahor intaan dadka kale soo galin”

## Masaakiinta ayaa ugu badan dadka jannada galaya

عن أسامة عن النبي صلى الله عليه وسلم قال قمت على باب الجنة فكان عامة من دخلها المساكين وأصحاب الجد محبوسون[119]

Usaama waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”waxaan istaagay albaabka jannada, dadka ugu

[118] Xaakim: 2436
[119] Bukhaari: 4900

badan ee galayna waa masaakiintii, dadkii xoolaha haystayna waa la xisaabinayey"

Walaalka ama walaasha muslimka ah ee faqiirnimo iyo saboolnimo lasoo daristay waa inaad ku bishaaraysataan in dhibaatada aduunyada oo dhan aad ilaawaysid marka hal mar lagu galiyo jannada raxmaanka.

Waxa rasuulkii Ilaahay lagasoo wariyey:

عن أنس بن مالك قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم يؤتى بأنعم أهل الدنيا من أهل النار يوم القيامة فيصبغ في النار صبغة ثم يقال يا ابن آدم هل رأيت خيرا قط هل مر بك نعيم قط فيقول لا والله يا رب ويؤتى بأشد الناس بؤسا في الدنيا من أهل الجنة فيصبغ صبغة في الجنة فيقال له يا ابن آدم هل رأيت بؤسا قط هل مر بك شدة قط فيقول لا والله يا رب ما مر بي بؤس قط ولا رأيت شدة قط[120]

Anas ibnu Maalik waxa laga wariyey inuu dhahay: "Waxa la keenayaa maalinta qayaame ruuxii ugu barwaaqaysnaa aduunyada oo kamida ehelka naarta, waxaana la galinayaa naarta hal mar, kadibna waxa lagu dhahayaa: ina aadamow, waligaa khayr ma aragtay? Waligaa nicmo makusoo martay? Wuxuu dhahayaa: maya, ilaahbaan ku dhaartee, rabbiyow. Waxa kale oo la keenayaa ruuxii dhibta ugu badan la kulantay aduunyada oo kamida ehelka jannada, waxa la galinayaa hal mar jannada, waxa lagu dhahayaa: waligaa dhib ma aragtay? Waligaa culays makusoo maray? Wuxuu dhahayaa: maya, Ilaahbaan ku dhaartee rabbiyoow, waligay dhib iyo culaystoona imasoo marin.

Dadka masaakiinta ah ee xabadda la iskaga dhigi jiray ee naftooda iyo maalkoodaba u huray diintoodii ayagaa jannada ugu hor galaya. Hadii dadku aanay aqoonin oo

[120] Muslim:2807

indhahooda ay ka qarsoonyihiin, waxa arka oo abaal marinaya rabbiga wayn subxaanahu wa tacaala.

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو ، عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ، أَنَّهُ قَالَ : " هَلْ تَدْرُونَ مَنْ أَوَّلُ مَنْ يَدْخُلُ الْجَنَّةَ مِنْ خَلْقِ اللَّهِ ؟ " ، قَالُوا : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ ، قَالَ : " أَوَّلُ مَنْ يَدْخُلُ الْجَنَّةَ مِنْ خَلْقِ اللَّهِ الْفُقَرَاءُ الْمُهَاجِرُونَ الَّذِينَ يُسَدُّ بِهِمُ الثُّغُورُ ، وَتُتَّقَى بِهِمُ الْمَكَارِهُ ، وَيَمُوتُ أَحَدُهُمْ ، وَحَاجَتُهُ فِي صَدْرِهِ لا يَسْتَطِيعُ لَهَا قَضَاءً ،[121]

Cabdilaahi ibnu Camru waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) inuu yiri: ”Ma taqaanaan cida ugu horeysa ee jannada ka galaysa khalqiga Ilaahay? Waxay dhaheen: Ilaahay iyo rasuulkiisa og. wuxu yiri: ”Khalqiga ilaahay cida ugu horeysa ee jannada ka galaysa waa fuqaradii muhaajiriinta, kuwaasoo aaga hore ee dagaalada la gayn jiray, dhibaatana la isaga dhigi jiray oo midkood ayaa dhiman jiray ayadoo laabtiisa ay ku jirto baahidiisii oo aanu awood u lahayn inuu fuliyo”

## Sifada dadka galaya Jannada:

يَدْخُلُ الْجَنَّةَ مِنْ أُمَّتِي زُمْرَةٌ هِيَ سَبْعُونَ أَلْفًا , تُضِيءُ وُجُوهَهُمْ إِضَاءَةَ الْقَمَرِ لَيْلَةَ الْبَدْرِ[122]

”Jannada waxa ummadayda ka galaya koox tiradoodu tahay todobaatan kun, oo wajiyadoodu u ifayaan sida dayaxa markuu dhamaystiranyahay”

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ ، قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " إِنَّ أَوَّلَ زُمْرَةٍ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ عَلَى صُورَةِ الْقَمَرِ لَيْلَةَ الْبَدْرِ ، وَالَّذِينَ يَلُونَهُمْ عَلَى أَشَدِّ كَوْكَبٍ دُرِّيٍّ فِي السَّمَاءِ إِضَاءَةً ، لا يَبُولُونَ وَلَا يَتَغَوَّطُونَ وَلَا يَمْتَخِطُونَ وَلَا يَتْفُلُونَ أَمْشَاطُهُمُ

---

[121] Ibnu Xabaan: 7581

[122] Bukhaari: 6176

الذَّهَبُ ، وَرَشْحُهُمُ الْمِسْكُ وَمَجَامِرُهُمُ الْأَلُوَّةُ وَأَزْوَاجُهُمُ الْحُورُ الْعِينُ أَخْلَاقُهُمْ عَلَى خُلُقِ رَجُلٍ وَاحِدٍ عَلَى صُورَةِ أَبِيهِمْ آدَمَ سِتُّونَ ذِرَاعًا فِي السَّمَاءِ " .[123]

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu dhahay: ”kooxda ugu horeysa ee jannada galaysa sawirkoodu waa dayaxa markuu dhamaystiranyahay, kuwa ku xigaana waa sida meeraha ugu dhow ee iftiinkiisu samada ka baxo, ma kaadinayaan, ma saxaroonayaan, duuf iyo candhuufna malaha, karfeedhoodu waa dahab, dhididkoodu waa miski, cuudkoodu waa uluwwah, dumarkoodu waa xuurul ciin, akhlaaqdoodu waa sida hal nin oo kaliya, sawirkii aabahood aadam ayay leeyihiin oo ah lixdan dhudhun oo xaga cirka ah”

Sidoo kale waxa laga wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) inuu yiri:

إن أول زمرة تدخل الجنة على صورة القمر ليلة البدر والتي تليها على أضوإ كوكب دري في السماء لكل امرئ منهم زوجتان اثنتان يرى مخ سوقهما من وراء اللحم وما في الجنة أعزب[124]

”Kooxda ugu horreysa ee jannada galaysa waa sida dayaxu markuu dhamaystiranyahay, kuwa ku xigaana waa meeraha ugu iftiinka dhow samada, midkastoo kamida wuxuu leeyahay laba xaas oo dhuuxo lugahooda laga dhex arkayo hilibkooda, jannadana ma joogo qof guurdoon ah”

[123] Muslim:5067

[124] Muslim:2834

## Soo dhoweynta ehelka Jannada:

عن أبي سعيد الخدري وأبي هريرة عن النبي صلى الله عليه وسلم قال ينادي مناد إن لكم أن تصحوا فلا تسقموا أبدا وإن لكم أن تحيوا فلا تموتوا أبدا وإن لكم أن تشبوا فلا تهرموا أبدا وإن لكم أن تنعموا فلا تبأسوا أبدا فذلك قوله عز وجل ونودوا أن تلكم الجنة أورثتموها بما كنتم تعملون[125]

Abisaciid Al-khudriyy waxa laga wariyey iyo abihurayra inay kasoo wariyeen nabiga (scw) inuu yiri: ”mid dhawaaqa ayaa dhawaaqaya: idinku waad caafimaadaysaan, waligiina ma bukoonaysaan, waxa idiinku sugan (jannada) inaad noolaataan, mana dhiman doontaan waligiin, waxa idiinku sugan inaad dhalinyaro ahaataan, mana gaboobaysaan waligiin, waxa idiin ku sugan inaad barwaaqowdaan, mana abaaroobaysaan waligiin. Waana qawlkii Ilaahay ee ahaa: ”Waxa loogu dhawaaqay waa jannadii aad ku dhaxasheen wixii aad camal falayseen”

عن أبي سعيد الخدري أن النبي صلى الله عليه وسلم قال إن الله يقول لأهل الجنة يا أهل الجنة فيقولون لبيك ربنا وسعديك والخير في يديك فيقول هل رضيتم فيقولون وما لنا لا نرضى يا رب وقد أعطيتنا ما لم تعط أحدا من خلقك فيقول ألا أعطيكم أفضل من ذلك فيقولون يا رب وأي شيء أفضل من ذلك فيقول أحل عليكم رضواني فلا أسخط عليكم بعده أبدا[126]

## Raali ayaa laga noqonayaa ehelka Jannada

Abi saciid al-khudriyy waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Ilaahay wuxuu ku dhahayaa ehelka jannada: ehelkii jannadow, waxay dhahayaan: waan ku ajiibnay rabbiyoow, khayrkuna gacantaada ayuu ku jiraaye,

[125] Muslim: 2837
[126] Muslim: 2829

wuxuu dhahayaa: ”raali ma noqoteen?” waxay odhanayaan: oo maxaanaan raali u ahayn rabbiyow, waxaad na siisay wax aanad siinin cid kamida khalqigaaga, wuxuu dhahayaa: ma idin siiyaa wax ka fadli badan? Waxay dhahayaan: rabbiyow, maxaa ka fadli badan? Wuxuu dhahayaa: raali ayaan idinka noqday oo idiinma cadhoonayo waligiin.”

## Aragga Rabbi

عَنْ صُهَيْبٍ ، عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ، قَالَ : " إِذَا دَخَلَ أَهْلُ الْجَنَّةِ الْجَنَّةَ ، قَالَ : يَقُولُ اللَّهُ تَبَارَكَ وَتَعَالَى : تُرِيدُونَ شَيْئًا أَزِيدُكُمْ ؟ فَيَقُولُونَ : أَلَمْ تُبَيِّضْ وُجُوهَنَا ، أَلَمْ تُدْخِلْنَا الْجَنَّةَ ، وَتُنَجِّنَا مِنَ النَّارِ ؟ قَالَ : فَيَكْشِفُ الْحِجَابَ ، فَمَا أُعْطُوا شَيْئًا أَحَبَّ إِلَيْهِمْ مِنَ النَّظَرِ إِلَى رَبِّهِمْ عَزَّ وَجَلَّ[127]

Suhayb waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Marka ehelka jannadu uu galo jannada, ayaa Ilaahay odhanayaa: ma rabtaan wax aan idiin kordhiyo? Waxay odhanayaan: miyaanad noo nuurin wajigayaga? Miyaanad na galin jannada? Miyaanad naga badbaadinin naarta? Wuxuu yiri: ”wuxuu faydayaa xijaabka, lama siinayo wax ay ka jecelyihiin inay daawadaan rabbigood isagaa sharaf iyo wayniba u sugantahaye”

[127] Muslim: 271

## Sifooyinka Xuural Caynta:

Xuurul Cayntu waa xaasaska iyo ooriyaha jannada,waxa guursanaya nimanka jannada galaya. Ninkuna wuxuu ugu jecelyahay gabadh xalaal u ah oo qurux iyo qiimamaba leh. Ilaahay wuxuu yiri:

وَلَهُمْ فِيهَا أَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ ۖ وَهُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٢٥﴾

"Waxay ku leeyihiin (jannada) xaasas la daahiriyey, ayaguna waaraya"[128]

وَزَوَّجْنَاهُم بِحُورٍ عِينٍ ﴿٥٤﴾

"Waxaan u guurinay Xuurul Cayn"[129]

1. Khamaarka Xuurul Caynta

Xuurul Cayntu waxay madaxa ku sidataa khamaar ama xijaab kii ugu qurxoonaa uguna wanaagsanaa. Rasuulkii Ilaahay wuxuu yiri:

ولنصيفها يعني الخمار خير من الدنيا وما فيها

"Khamaarkeeda ama xijaabka madaxa ay ku sidato ayaa ka khayr badan aduunyada iyo waxa dhex yaalaba"[130]

Hadii khamaarkeedii ka qurxoonyahay aduunka iyo waxa dhex yaalaba, bal kawaran ayada quruxdeeda heerka ay gaadhsiisantahay.

---

[128] Suuratu Albaqarah: 25
[129] Suuratu Dukhaan: 54
[130] Bukhaari: 6199

## 2. Wajiga Xuurul Caynta

Magaceedu waa Xawraa, macnaheeduna waa cadaan daran iyo indhaha aadka u madow. Cadaanta jidhkeeda waxa ku dhex jira guduud ama casaan. Ilaahay wuxuu yiri:

كَأَنَّهُنَّ بَيْضٌ مَّكْنُونٌ ﴿٤٩﴾

"Waxaad moodaa ukun (beed) dhawrsoon"[131]

Ereyga (بَيْضٌ مَّكْنُونٌ) waxa lagu fasiray ukunta marka la kariyo ee qolofta sare laga saaro siday u jilicsantahay oo kale ayay Xuural Cayntu u jilicsantahay, ayna u cadahay. Waxa kale oo lagu fasiray inay sida dheeman cad oo kale u eegyihiin. Waana waji iyo dhaban aan cidna taaban oo dhawrsoon.

## 3. Quruxda wajigeeda

Ilaahay wuxuu yiri:

فِيهِنَّ خَيْرَاتٌ حِسَانٌ ﴿٧٠﴾

"Waxa dhex jooga (jannada) haween qurxoon"[132]

Ereyga (حِسَانٌ) waxa looga jeeda dumarka wajigoodu aadka u qurxoonyahay. Markasta oo nimankoodu baxaan oo ay kusoo laabtaan gurigooda, waxa sii qurux badanaya wajigii Xuural Caynta.

## 4. Dabaysha Qurxinaysa Wajiga Xuural Caynta

Rasuulkii Ilaahay wuxuu yiri:

إِنَّ فِي الْجَنَّةِ لَسُوقًا يَأْتُونَهَا كُلَّ جُمُعَةٍ فَتَهُبُّ رِيحُ الشَّمَالِ فَتَحْثُو فِي وُجُوهِهِمْ وَثِيَابِهِمْ فَيَزْدَادُونَ حُسْنًا وَجَمَالًا فَيَرْجِعُونَ إِلَى أَهْلِيهِمْ وَقَدْ ازْدَادُوا حُسْنًا وَجَمَالًا فَيَقُولُ لَهُمْ أَهْلُوهُمْ وَاللَّهِ لَقَدْ ازْدَدْتُمْ بَعْدَنَا حُسْنًا وَجَمَالًا فَيَقُولُونَ وَأَنْتُمْ وَاللَّهِ لَقَدْ ازْدَدْتُمْ بَعْدَنَا حُسْنًا وَجَمَالًا

---

131 Suuratu Saafaat: 49

132 Suuratu Arraxmaan: 70

Jannada dhexdeeda waxa ahaaday suuq ay imanayaan jimce kasta, waxaana soconaya dabaysha waqooyiga, waxayna ku dhacaysaa wajiyadooda iyo dharkooda, kadibna waxa u kordhaya qurux iyo wanaag, waxayna u laabanayaan ehelkoodii, ayagoo ay u siyaaday wanaag iyo quruxba, ehelokooduna waxay dhahayaan: Ilaahbaan ku dhaartee waxa idiin korodhay wanaag iyo qurux, waxay dhahayaan: ilaahbaan ku dhaartee, idinkana waxa idiin korodhay wanaag iyo qurux.[133]

5. Indhaha Xuurul Caynta

Ilaahay wuxuu yiri:

وَحُورٌ عِينٌ ﴿٢٢﴾

Iyo Xuurul Cayn[134]

Xuurul Cayn waa gabadha indhaha waa wayn ee inta cad ay aad u cadahay, inta madowna aad u madawdahay. Indhaha waa wayna waa quruxda dumarka iyo raggaba sidaa darteed nabigeena (scw) isaguba wuu indho waynaa.

6. Indhaheedu way laabanyihiin

Indhaheeda waxay ku koobaysaa ninka qaba oo kaliya, mana fiirinayso bidix iyo midig toona. Mana rabaan nin aan ahayn ninka qaba mooyee. Waxayna u aragtaa in ninka qabaa uu yahay ninka ugu qaalisan ee jannada jooga.

Ilaahay wuxuu yiri:

---

[133] Muslim: 2833
[134] Suuratu Al-waaqicah: 22

فِيهِنَّ قَاصِرَاتُ الطَّرْفِ

"Waxa (jannada) dhexdeeda jooga dumar indhahoodu laabanyihiin"[135]

وَعِندَهُمْ قَاصِرَاتُ الطَّرْفِ أَتْرَابٌ (52)

"Agtooda waxa ahaaday haweenkii indhahooda laabay oo is la'eeg"[136]

### 7. Quruxda sankeeda iyo siduu u jilicsanyahay

Xuurul caynta sankeedu waa qurux badanyahay, waxa laga daahiriyey duuf, dhidid, hargab, cuncun, qabow iyo sanboorba.

Ilaahay wuxuu yiri:

وَأَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ

"iyo xaasas la daahiriyey"[137]

### 8. Dhabankeeda iyo siduu nadiifta u yahay

Ilaahay wuxuu yiri:

كَأَنَّهُنَّ الْيَاقُوتُ وَالْمَرْجَانُ ﴿٥٨﴾

"Waxaad moodaa sida Yaaquutka iyo Marjaanka (jawharado midbayo leh)"[138]

Dhabanka Xuural Cayntu wuu ka saafisan yahay muraayada, waanu ka cadyahay cadceeda, waana dhaban quruxda iyo dhalaalkiisa la moodo jawharado midabyo leh. Ma malayn

---

[135] Suuratu Arraxmaan: 56

[136] Suuratu Saad: 52

[137] Suuratu Alcimraan: 15

[138] Suuratu Arraxmaan: 58

kartid quruxda Ilaahay ku abuuray gabadha xuural caynta ah.

Gabadhaa qurxoon waxa ku guulaysanaya ninka cadhadiisa qarsada, wuxuu yiri rasuulkii Ilaahay:

من كظم غيظا وهو يستطيع أن ينفذه دعاه الله يوم القيامة على رءوس الخلائق حتى يخيره في أي الحور شاء

"Cidii qarisa cadho uu awood u leeyahay inuu fuliyo, Ilaahay wuxuu uga yeedhayaa maalinta Qayaame makhluuqaadka korkooda, illamaa ilaahay ka dooransiiyo xuurul-caynta uu doono"[139]

### 9. Afkeeda iyo nuurka la socda dhoola cadaynteeda

Hilaac ayaad moodaa inuu ka kacayo afkeeda markay dhoola cadayso, waxayna dhoola cadaynteedu ifinaysa dunida oo dhan.

### 10. Heesta Xuurul Caynta

Xuural Cayntu jannada dhexdeeda ayay ku heesaysaan, ayadoo ku qaadaysa codka ugu macaan, kaasoo nafta u raaxaynaya oo qalbiga ninkeedana dajinaya.

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: إن أزواج أهل الجنة ليغنين أزواجهن بأحسن أصوات سمعها أحد قط، إن مما يغنين به نحن الخيرات الحسان أزواج قوم كرام ينظرون بقرة أعيان، وإن مما يغنين به نحن الخالدات فلا نمتنه نحن الآمنات فلا نخفنه نحن المقيمات فلا نظعنه.

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: haweenka jannadu waxay ugu heesayaan nimankooda codka ugu wanaagsan ee la maqlo, waxa kamida heestooda: "Anagu dumar fiican oo qurxoon baanu nahay, raggayagu waa qoom sharaf badan oo eegaya indho doogsiyo (raaxaysi)" heesahooda

---

[139] Tirmadi: 2021

waxa kamida: ”Anagu ku waaraya ayaanu nahay mana dhimanayno, kuwa aamina ayaanu nahay mana cabsanayno, kuwa deegaana ayaanu nahay mana gaboobayno”[140]

Waxa kale oo ay ku heesayaan:

إن الحور في الجنة يغنين يقلن نحن الحور الحسان هدينا لأزواج كرام

Xuural Cayntu way heesayaan ayagoo leh: “Anagaa ah xuurta wanaagsan, waxa nala siiyey niman sharaf leh”[141]

Waxa kale oo kamida heesahaas:

عن أنس بن مالك أن النبي صلى الله عليه وسلم قال: إن الحور في الجنة يغنين يقلن نحن الحور الحسان هدينا لأزواج كرام

Anas ibnu Maalik waxa laga wariyey inuu nabiga (scw) dhahay: ”Xuurta joogta jannadu way heesayaan ayagoo leh: Anaga weeye Xuurta wanaagsan, waxa nala siiyey niman sharaf leh”[142]

Heesahana waxa loogu raaxaynaa dadka ka dheeraada heesaha aduunyada ee xaaraanta ah. Haweenka xuural caynta ah markay heesayaan, waxay ku heesayaan hadal wanaagsan oo aan ceeb iyo aflagaado midna lahayn. Waxay amaanayaan rabbigooda iyo nimankooda, waxay

---

140 رواه الطبراني في الصغير والأوسط ورواتهما رواة الصحيح كما قال المنذري وصححه الألباني.

141 رواه ابن أبي الدنيا والطبراني وصححه الألباني.

142 رواه الطبراني في الأوسط ورجاله وثقوا

sifaynayaan nicmada Ilaahay siiyey iyo raaxada ay ku noolyihiin ee aanay kabaxaynin.

### 11. Dhirta Jannada ee heesaysa:

Jannada waxa ahaaday dhir ka samaysan macdanada dheemanta, yaaquutka iyo zabarjadka, markaasuu Ilaahay soo dirayaa dabayl kadibna waxa kasoo baxaya cod macaan oo aan waligeed hore loo maqlin.

Ibnu Cabaas waxa laga wariyey inuu yiri: ”jannada waxa ahaaday geed jirrida hadhkeeda uu soconayo boqol sanadood qofka faraska saaran. Waxayna ku sheekaysanayaan hooskeeda, markaasaa qaarkood u xiisoonayaan oo ay xasuusanayaa madadaaladii aduunyada, kolkaasaa Ilaahay soo dirayaa dabayl, waxayna dhaqaajinaysaa geedkii oo ay ka maqlayaan dhamaan madadaaladii aduunka”

### 12. Xuural Cayntu dhalinyaranimo ayay ku waarayaan

وَلَهُمْ فِيهَا أَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ ۖ وَهُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٢٥﴾

”Waxay ku leeyihiin (jannada) xaasas la daahiriyey, ayaguna waaraya”[143]

Waarida waxa looga jeeda in quruxdooda iyo wanaagoodu aanu marnaba is badalayn. Waxay ku waarayaan dhalinyaronimada, kamana baxayaan jannada. Heestii Xuural Cayntana waxa kamid ahaa:

نحن الخالدات فلا نمتنه

“Anagu ku waaraya ayaan nahay ee aan dhimanayn”

143 Suuratu Albaqarah: 25

### 13. Dumar nimcaysan oo barwaaqadu ka muuqato

Markay Xuural Ciintu heesaysu waxa heesteeda kamid ahaa:

نحن الناعمات فلا نبأس أبداً

“Anagu waanu nicmaysanahay mana xumaanayno waligayo”

Waa dumar jidhkoodu jilicsanyahay oo barwaaqadu ka muuqato. Mana ku gaboobayaan Jannada dhexdeeda, jidhkooduna isma badalayo. Ilaahay wuxuu yiri:

ادْخُلُوا الْجَنَّةَ أَنتُمْ وَأَزْوَاجُكُمْ تُحْبَرُونَ ﴿٧٠﴾

Jannada gala idinka iyo haweenkiinu idinkoo ku nicmaysn (farxaya)[144]

### 14. Gabadh Raaliyo ah

ونحن الراضيات فلا نسخط أبداً

”Anagu raaliyo ayaanu nahay, mana cadhoonayno waligayo”

Waa gabdho raaliyo ah oo ninkooda aan waligood ka cadhaysiinayn, ayaguna kama cadhoonayaan raggooda. Jannada dhexdeeda majirto, hinaase, masayr, xaasidnimo, cuqdad, kibir iyo cadho toona, waa haween laga daahiriyey dhamaan ceebaha aduunyada.

### 15. Gabdho aan guurayn

نحن المقيمات فلا نظعنه

“Anagu deegaan baan nahay mana gaboobayno”

[144] Suuratu Zukhruf: 70

Waa haween deegaankooda jooga oo aan safar iyo socdaal galaynin. Waa dumar ku qanacsan nolosha Ilaahay siiyey iyo raaxada ay ku noolyihiin. Nimankooda kama cadhoonayaan, kamana tagayaan guryahooda.

### 16. Gabdho aan gurigooda ka baxayn

حُورٌ مَّقْصُورَاتٌ فِي الْخِيَامِ ﴿٧٢﴾

” Xuurul Cayn ku asturan teendhada dhexdeeda”[145]

Xuural Cayntu waxay ku asturanyihiin guryahooda, mana aha xabsi ama jeel inay ku jiraan ee quruxda gabadha iyo inay qaali tahay waxa markhaati ka ah inay guri joog tahay oo aanay suuqa wareegayn. Sidoo kale marka ninkeedu safar galayo ama uu rabo inuu socdaalo majirto wax u diidaya inay raacdo.

### 17. Taandhada Xuural Caynta

Taanadhada ay dhex joogto Xuurul Cayntu waa taandho cajiiba oo ballaceedu la’eegayahay lixdan mayl xagal kasta:

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم إن في الجنة خيمة من لؤلؤة مجوفة عرضها ستون ميلا في كل زاوية منها أهل ما يرون الآخرين يطوف عليهم المؤمنون

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Jannada dhexdeeda waxa ahaaday taandho ka samaysan dheeman la qallajiyey, ballaceedu la’eegyahay lixdan mayl xagal kasta, waxa jooga ehel aan kuwa kale arkin oo mu’miniintu ku dul dawaafayaan”[146]

### 18. Waa dumar amaanaya nimankooda

Markay heesayaan waxay amaanayaan ninkooda, waxa kamid ahaa:

---

[145] Suuratu Arraxmaan: 72

[146] Bukhaari: 4598

أزواج قوم كرام

“Waxaanu nahay xaasaska qoom Sharaf leh”

هدينا لأزواج كرام

“Waxa naloo hibeeyey niman Sharaf leh”

طوبى لمن كان لنا وكنا له

“Waxa fiicnaaday cida na leh ee anaguna aan leenahay”[147]

### 19. Timaha Xuural Caynta

Timaha Xuurul Cayntu waa madow ay udgoontahay carafteedu, waxaad moodaa miski. Maadaama midabkoodu cad yahay, waxa sii qurxinaya midabka timaha ee kasoo hor jeeda oo ah midabka madow. Timahaasi maaha kuwa is badalaya oo ay galayso cirro, toxob, cuncun, injir iyo bidaar toona.

### 20. Laabta Xuural Caynta iyo horraadadeeda

Dadka tilmaama quruxda dumarka waxay sheegaan gabadhu waa inay horraado leedahay, walibana ay yihiin kuwa goobaabo ah sida xabbad tufaaxa oo kale. Xuural Cayntu horraadadeedu waa kuwo goobaabo ah oo aan dhacayn ama liicaynin, kumana imanayo isabadlka ku yimaada dumarka aduunyada markay nuujiyaan caruurta.

وَكَوَاعِبَ أَتْرَابًا ﴿٣٣﴾

“Waxay guursan haween da’yar oo is la’eeg”[148]

Ereyga (كَوَاعِبَ) wuxuu cadaynayaa in gabdhahaas dhalinyaro yihiin oo laabtoodu soo taagantahay. Laabta

[147] Tirmadi: 2564
[148] Suuratu Naba: 33

taagana waxa lagu yaqaana gabdhaha markay da'doodu yaryihiin, waana mid sii kordhinaysa quruxdooda.

### 21. Beerka Xuural Caynta

Xuural Caynta xididadeeda iyo dhuuxeeda waxa laga arkaa dushooda maadaama ay yihiin macdanta dheemanka. Beerkeeduna waa muraayad uu ninku isku daawanayo, halka gabadhuna ay isku daawanayso beerka ninka.

حَوْرَاءُ عَيْنَاءُ عَلَيْهَا سَبْعُونَ حُلَّةً يُرَى مُخُّ سَاقِهَا مِنْ وَرَاءِ حُلَلِهَا ، كَبِدُهَا مِرْآتُهُ ، وَكَبِدُهُ مِرْآتُهَا

"Waa xuural cayn cad oo indho wayn, waxa dusha ka saaran todobaatan maro (oo xariira) waxa dhuuxa lugteeda laga arkayaa marada hoosteeda, beerkeedu waa muraayada, isagana beerkiisu waa muraayad"[149]

### 22. Gacmaha Xuural Caynta

"Hadii gacanta xuural caynta lasoo laalaadiyo waxay daminaysaa cadceeda, fargalka ama kaatunka ay gacanta ku sidato hadii la keeni lahaa dhulka, waxay u iftiimin lahayd sida qorraxdu u iftiimiso dhulka. Taasi waa gacanteedii ee bal kawarran wajigeeda…"[150]

### 23. Dumar daahira

Dumarka Xuurul Caynta ah iyo dumarka muslimaatka ah ee jannada galaya waxa laga daahiriyey ceeb kasta oo kamida ceebaha aduunyada, sida kaadi, saxaro, xayd, nifaas iyo wax kasta oo dhib ku keena dumarka.

وَأَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ

---

[149] البعث والنشور للبيهقي/421

[150] الترغيب والترهيب حديث 2228

"Iyo Xaasas la daahiriyey"[151]

Waa haween dhibaato kasta laga daahiriyey mid jidheed iyo mid nafsiyaba. Akhlaaqda xun iyo dabceecada aan wanaagsanayn waa laga daahiriyey.

### 24. Bikranimada Xuural Caynta

فَجَعَلْنَاهُنَّ أَبْكَارًا ﴿٣٦﴾ عُرُبًا أَتْرَابًا ﴿٣٧﴾

"Waxaan ka yeelnay bikrooyin (36) oo ninkooda jecele oo is la'eeg (37)"

Haweenka jannada ha ahaadaan Xuural Caynta ama dumarka aduunyadaba, waxa Ilaahay ka dhigay bikrooyin cod fiican oo ninkeeduna jecel. Markasta oo ninku gogol la wadaago wuxuu helayaa ayadoo bikro ah.

### 25. Gogosha lamaanaha jannada

Sida laga qaadanayo quraanka iyo sunnadaba ninka iyo xaaskiisa jannadu waxay wadaagayaan xiriir gogoleed.

لَمْ يَطْمِثْهُنَّ إِنسٌ قَبْلَهُمْ وَلَا جَانٌّ ﴿٧٤﴾

"May taabanin (galmo) insi ka horeeyey iyo jinni toona"[152]

Aayadan sharafta leh waxay inoo cadaynaysaa in ninka ehelka jannada xuural cayntiisa Ilaahay u guurinayo aanay taabanin (gogogl) la wadaagin cid isaga kahoreysay. Taasoo macnaheedu tahay in xiriir gogoleed uu la wadaagi doono xaaskiisa jannada.

كَذَٰلِكَ وَزَوَّجْنَاهُم بِحُورٍ عِينٍ (54)

[151] Suuratu Alcimraan: 15
[152] Suuratu Arraxmaan: 74

“Sidoo kale waxaan u guurinay Xuural Cayn (54)”[153]

Guurka ama nikaaxa waa la yaqaana macnaha looga jeedo, marba hadii ninkii loo guuriyey haweenay xuural cayna waa arrin fudud oo la fahmi karo in xiriir gogoleedna uu la wadaagayo xaaskiisa.

عن أنس رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال : " يُعْطَى الْمُؤْمِنُ فِي الْجَنَّةِ قُوَّةَ كَذَا وَكَذَا مِنْ الْجِمَاعِ قِيلَ يَا رَسُولَ اللَّهِ أَوَ يُطِيقُ ذَلِكَ قَالَ يُعْطَى قُوَّةَ مِائَةٍ "

Anas ibnu Maalik (Rc) waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: “Mu’minka jannada dhexdeeda waxa lagu siinaya awood intaasa xaga galmada, waxa la yiri rasuulkii Ilaahay: miyuu awoodaa? Wuxuu yiri: waxa la siinaya awooda boqol”[154]

## 26. Lugaha Xuural Caynta

Lugaha Xuural Caynta nuurka ka baxaya darteed hadii la saaro todobaatan maro oo xariira waxa laga dhex arkayaa xididadooda iyo dhuuxooda.

لِكُلِّ امْرِئٍ زَوْجَتَانِ مِنْ الْحُورِ الْعِينِ يُرَى مُخُّ سُوقِهِنَّ مِنْ وَرَاءِ الْعَظْمِ وَاللَّحْمِ

“Ninkasta wuxuu leeyahay laba haweena oo xuural cayna oo dhuuxa lugahooda laga dhex arkayo lafaha iyo hilibka”[155]

## 27. Udugeeda iyo dharkeeda

Dharka ay sidato waa xariir diibaaj, istbraq iyo sundus. Caraftooda waa uduga ugu udgoon oo urtiisu buuxinayso jannada iyo dhulka inta u dhaxaysa.

[153] Suuratu Zukhruf: 54
[154] Tirmadi: 2459
[155] Bukhaari: 3014

وَلَوْ أَنَّ امْرَأَةً مِنْ أَهْلِ الْجَنَّةِ اطَّلَعَتْ إِلَى أَهْلِ الأَرْضِ لأَضَاءَتْ مَا بَيْنَهُمَا وَلَمَلأَتْهُ رِيحًا

“Hadii gabadh kamida ehelka jannadu ay dhulka usoo baxdo way iftiimin lahayd inta u dhaxaysa, waxayna ka buuxin lahayd udgoon”[156]

لِكُلِّ رَجُلٍ مِنْهُمْ زَوْجَتَانِ عَلَى كُلِّ زَوْجَةٍ سَبْعُونَ حُلَّةً يُرَى مُخُّ سَاقِهَا مِنْ وَرَائِهَا

“Ninkasta oo kamida wuxuu leeyahay laba xaas, xaas kasta waxay sidataa todobaatan maro (oo xariira) oo laga dhex arkayo dhuuxa lugteeda”[157]

## 28. Cimriga Xuurul Caynta

Dumarka ehelka jannadu waa kuwo is la’eeg xaga da’da oo la moodo inay isu wada eegyihiin.

وَكَوَاعِبَ أَتْرَابًا ﴿٣٣﴾

“Waxay guursan haween da’yar oo is la’eeg”[158]

Da’doodu waa sadex iyo sodon jir dhalinyaro ah sida nimankooda oo kale.

عَنْ مُعَاذِ بْنِ جَبَلٍ أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ يَدْخُلُ أَهْلُ الْجَنَّةِ الْجَنَّةَ جُرْدًا مُرْدًا مُكَحَّلِينَ أَبْنَاءَ ثَلَاثِينَ أَوْ ثَلَاثٍ وَثَلَاثِينَ سَنَةً

Mucaad ibnu Jabal waxa laga wariyey in nabigu (scw) yiri: “Ehelka jannadu waxay galayaan jannnada ayagoon timo hoose lahayn, timo gadhna lahayn oo indho kuulan ahna sadex iyo sodon ama sodon sano jiro ah”[159]

---

[156] Bukhaari: 2587
[157] Tirmadi: 2534
[158] Suuratu Naba: 33
[159] Tiramdi: 2545

## 29. Yaa loo guurinaya Xuurul Caynta

Ugu yaraan ninku wuxuu helayaa laba xuural cayna, sida xadiiskan tilmaamayo:

لِكُلِّ رَجُلٍ مِنْهُمْ زَوْجَتَانِ عَلَى كُلِّ زَوْجَةٍ سَبْعُونَ حُلَّةً يُرَى مُخُّ سَاقِهَا مِنْ وَرَائِهَا

“Ninkasta oo kamida wuxuu leeyahay laba xaas, xaas kasta waxay sidataa todobaatan maro oo laga dhex arkayo dhuuxa lugteeda”[160]

## 30. Shahiidka 72 xuural cayna ayaa loo guuriyaa

" لِلشَّهِيدِ عِنْدَ اللَّهِ سِتُّ خِصَالٍ : يُغْفَرُ لَهُ فِي أَوَّلِ دَفْعَةٍ ، وَيَرَى مَقْعَدَهُ مِنَ الْجَنَّةِ ، وَيُجَارُ مِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ ، وَيَأْمَنُ مِنَ الْفَزَعِ الْأَكْبَرِ ، وَيُوضَعُ عَلَى رَأْسِهِ تَاجُ الْوَقَارِ الْيَاقُوتَةُ مِنْهَا خَيْرٌ مِنَ الدُّنْيَا وَمَا فِيهَا ، وَيُزَوَّجُ اثْنَتَيْنِ وَسَبْعِينَ زَوْجَةً مِنَ الْحُورِ الْعِينِ ، وَيُشَفَّعُ فِي سَبْعِينَ مِنْ أَقَارِبِهِ "

“Shahiidku ilaahay agtiisa wuxuu ku leeyahay todoba arrimood: danbigiisa loo dhaafaa dhibicda u horeysa (dhiigiisa), booskiisa jannadana wuu arkaa, cadaabka qabrigana waa laga badbaadiyaa, argagaxa wayna wuu ka aamin noqdaa, madixiisana waxa la saaraa taajka qadarinta, yaaquutkiisu uu ka khayr badanyahay aduunyada iyo waxa dhex yaalaba, waxa loo guuriyaa todobaatan iyo labo dumara oo xuural cayna, wuxuuna u shafeeco qaadaa todobaatan qaraabadiisa ah”[161]

## 31. Xaaskaaga Xuural Caynta ah ilaahay ayay kaa dalbataa

Maadaama xuural caynta da’doodu aanay is badalin, waxa suurtagal ah in Ilaahay abuuray xuural cayntaadii dhawr boqol oo sanadood kahor. Ninka wanaagsan ee Ilaahay ka

[160] Tirmadi: 2534
[161] Tiramdi: 1584

cabsada hadii xaaskiisu ay dhibto waxay xuural cayntiisu tidhaahdaa: ha dhibin ninka Alle ku dilye.

عَنْ مُعَاذِ بْنِ جَبَلٍ ، عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : ( لَا تُؤْذِي امْرَأَةٌ زَوْجَهَا فِي الدُّنْيَا إِلَّا قَالَتْ زَوْجَتُهُ مِنَ الْحُورِ الْعِينِ : لَا تُؤْذِيهِ قَاتَلَكِ اللهُ ؛ فَإِنَّمَا هُوَ عِنْدَكِ دَخِيلٌ يُوشِكُ أَنْ يُفَارِقَكِ إِلَيْنَا )

Mucaad ibnu Jabal waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: "gabadh ninkeeda ma dhibto hadii ay dhibtaba waxa xaaskiisii xuural cayntu dhahaysaa: ha dhibin, Alle ku dilyee. Isagu marti unbuu kuu yahay, wuxuu ku dhow yahay inuu noo yimaadee"[162]

Xadiiskan waxan ka faa'idaynaa:

- In ehelka samadu arki karaan camalada bani aadamka.
- In xuural cayntu ay nooshahay oo ay joogto jannada.
- In ay garanayso ninkeeda oo loogu bishaareeyey.
- In Ilaahay cilmigiisa ku ogyahay cida ehelka jannada ah.
- In gabadha xuural cayntu ka cadhoonayso dhibka loo gaysto ninkeeda jannada.
- In dumar ay iska ilaaliyaan dhibaatada ay u gaysanayaan raggooda, hadii kale ay waayi doonaan.
- Gabadha fiican ee ninkeeda raali galisa inay farxad galinayso xuural cayntiisa.

[162] Axmed: 22101

- In Ilaahay aanu jeclayn dulmiga iyo dhibaatada.

## Dumarka ehelka Jannada iyo Xuural Caynta keeba fadli badan?

Dumarka xuural caynta ah sababta quraanka iyo sunnadaba loogu sheegay waa in ninka la tuso abaalmarintiisa jannada hadii Ilaahay uu adeeco. Xuural cayntuna maaha nicmada ugu wayn ama ugu qaalisan ee jannada Ilaahay ku bixinayo, mana aha run ahaantii nicmo yar.

Dhanka kale ma simayaan dumarka Ilaahay rumeeyey, salaada tukaday ee soomay raggoodana adeecay ee dhibaatada aduunyada soo maray iyo gabadh Ilaahay ku abuuray jannada oo aan dhib iyo kadeed toona soo marin.

Haweenka aduunyada ee jannada galaya ayagaa ka qurxoon kana heer sareeya xuural caynta, maadaama ay imtixaankii aduunyo soo mareen. Ilaahay wuxuu yiri:

إِنَّا أَنشَأْنَاهُنَّ إِنشَاءً ﴿٣٥﴾ فَجَعَلْنَاهُنَّ أَبْكَارًا ﴿٣٦﴾ عُرُبًا أَتْرَابًا ﴿٣٧﴾ لِّأَصْحَابِ الْيَمِينِ ﴿٣٨﴾

Annagaa abuurnay abuurid kale (dumarkii aduunka) (35) kana yeelnay bikrooyin (36) ninkooda jecel oo is la'eeg (37) waxa iska leh (dumarkan) asxaabta midigta (38)[163]

Dumarkii aduunyada ee cimrigoodu waynaa ayaa Ilaahay dib abuurayaa, waana la qurxoonaysiinayaa, waxa laga dhigayaa bikrooyin halkii markii hore ay ahaayeen dumar

[163] Suuratu Al-waaqica: 35,36,37,38

carmala ama garooba. Ninkooda way jecelyihiin, codkooduna wuu fiicanyahay, wayna is la'eegyihiin.

Waxa isku cimri noqonaya gabadha iyo hooyadeed ama ayeeyadeed. Dumarkan la qurxiyey waxa guursanaya oo mudanaya niman wanaagsan oo kitaabkoodii gacanta midigta kusoo qaatay oo loo yaqaano Asxaabu Al-yamiin.

## Abaalmarinta ninka iyo gabadha:

Ninka markuu Ilaahay u ballan qaaday jannada waxa loogu bishaareeyey gabadh daahira oo xuural cayn la dhaho, halka gabadhiina loogu bishaareeyey in ayadu ay quruxbadnaanayso kadibna loo guurinayo nin wanaagsan.

Sida dabiiciga ah ee Ilaahay haweenka ku abuuray waxa weeye inay jecelyihiin in jidhkoodu qurux bato, sidaa darteed lacagta ugu badan ee dumarku haystaan waxay ku baxdaa sidii ay isu qurxin lahayeen, waxay marsadaan cillaan ama xinnaha, wajiga waxa la mariyaa make up ama miikyaaj, cadarrada la isku buufiyo, dharka iy dahabka la gashto.

Ruuxa dhadiga ah waxay nolosheeda inbadan ku mashquushaa sidii ay isu qurxin lahayd ayna da'deeda uga yaraan lahayd. Maadaama Ilaahay ku abuuray is qurxinta wuxuu Ilaahay ugu ballan qaaday in dib loo abuurayo kadibna dhalinyaro bikro ah laga dhigayo, nin wanaagsana loo guurinayo, sidoo kale gurigii iyo deegaankii ay joogtayna uu yahay jannada raxmaanka, lagana daahirinayo ceeb kasta oo nuqsaan ku ah haweenka aduunyada. Ilaahay gabadha wuxuu ku abuuray xishood, ayada ayaana ninku doona markuu guursanyo oo lagu waajibiyey inuu bixiyo maherkeeda, biilkeeda iyo gurigeedaba.

## Tusaale:

Aabe dhalay wiil iyo gabadh dhameeyey waxbarashadii jaamicadeed ayaa raba inuu wiilka iyo gabadhaba ka farxiyo, muxuu wiilka iyo gabadha ugu ballan qaadi karaa?

Wiilka haduu ku dhaho: aabe, maadaama aad jaamicadii dhamaysay waxaad soo fiirsataa gabadh qurxoon oo aan kuu guuriyo. Wiilku wuu farxayaa, sababtoo ah gabadh qurxoon isaga agtiisa waa ku qaali, waana hadyad wax loo dhigaa aanay jirin.

Bal kawarran haduu aabuhu ku dhaho gabadhiina: Aabe, jaamicadii waad dhamaysay ee adiguna soo raadso wiil feedho wayn oo qurux leh, waan kuu aroosayaaye! Suurtagal ma tahay in aabe gabadh uu dhalay uu sidaas u ku dhaho, ayadoo la ogyahay in gabadhuna ay wiil fiican u baahantahay.

Maadaama gabadha ilaahay faray xishoodka, marnaba aabaheed kama filanayso hadyad noocaas ah. Laakiin hadii aabuhu inantiisa u ballan qaado inuu usoo iibinayo takham dahaba, dhar qurxoon, kiriimyo la isku udgoonaysiiyo, qolkeeda hurdada oo sariir cusub loo keeno way farxi lahayd run ahaantii.

Ilaahayna tusaalaha sare isaga leh, ninkana gabadh qurxoon ayuu u ballan qaaday, gabadhana quruxdeedii ayuu horreysiiyey. Subxaana Allah, Ilaahay xikamad badane weeye.

# Cuntada, Cabitaanka, Weelka iyo Dharka Ehelka Jannada

Ilaahay wuxuu yiri:

يُطَافُ عَلَيْهِم بِصِحَافٍ مِّن ذَهَبٍ وَأَكْوَابٍ ۖ وَفِيهَا مَا تَشْتَهِيهِ الْأَنفُسُ وَتَلَذُّ الْأَعْيُنُ ۖ وَأَنتُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٧١﴾

”Waxa lala dul wareegayaa korkooda weelal dahaba (saxamo) iyo koobab, waxa dhexdeeda ahaaday wax kasta oo naftu doonto iyo indho doogsi, idinkuna waad ku waaraysaan”[164]

Aayadan sharafta leh waxay inoo tilmaantay in ehelka jannada lagula dul wareego saxamo iyo koobab dahaba, lamana sheegin cuntadii ku jirtay. Dul wareegistuna waxa weeye in galin hore iyo galinka danbaba loo keenayo cuntooyin iyo cabitaano kala duwan.

## Ninka Jannada ugu darajada hooseeya iyo cuntada la siinayo

Mufasiriintu waxay dhaheeh: ka ugu darajada hooseeya jannada waxa u adeegaya todobaatan kun oo caruura oo u keenaya todobaatan kun oo saxamo dahaba, waanu ka cunayaa dhammaantood, mid kasta waxa ku jira cunto ka duwan ta kale, waanu wada cunayaa dhamaanteed bilow

[164] Suuratu Zukhruf: 71

ilaa dhammaad, mid kasta oo kamida wuxuu ka helayaa dhadhan ka duwan kii hore iyo midab ka duwan kuwii hore.

Cuntada iyo cabitaanada la siinayo kama qaadayo cudur iyo xanuun toona, wuxuuna u cunayaa faakihaysi iyo raaxaysi. Wuxuu dhahayaa ninka ugu darajada hooseeya jannadu: Rabbiyow, hadii aan casuumo dadka ehelka jannada oo dhan, waxa agtayda yaala waxba kama nuqsaamayaan.

Wax kasta oo naftiisu doonatana wuu helayaa, xitaa markuu hudhmo qaato ayuu xasuusanayaa cunto kale, markaasay hudhmadii isu badalaysaa cuntadii uu rabay. Wax kasta oo naftiisu ku raaxaysato ayuu helayaa, mana daalayo mana caajisayo, waanu ku waarayaa jannada dhexdeeda. Ilaahay hanaga yeelo kuwa jannada ku waaraya.[165]

Ilaahay wuxuu yiri:

إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي ظِلَالٍ وَعُيُونٍ ﴿٤١﴾ وَفَوَاكِهَ مِمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٤٢﴾ كُلُوا وَاشْرَبُوا هَنِيئًا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

Kuwa Alle ka cabsaday waxay ku dhex jiraan hadh iyo ilo (41) faakihooyin wixii ay ka doonaan (42) cuna oo caba ayadoo la idinku bogaadinayo wixii aad usoo camal fasheen darteed (43)[166]

Aayadan sharafta leh waxay inoo tilmaamaysaa in dadka rabbigood ka cabsaday ay ku noolyihiin hadhkii jannada iyo ilihii jannada. Ma dareemayaan bacad iyo kulayl toona, mana arkayaan qabow iyo dabaylo duufaano wata.

---

[165] Tafsiirka Ibnu Kathiir iyo Imaamu Al-Qurdibiyy

[166] Suuratu Almursalaat: 41, 42, 43

Waxa la siinayaa faakihooyin kala duwan, mid kasta oo naftoodu doonto waxay u helayaan sida ugu fudud. Waxa lagu dhahayaa cuna oo caba oo raaxaysta idinkoo nabada oo aamina. Abaal gudkana waxa la idiin siiyey wixii aad usoo camal fasheen, marka laga yimaado naxariistii Ilaahay.

## Faakihooyinka Jannadu ma idlaadaan mana qaadhaan

مَّثَلُ الْجَنَّةِ الَّتِي وُعِدَ الْمُتَّقُونَ ۖ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ۖ أُكُلُهَا دَائِمٌ وَظِلُّهَا ۚ تِلْكَ عُقْبَى الَّذِينَ اتَّقَوا ۖ وَّعُقْبَى الْكَافِرِينَ النَّارُ ﴿٣٥﴾

"Tusaalaha jannadii loogu yaboohay kuwa Ilaahay ka cabsada, waxa soconaya hoosteeda wabiyoyaalkii, cunideedu waa daayim (ma tagayo) iyo hadhkeeduba, waa taa cidhib danbeedka kuwa ilaahay ka cabsaday, cidhib danbeedka gaaladuna waa naar"[167]

Ilaahay (swt) wuxuu aayadan sharafta leh tusaale ugusoo qaatay nicmada iyo barwaaqada taala jannada, waxa hoosteeda qulqulaya wabiyo, midhaheeda iyo hadhka dhirteedu waa daayima oo aan dhamaanayn ama aan kala go'ayn. Rasuulkii Ilaahay (scw) isagoo ka hadlaya midhaha jannada wuxuu yiri:

إني رأيت الجنة فتناولت عنقودا ولو أصبته لأكلتم منه ما بقيت الدنيا

"waxaan arkay jannadii, waxaanan doonay inaan qabsado xidhmo (cinaba), haddaan soo qaadi lahaa waa cuni lahaydeen inta aduunyada ka hadhay"[168]

---

[167] Suuratu Arracdi: 35
[168] Bukhaari: 1004

Faakihadaasi hadii ay aduunka iman lahayd waxa la cuni lahaa inta qayaamadu ka dhacayso, sababtuna waxa weeye waa faakiho barakaysan oo daayima oo aan dhamaanayn.

Ilaahay wuxuu yiri:

فَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَابَهُ بِيَمِينِهِ فَيَقُولُ هَاؤُمُ اقْرَءُوا كِتَابِيَهْ ﴿١٩﴾ إِنِّي ظَنَنتُ أَنِّي مُلَاقٍ حِسَابِيَهْ ﴿٢٠﴾ فَهُوَ فِي عِيشَةٍ رَّاضِيَةٍ ﴿٢١﴾ فِي جَنَّةٍ عَالِيَةٍ ﴿٢٢﴾ قُطُوفُهَا دَانِيَةٌ ﴿٢٣﴾ كُلُوا وَاشْرَبُوا هَنِيئًا بِمَا أَسْلَفْتُمْ فِي الْأَيَّامِ الْخَالِيَةِ ﴿٢٤﴾

”Kuwa kitaabkooda midigta looga dhiibay waxay dhahayaan kaalaya oo akhriya kitaabkayga (19) waxaan yaqiinsanaa inaan la kulmayo xisaabtayda (20) isagu wuxuu ku jiraa nolol raaxo leh (21) janno sarreysa (22) goosashada (midhaheedu) dhow yahay (23) cuna oo caba ayadoo la idinku bogaadin wixii aad usoo camal fasheen darteed (24)”[169]

وَأَمْدَدْنَاهُم بِفَاكِهَةٍ وَلَحْمٍ مِّمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٢٢﴾ يَتَنَازَعُونَ فِيهَا كَأْسًا لَّا لَغْوٌ فِيهَا وَلَا تَأْثِيمٌ ﴿٢٣﴾

Waxaan u siyaadinay faakihooyin iyo hilib wixii ay ka dooneen (22) way isa siinayaan koob khamri (janno) oo aan hadal xun iyo danbi lahayn (23)[170]

Dadkii galay jannada raxmaanka waxa loo keenayaa faakihooyin iyo hilib wixii ay ka doonaan. Waxayna isku macsuumayaan khamrigii jannada oo aan madax xanuun iyo sarkhad midna lahayn, kumana hadlayaan hadal xun iyo danbi toona.

وَفَاكِهَةٍ مِّمَّا يَتَخَيَّرُونَ ﴿٢٠﴾ وَلَحْمِ طَيْرٍ مِّمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٢١﴾

[169] Suuratu Al-Xaaqah: 19,20,21,22,23,24
[170] Suuratu Al-Duur: 22,23

Iyo faakihooyin ay kala dooranayaan (20) iyo hilib shinbireed wixii ay ka doonaan (21)[171]

## Hilibka Jannada

Shinbiraha jannadu waxay la'eegyihii geela waxayna daaqaan dhirta jannada:

عن أنس ، قال : قال رسول الله - صلى الله عليه وسلم - : " إن طير الجنة كأمثال البخت ، يرعى في شجر الجنة " . فقال أبو بكر : يا رسول الله ، إن هذه لطير ناعمة فقال : " أكلتها أنعم منها - قالها ثلاثا - وإني لأرجو أن تكون ممن يأكل منها "

Anas ibnu Maalik waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Shinbiraha jannadu waxay lamid yihiin geela, waxay daaqaan dhirta jannada” abubakar ayaa yiri: rasuulkii Ilaahayow, waa shinbiro jilicsan, wuxuu yiri: ”cunideeda ayaa jilicsan-sadex jeer ayuu sidaa yiri- waxaan rajaynayaa inaad noqoto kuwa cunaya”[172]

Shinbiraha jannada waxay mufasiriintu ku tilmaameen in cidii ubaahata ay agtooda kusoo dhacayso ayadoo duban, waanu cunayaa oo ka dhargayaa kadibna wuu duulayaa isagoo aan midna ka nuqsaamin.

## Cabitaanka Jannada

### Tasniim

Ilaahay wuxuu yiri:

خِتَامُهُ مِسْكٌ ۚ وَفِي ذَٰلِكَ فَلْيَتَنَافَسِ الْمُتَنَافِسُونَ ﴿٢٦﴾ وَمِزَاجُهُ مِن تَسْنِيمٍ ﴿٢٧﴾ عَيْنًا يَشْرَبُ بِهَا الْمُقَرَّبُونَ ﴿٢٨﴾

---

171 Suuratu Al-Waaqicah: 20, 21

172 Munadu Imaamu Axmed: 3/221

Waxa lagu khatimay (cabitaankii) miski, ha u baratamaan kuwii baratamayey (26) waxa lagu daray (lagu dhex qasay) tasniim (mid kamida ilaha jannada) (27) waa il ay cabaan Muqarrabiintu (kuwa Rabbi u dhow) (28)[173]

Cuntada iyo cabitaanka jannada waxa lagusoo gabogabaynayaa sharaab ka cad fidhada oo cafartiisuna tahay miski, hadii nin kamida ehelka jannadu uu fartiisa galiyo waxa udugiisa helaya cid kasta.

Cabitaanka khamriga jannada waxa lagu daray biyaha isha loo yaqaano Tasniim oo ay cabaan muqarrabiinta Ilaahay u dhow, halka samo-falayaasha (Abraarta) ayagana loogu darayo khamrigooda.

## Kaafuur

إِنَّ الْأَبْرَارَ يَشْرَبُونَ مِن كَأْسٍ كَانَ مِزَاجُهَا كَافُورًا ﴿٥﴾عَيْنًا يَشْرَبُ بِهَا عِبَادُ اللَّـهِ يُفَجِّرُونَهَا تَفْجِيرًا ﴿٦﴾

Kuwa baariyiinta ah (samo falayaashu) waxay cabayaan koob (khamriga jannada) oo lagu daray kaafuur (ilaha jannada) (5) waa il ay cabaan adoomada Ilaahay oo una soconaysa (sidii ay doonaan) (6)[174]

Dadka baariyiinta ah waxay cabayaan khamrigii jannada oo loogu daray kaafuur, kaafuurkuna waa il kamida ilaha jannada soconaya oo aad u qabow, macaan iyo udug wanaagsana leh. Isha kaafuur waxa caba adoomada Ilaahay ee wanaagsan, halka asxaabu alyamiinta (samo falayaashana) khamrigooda jannada loogu darayo.

---

[173] Suuratu Mudaffifuun: 26,27,28

[174] Suuratu Al-insaan: 5,6

## Salsabiil

وَيُسْقَوْنَ فِيهَا كَأْسًا كَانَ مِزَاجُهَا زَنجَبِيلًا ﴿١٧﴾ عَيْنًا فِيهَا تُسَمَّىٰ سَلْسَبِيلًا ﴿١٨﴾

Waxa laga waraabinayaa koob (khamrigii jannada) oo lagu daray sanjabiil (17) (waxay ka cabayaan) il lagu magacaabo salsabiil (18)[175]

Samo falayaashii waxay cabayaan koobkoodii khamriga jannada ayadoo loogu darayo sanjabiil, waana koob kulul, halka koobka kaafuurka lagu daray uu ka yahay koob qabow. Markaa ehelka jannadu cabitaan qabow iyo mid kululba way cabayaan. Sanjabiil waa il jannada dhex socota oo magaceedana loo yaqaano salsabiil. [Ilaahay hanaga waraabiyee]

## Ehelka Jannadu hadii aanay saxaroonayn sidee ayay u xaajo gudanayaan?

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

يَأْكُلُ أَهْلُ الْجَنَّةِ فِيهَا وَيَشْرَبُونَ وَلَا يَتَغَوَّطُونَ وَلَا يَمْتَخِطُونَ وَلَا يَبُولُونَ وَلَكِنْ طَعَامُهُمْ ذَاكَ جُشَاءٌ كَرَشْحِ الْمِسْكِ يُلْهَمُونَ التَّسْبِيحَ وَالْحَمْدَ كَمَا تُلْهَمُونَ النَّفَسَ

"Ehelka jannadu waxay ku dhex cunayaan oo cabayaan (jannada), mana saxaroonayaan, mana duufsanayaan, mana kaadinayaan, hase ahaatee cuntadoodu (waxay ugasoo baxaysaa) daaco iyo dhidid sida miskiga ah, waxa

[175] Suuratu Al-insaan: 17,18

lagu ilhaaminayaa tasbiixda iyo taxmiida sida la idinku ilhaamiyey hawada"[176]

Jannada dhexdeeda kuma yaalaan musqullo ama suuliyo lagu xaajo guto sababtoo ah ehelka jannadu ma kaadinayaan mana saxaroonayaa. Kaliya markay dhargaan ayay daacayaan, daacadaas oo ka udgoon miskiga waana qaabka ay ehelka jannadu u xaajo gudanayaan.

Daacadu waa neef iyo cod wada socda oo kasoo baxa caloosha gaar ahaan markuu qofku dhargo. Aduunyada daacadeedu ur aan la jeclayn ayay leedahay, hase ahaatee ehelka jannada ayaga dhididkooda iyo daacadooduba waa miski, sababtoo ah waxay cuneen cunto aan nuqsaanba lahayn.

## Cuntada ugu horreysa ee ehelka jannadu cunayaan

Cuntada ugu horeysa ee jannada lagu cunayo waa beeryarada Xuutka

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

وأما أول طعام يأكله أهل الجنة فزيادة كبد الحوت

"Cuntada ugu horreysa ee ehelka jannadu cunayaan waa beer yarada Xuutka"[177]

[176] Saxiix Muslim: 2835
[177] Bukhaari: 3723

Xadiis kale oo saxiixu muslim ku yaala waxa rasuulka u yimid wadaad yahuudiya oo rabay inuu imtixaan ka qaado rasuulkii ilaahay (scw) wuxuuna waydiiyey:

قَالَ الْيَهُودِيُّ : فَمَا تُحْفَتُهُمْ حِينَ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ ؟ قَالَ : زِيَادَةُ كَبِدِ النُّونِ . قَالَ : فَمَا غِذَاؤُهُمْ عَلَى إِثْرِهَا ؟ قَالَ : يُنْحَرُ لَهُمْ ثَوْرُ الْجَنَّةِ الَّذِي كَانَ يَأْكُلُ مِنْ أَطْرَافِهَا . قَالَ : فَمَا شَرَابُهُمْ عَلَيْهِ ؟ قَالَ : مِنْ عَيْنٍ فِيهَا تُسَمَّى سَلْسَبِيلًا ...

Yahudigii wuxuu yiri: maxaa lagu macsuumayaa markay galaan jannada? Wuxuu yiri: beer yarada Xuutka. Wuxu yiri: maxay ku qadaynayaan intaa kadib? Wuxuu yiri: waxa loo gawracayaa dibiga jannada kaasoo hareeraheeda wax ka cunayey. Wuxuu yiri: maxay cabayaan? Wuxuu yiri: waxay ka cabayaan il lagu magacaabo Salsabiil.[178]

## Waa maxay sababta ehelka Jannadu u cunayaan una cabayaan?

Ehelka jannada ma qabanayso gaajo, harraad, baahi, bacad iyo dhar la’aan toona ee kaliya waxay u cunayaan way ku raaxaysanayaan. Waxayna dhadhaminayaa barwaaqada ay ku jiraan iyo nicmada Ilaahay siiyey (swt). Ilaahay wuxuu ku yiri nabi Aadam markuu jannada galiyey:

إِنَّ لَكَ أَلَّا تَجُوعَ فِيهَا وَلَا تَعْرَىٰ (118) وَأَنَّكَ لَا تَظْمَأُ فِيهَا وَلَا تَضْحَىٰ (119)

Adigu kuma dhex gaajoonaysid mana ku arrad beelaysid (dhar beelaysid) (118) adigu kuma harraadaysid dhexdeeda kulaylna kuma qabanayo (119)[179]

---

[178] Saxiixu Muslim: 315
[179] Suuratu Daaha: 118,119

## Weelka Jannada

Weelasha la inoo sheegay waxa kamida:

### Saxamo:

يُطَافُ عَلَيْهِم بِصِحَافٍ مِّن ذَهَبٍ وَأَكْوَابٍ ۖ

”Waxa lala dul wareegayaa korkooda weelal dahaba (saxamo) iyo koobab”[180]

### Koobab dhego leh, koob aan dhag lahayn iyo ibriiqyo.

بِأَكْوَابٍ وَأَبَارِيقَ وَكَأْسٍ مِّن مَّعِينٍ (18)

”Koobab (aan dhag lahayn) ibriiqyo (kuwo dhego leh) iyo koob khamriya”[181]

### Quraarado ama dhalooyin fidho ah:

وَيُطَافُ عَلَيْهِم بِآنِيَةٍ مِّن فِضَّةٍ وَأَكْوَابٍ كَانَتْ قَوَارِيرَا (15)

“Waxa lagula dul wareegayaa korkooda weel fidho ah iyo koobab quraarada (dhalo ah)”[182]

### Weelku waa Dahab ama waa Fidho:

جنتان من فضة آنيتهما وما فيهما وجنتان من ذهب آنيتهما وما فيهما

“Laba janno waa fidho weelkeeda iyo waxa ku dhex jiraaba, laba jannana waa dahab weelkooda iyo waxa ku dhex jiraaba”[183]

---

[180] Suuratu Zukhruf: 71
[181] Suuratu Al-waaqica: 18
[182] Suuratu Al-Insaan: 15
[183] Bukhaari: 4597

## Dharka ehelka Jannada:

Dharka ehelka Jannada waxa lagasoo saaraa geedka la dhaho Duubaa, waxa laga wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) xadiiskan:

عن أبي سعيد الخدري عن رسول الله صلى الله عليه وسلم أن رجلا قال له يا رسول الله طوبى لمن رآك وآمن بك قال طوبى لمن رآني وآمن بي ثم طوبى ثم طوبى ثم طوبى لمن آمن بي ولم يرني قال له رجل وما طوبى قال شجرة في الجنة مسيرة مائة عام ثياب أهل الجنة تخرج من أكمامها

Abi Saciid Al-khudriyy waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw): nin ayaa yiri: rasuulkii Ilaahyow wanaagsanaa ka ku arkay ee ku rumeeyey. Wuxuu yiri: ”Duubaa ayaa u sugan qofkii i arkay ee i rumeeyey, haddana Duuba ayaa u sugan, haddana Duuba ayaa u sugan, haddana Duuba ayaa u sugan ka i rumeeyey ee aan i arkin” nin ayaa dhahay: Waa maxay Duubaa? Wuxuu yiri: ”Waa geed jannada ku yaala oo la socda boqol sanadood (hadhkiisa), dharka ehelka jannada ayaa lagasoo saaraa hoosteeda”[184]

Ilaahayna wuxuu yiri:

الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ طُوبَىٰ لَهُمْ وَحُسْنُ مَآبٍ (29)

”Kuwa Ilaahay rumeeyey ee camal saalixa la yimid waxa u sugan Duubaa iyo noqosho wanaagsan”[185]

[184] Musnadu Axmed: 11276

[185] Suuratu Arracdi: 29

## Dharka jannada miyaa la tolayaa mise waa la abuurayaa?

جاء رجل إلى النبي صلى الله عليه وسلم فقال يا رسول الله أخبرنا عن ثياب أهل الجنة خلقا تخلق أم نسجا تنسج فضحك بعض القوم فقال رسول الله صلى الله عليه وسلم مم تضحكون من جاهل يسأل عالما ثم أكب رسول الله صلى الله عليه وسلم ثم قال أين السائل قال هو ذا أنا يا رسول الله قال لا بل تشقق عنها ثمر الجنة ثلاث مرات

Nin ayaa uyimid nabiga (scw) wuxuuna yiri: ”Rasuulkii Ilaahayow, iiga warran dharka ehelka jannada, ma la abuurayaa mise waa la tolayaa, markaa dadka qaar ayaa qoslay, wuxuu yiri rasuulkii Ilaahay (scw): ”Maxaad ku qoslaysaan, ma qof jaahila oo caalim su’aal waydiinaya? Markaasuu soo jeestay rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuuna yiri: Mee ninkii su’aasha i waydiiyay? Wuxuu yiri: waa i kan anigu rasuulkii ilaahayow. Wuxuu yiri: ”waxa looga soo goynayaa midhaha jannada-sadex jeer-”[186]

## Dhar xariira oo cagaaran

Ehelka jannadu waxay gashanayaan dhar xariira oo midabkoodu cagaaranyahay. Ilaahay wuxuu yiri (swt):

عَالِيَهُمْ ثِيَابُ سُندُسٍ خُضْرٌ وَإِسْتَبْرَقٌ ۖ وَحُلُّوا أَسَاوِرَ مِن فِضَّةٍ

”Waxay sitaan dhar sundus ah (xariir hoos ka gashiya) oo cagaaran iyo istabrq (xariir dusha sare ah), waxa loo galiyey shuuliyo (jiqilo) fidho ah…”[187]

يُحَلَّوْنَ فِيهَا مِنْ أَسَاوِرَ مِن ذَهَبٍ وَلُؤْلُؤًا ۖ وَلِبَاسُهُمْ فِيهَا حَرِيرٌ (23)

---

[186] Musnadu Axmed: 27276

[187] Suuratu Al-Insaan: 21

”Waxa loo galinayaa gacamo dahab iyo dheeman, dharkooduna (jannada) dhexdeeda waa xariir”[188]

## Dharkoodu ma duugoobayaan

Ehelka jannada dharkoodu ma baaliyoobayo, mana duugoobayo sida xadiiskan sharafta leh tilmaamayo:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ مَنْ يَدْخُلُ الْجَنَّةَ يَنْعَمُ لَا يَبْأَسُ لَا تَبْلَى ثِيَابُهُ وَلَا يَفْنَى شَبَابُهُ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Ruuxii jannada gala wuu barwaaqoobayaa, mana dhibaatoonayo, dharkiisu ma baaliyoobayo (ma duugoobayo), dhalinyaronimadiisuna ma dhamaanayso”[189]

## Marada afka ay marsanayaan ehelka jannadu

Iska dhaaf dharka ay gashanayaan ehelka jannadu ee marada afka la iska mariyo cuntada kadib ayaa ka ahaatay xariir nooceeda jilicsan. Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

فَقَالَ وَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ إِنَّ مَنَادِيلَ سَعْدِ بْنِ مُعَاذٍ فِي الْجَنَّةِ أَحْسَنُ مِنْ هَذَا

Wuxuu yiri (nabigu): ”Kay naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, marada afka la iska mariyo ee Sacad ibnu Mucaad Jannada ku leeyahay ayaa ka wanaagsan tan (xariirtan)”[190]

## Xijaabka dumarka ehelka Jannada

Khamaarka ama xijaabka ay madax ku sidato gabadha xuural caynta ah ayaa ka khayr badan aduunyada iyo waxa yaalaba.

ولنصيفها يعني الخمار خير من الدنيا وما فيها

---

[188] Suuratu Xajj: 23
[189] Saxiix Muslim: 2836
[190] Bukhaari: 2473 iyo Muslim: 2469

”Khamaarkeeda ama xijaabka madaxa ay ku sidato ayaa ka khayr badan Aduunyada iyo waxa dhex yaalaba”[191]

## Dharka Dumarka ehelka Jannada

Hadii khmaarka gabadhii ehelka jannadu ka khayr badanyahay aduunyada bal ka warran diraca ama toobka ay sidatana! Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

لكل رجل منهم زوجتان على كل زوجة سبعون حلة يرى مخ ساقها من ورائها

”Ninkasta oo kamida (ehelka jannada) wuxuu leeyahay laba xaas oo xaaskasta ay sitado todobaatan maro (oo xariira) oo lagana dhex arkayo dhuuxa lugteeda”[192]

[191] Bukhaari: 6199
[192] Tirmadi: 2534

## Guryaha iyo Qasriyada Jannada:

Jannada Raxmaanka waxa Ilaahay ku diyaariyey guryo, qasriyo iyo taandhooyin kala duwan. Sida aan ogsoonahay jannadu way kala darajo sarreysaa sidaa darteed guryaha qaar kamida waxay ku yaalan Firdawsa oo ah jannada ugu sarreysa, kuwa kalena way ka hooseeyaan, manalaha jannaduna wax hoseeyee.

Ilaahay wuxuu quraankiisa ku xusay in jannadu leedahay qolal, guryo, qasriyo iyo taandhooyinba, wuxuuna yiri:

وَمَسَاكِنَ طَيِّبَةً فِي جَنَّاتِ عَدْنٍ ۚ

"Iyo deegaanka wanaagsan ee Jannada Cadan"[193]

وَهُمْ فِي الْغُرُفَاتِ آمِنُونَ ﴿٣٧﴾

"Ayaguna guryaha sare ee jannada ayay aamin ku yihiin"[194]

لَـٰكِنِ الَّذِينَ اتَّقَوْا رَبَّهُمْ لَهُمْ غُرَفٌ مِّن فَوْقِهَا غُرَفٌ مَّبْنِيَّةٌ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ۖ
وَعْدَ اللَّـهِ ۖ لَا يُخْلِفُ اللَّـهُ الْمِيعَادَ ﴿٢٠﴾

"Hase haatee kuwa Rabbigood ka cabsaday waxay mudanayaan qolal ay ka sarreeyaan qolal kale oo isku dhisan oo ay soconayso hoosteeda wabiyoyaalkii, waa ballantii Ilaahay, Ilaahayna ma ballan buriyo"[195]

### Jannadu maxay ka dhisantahay?

Jannadu waxay ka dhisantahay jaajuur dahaba iyo mid fidho ah, waxa u dhaxeeya ee isu haya waa miskiga udgoon ee wanaagsan. Guryaha aduunyada jaajuurka iyo dhagxaanta

---

193 Suuratu Tawbah: 72
194 Suuratu Saba': 37
195 Suuratu Zumur: 20

waxa loo dhaxaysiiyaa sibidh ama shamiito ama dhoobo, balse jannada waxa u dhaxeeya waa cadarrada kii ugu udgoona oo ah miski.

عن أبي هريرة ...قلت يا رسول الله مم خلق الخلق قال من الماء قلنا الجنة ما بناؤها قال لبنة من فضة ولبنة من ذهب وملاطها المسك الأذفر وحصباؤها اللؤلؤ والياقوت وتربتها الزعفران من دخلها ينعم لا يبأس ويخلد لا يموت لا تبلى ثيابهم ولا يفنى شبابهم

Abihurayra waxa laga wariyey… waxaan idhi: rasuulkii Ilaahayow, khalqiga maxaa laga abuuray? Wuxuu yiri: biyo. Waxaanu nidhi: jannada maxaa laga abuuray? Wuxuu yiri: jaajuur fidho ah iyo jaajuur dahaba, talbiisteeduna waa miski wanaagsan, qururuxeedu waa dheeman iyo yaaquut, ciideedu (carradeedu) waa sacfaraan, qofkii galaa wuu barwaaqoobayaa mana dhibtoonayo, wuu waarayaa mana bukoonayo, dharkoodu ma duugoobayo, dhalinyaronimadooduna ma dhamaanayso”[196]

## Qofkasta laba guri ayuu leeyahy

Ma ogtahay in qofkasta uu jannada iyo naarta midkasta uu guri ku leeyahay, hadii laga helo camal saalixa oo uu jannada galo waxa gurigiisa naarta la siinayaa ehelka naarta. Haduu kamid noqdo ehelka naartana, waxa gurigiisii jannada dhaxlaya ehelka jannada.

قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَا مِنْكُمْ مِنْ أَحَدٍ إِلَّا لَهُ مَنْزِلَانِ مَنْزِلٌ فِي الْجَنَّةِ وَمَنْزِلٌ فِي النَّارِ فَإِذَا مَاتَ فَدَخَلَ النَّارَ وَرِثَ أَهْلُ الْجَنَّةِ مَنْزِلَهُ فَذَلِكَ قَوْلُهُ تَعَالَى أُولَئِكَ هُمْ الْوَارِثُونَ[197]

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Majiro qof idinka mida (haduu jiraba) wuxuu leeyahay laba guri, guri jannada ku

[196] Tirmadi: 2525
[197] Ibnu Maajah: 4341

yaala iyo guri naarta ku yaala, haduu dhinto oo uu naar galo waxa dhaxlaya ehelkii jannada gurigiisii, waana fasirka qawlka ilaahay ”kuwaasi ayagaa dhaxlaya”

# Qasriyada nabigu ku leeyahay Jannada

## Qasriga nabiga ee daruurta cad

Rasuulka Ilaahay wuxuu jannada ku leeyahay qasriyo badan, waxa kamida qasriga daruurta cad, qasriga wabiga Kawthar iyo qasriga daruurta lamoodo.

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم لنا أتاني الليلة آتيان فابتعثاني فانتهينا إلى مدينة مبنية بلبن ذهب ولبن فضة فتلقانا رجال شطر من خلقهم كأحسن ما أنت راء وشطر كأقبح ما أنت راء قالا لهم اذهبوا فقعوا في ذلك النهر فوقعوا فيه ثم رجعوا إلينا قد ذهب ذلك السوء عنهم فصاروا في أحسن صورة قالا لي هذه جنة عدن وهذاك منزلك قالا أما القوم الذين كانوا شطر منهم حسن وشطر منهم قبيح فإنهم خلطوا عملا صالحا وآخر سيئا تجاوز الله عنهم[198]

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Xalay waxa ii yimid laba nin, wayna i kaxeeyeen oo waxaan ku dhamaanay magaalo ka dhisan jaajuur dahaba iyo jaajuur fidho ah, waxa naga hor yimid niman qeyb jidhkooda kamida ay ka qurxoonyihiin wax la arko, qeybna ka foolxun, waxay (labadii nin) ku dhaheen: taga oo gala wabigaas, wayna ku dhaceen (wabigii), markaasay nagusoo laabteen ayagoo xumaantii ka tagtay oo noqday sawirkii ugu quruxda badnaa, waxayna igu dhaheen: tani waa jannadii Cadan, kaasina waa gurigaagii. Waxay dhaheen: qoomkan qeyb kamida ay qurxoonayd qeybna ka fool xumaa, ayagu waxay isku dareen camal wanaagsan iyo mid xun, Ilaahayna wuu cafiyey”

[198] Bukhaari: 4397

## Qasriga nabiga ee wabiga Kawthar ku ag yaala

Rasuulkii Ilaahay oo ka warramaya habeenkii la dheelmiyey, ayaa waydiiyey malaku Jibriil wabiyadii uu arkay, wuxuuna yiri:

ما هذان النهران يا جبريل قال هذا النيل والفرات عنصرهما ثم مضى به في السماء فإذا هو بنهر آخر عليه قصر من لؤلؤ وزبرجد فضرب يده فإذا هو مسك أذفر قال ما هذا يا جبريل قال هذا الكوثر الذي خبأ لك ربك [199]

"Waa maxay labadan wabiyo Jibriilow? Wuxuu yiri: waa Niilka iyo Furaatka asalkoodii, markaasuu usii socday xaga samada, mise waxa (halkaa) ahaaday wabi kale oo uu ka sarreeyo qasri ka samaysan dheeman iyo sabarjad. Dhulka ayuu gacnta ku dhuftay mise waa miski, wuxuu yiri: Waa maxay wabigani Jibriilow? Wuxuu yiri: waa Kawtharkii Ilaahay kuu qariyey"

## Qasriga nabiga ee Daruurta la moodo

Nabiga waxa kale oo la tusay guri sida daruurta oo kale ah, markaasuu jeclaystay inuu galo balse malaa'iktii ayaa ku tidhi: ma gali kartid oo cimrigaagii aduunyada maad dhamaysanin.

فارفع رأسك فرفعت رأسي فإذا فوقي مثل السحاب قالا ذاك منزلك قلت دعاني أدخل منزلي قالا إنه بقي لك عمر لم تستكمله فلو استكملت أتيت منزلك[200]

"Madaxaaga sare u qaad, madaxygaan sare uqaaday mise dushayda waxa ahaaday wax daruur lamoodo, waxay dhaheen: kaasi waa gurigaagii. Waxaan idhi: idaaya aan galo gurigaygee. Waxay dhaheen: cimrigaaga waxbaa kuu

[199] Bukhaari: 7079
[200] Bukhaari: 1320

hadhsan, manaad dhamaysanin, hadii aad dhamaysato waad iman gurigaaga"

## Qasriga Khadiija:

Hooyadii mu'miniinta ee Khadiija bintu Khuwaylid, waxa loogu bishaareeyey inay galayso jannada oo looga dhisay guriga dheemana oo aan buuq iyo qaylo toona lahayn.

عن أبي زرعة قال سمعت أبا هريرة قال أتى جبريل النبي صلى الله عليه وسلم فقال يا رسول الله هذه خديجة قد أتتك معها إناء فيه إدام أو طعام أو شراب فإذا هي أتتك فاقرأ عليها السلام من ربها عز وجل ومني وبشرها ببيت في الجنة من قصب لا صخب فيه ولا نصب[201]

Abi Zurca waxa laga wariyey inuu yiri: waxaan maqlay Abihurayra oo leh: Jibriil ayaa u yimid nabiga (scw) wuxuuna yiri: rasuulkii Ilaahayow: waa tan Khadiija kuu imanaysa, waxay sidataa weel ay ku jirto iidaan, cunto ama cabitaan ee markay kuu timaado iga gaadhsii salaan ka timid rabbigeeda iyo anigaba, uguna bishaaree guri ku yaala Jannada oo ka samaysan dheeman oo aan buuq iyo daal toona lahayn"

## Qasriga Cumar ibnu Khadaab (Rc)

Rasuulka Ilaahay (scw) wuxuu galay Jannada, wuxuuna maqlay sanqadh, markaasuu yiri: waa kuma? Waxa lagu yiri: waa Bilaal. Kadibna jannada wuxuu ku arkay qasri wayn oo dahab ka samaysan.

فَأَتَيْتُ عَلَى قَصْرٍ مُرَبَّعٍ مُشْرِفٍ مِنْ ذَهَبٍ فَقُلْتُ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ فَقَالُوا لِرَجُلٍ مِنْ الْعَرَبِ فَقُلْتُ أَنَا عَرَبِيٌّ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ قَالُوا لِرَجُلٍ مِنْ قُرَيْشٍ قُلْتُ أَنَا قُرَشِيٌّ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ قَالُوا لِرَجُلٍ مِنْ أُمَّةِ مُحَمَّدٍ قُلْتُ أَنَا مُحَمَّدٌ لِمَنْ هَذَا الْقَصْرُ قَالُوا لِعُمَرَ بْنِ الْخَطَّابِ[202]

---

[201] Muslim: 2432

[202] Sunan Tirmadi: 3689

”Waxaan dul imid qasri afar geesooda oo ka samaysan dahab, waxaan idhi: yaa iska leh qasrigan? Waxay dhaheen: nin carbeed. Waxaan idhi: anigaa nin carbeeda ee yaa iska leh qasrigan? Waxay dhaheen: nin reer Qureesheeda. Waxaan idhi: anigaa reer Qureesha ee yaa iska leh qasrigan? Waxay dhaheen: nin ummada Muxamed kamida. Waxaan idhi aniga Muxamed ah ee yaa iska leh qasrigan? Waxay dhaheen: Cumar ibnu Khadaab”

## Guryaha Shuhadada:

Shuhadudu waa kuwa naftooda iyo maalkoodaba u huray diinta Ilaahay ee geeriyooday ayagoo u dagaalamaya sidii kalimada Ilaahay ee tawxiidku u sarreyn lahayd. Sida Ilaahay quraankiisa ku cadeeyey, shuhadadu may dhimanin ee way noolyihiin, waxa laga arsaaqaana Ilaahay agtiisa. Ruuxda shuhadadu waxay ku dhex jirtaa shinbir cagaaran oo dhirta jannada maalintii daaqda, habeenkiina u hooyata qanaadiil kasoo laalaada carshiga raxmaanka. Rasuulkii Ilaahay waxa la waydiiyey:

أَيُّ الشُّهَدَاءِ أَفْضَلُ ؟ قَالَ : " الَّذِينَ إِنْ يُلْقَوْا فِي الصَّفِّ يَلْفِتُونَ وُجُوهَهُمْ حَتَّى يُقْتَلُوا ، أُولَئِكَ يَنْطَلِقُونَ فِي الْغُرَفِ الْعُلَى مِنَ الْجَنَّةِ ، وَيَضْحَكُ إِلَيْهِمْ رَبُّهُمْ ، وَإِذَا ضَحِكَ رَبُّكَ إِلَى عَبْدٍ فِي الدُّنْيَا ، فَلَا حِسَابَ عَلَيْهِ "[203]

Shuhadada keebaa u fadli badan? Wuxuu yiri: ”kuwa marka lagu tuuro safka (dagaalka), hortooda fiirsanaya illamaa laga dilo, kuwaasi waxay aadayaan guryaha sare ee jannada, waxa ku qosla rabbigood, hadii rabbigaagu aduunyada u qoslo adoon, lama xisaabinayo”

[203] Axmed:21886

Qosolka Ilaahayna lama mid aha qosolka makhluuqaadkiisa, waa mid ku haboon oo u qalma una cuntama rabbiga wayn subxaanahu wa tacaala.

## Guryaha qofka rumeeyey nabiga (scw)

Rasuulkii Ilaahay wuxuu guri u damaanad qaaday qofkii isaga rumeeyey, islaamay ee hijrooday sidoo kalena ku jihaaday jidka Ilaahay, wuxuuna yiri:

" أَنَا زَعِيمٌ وَالزَّعِيمُ الْحَمِيلُ ، لِمَنْ آمَنَ بِي وَأَسْلَمَ وَهَاجَرَ بِبَيْتٍ فِي رَبَضِ الْجَنَّةِ ، وَبِبَيْتٍ فِي وَسَطِ الْجَنَّةِ ، وَأَنَا زَعِيمٌ لِمَنْ آمَنَ بِي وَأَسْلَمَ وَجَاهَدَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ بِبَيْتٍ فِي رَبَضِ الْجَنَّةِ ، وَبِبَيْتٍ فِي وَسَطِ الْجَنَّةِ ، وَأَنَا زَعِيمٌ لِمَنْ آمَنَ بِي وَأَسْلَمَ وَجَاهَدَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ بِبَيْتٍ فِي رَبَضِ الْجَنَّةِ ، وَبِبَيْتٍ فِي وَسَطِ الْجَنَّةِ وَبِبَيْتٍ فِي أَعَلَى غُرَفِ الْجَنَّةِ ، ".[204]

”Anigaa u damaanad qaadaya qofkii i rumeeya, islaama ee hijrooda guri jannada hareerteeda ah (guri hoose), iyo guri badhtamaha jannada ah. Aniga  ayaa u damaanad qaadaya qofkii i rumeeyey, islaamay ee ku jihaaday jidka Ilaahay guri jannada hareerteeda ah (guri hoose) iyo guri jannada badhtankeeda ah. Aniga ayaa u damaanad qaadaya qofkii i rumeeyey, islaamay ee ku jihaaday jidka ilaahay guri ku yaala jannada hareerteeda iyo guri ku yaala jannada badhtankeeda iyo guri ku yaala guryaha ugu sarreeya jannada”

## Guriga qofka ka tagay beenta iyo ka wanaajiyey akhlaaqdiisa

Qofka ka tagay beenta oo baadil ah iyo ruuxa ka tagay istusnimada isagoo waliba xaq sheegaya, waxa nabigii Ilaahay ugu ballan qaaday guri ku yaala jannada.

[204] Sunan Nisaa’i: 4224

عن أنس بن مالك قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم من ترك الكذب وهو باطل بني له في ربض الجنة ومن ترك المراء وهو محق بني له في وسطها ومن حسن خلقه بني له في أعلاها[205]

Anas ibnu Maalik waxa lagasoo wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Qofkii ka taga beenta baadilka waxa loo dhisaa guri ku yaala jannada hareerteeda (guri hoose), qofkii ka taga istusnimada isagoo xaq sheegaya waxa loo dhisaa guri ku yaala jannada badhtankeeda, qofkii waanaajiya akhlaaqdiisana waxa looga dhisaa guryaha sare”

Run ahaantii akhlaaqda wanaagsan ayadaa la tagtay khayr oo dhan, qofku wuxuu dhaqankiisa wanaagsan ku gaadha darajada qofka sooman maalin kasta ee tukanaya habeen kasta.

Rasuulkii Ilaahay waxa lagasoo wariyey:

عَنْ عَائِشَةَ رَحِمَهَا اللَّهُ قَالَتْ سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ إِنَّ الْمُؤْمِنَ لَيُدْرِكُ بِحُسْنِ خُلُقِهِ دَرَجَةَ الصَّائِمِ الْقَائِمِ

Caasha Ilaahay ha unaxariistee waxa laga wariyey inay tidhi: waxaan maqlay rasuulkii Ilaahay (scw) oo leh: ”qofka mu’minka ah wuxuu ku gaadhaa akhlaaqdiisa wanaagsan darajada ka sooman ee taagan”[206]

## Guryaha dadka Ilaahay dartii isu jecel

Dadka Ilaahay dartii isu jecel waxay kamid yihiin todobada carshiga Ilaahay hadhsanaya hooskiisa, maalinta aanay jirin meel kale oo la hadhsado. Jannada dhexdoodadana waxay dadka ugu muuqanayaan sida xidigaha cirka inooga iftiimaan habeenkii.

---

205 Tirmadi: 1993

206 Abudawuud: 4798

عن أبي سعيد الخدري قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم إن المتحابين لترى غرفهم في الجنة كالكوكب الطالع الشرقي أو الغربي فيقال من هؤلاء فيقال هؤلاء المتحابون في الله عز وجل[207]

Abi Saciid Al-khudriyy waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: "Kuwa is jecel waxa loo arkayaa guryahooda jannada sida xidigaha kasoo baxa bari ama galbeed, waxa la dhahayaa: waa kuwama kuwaasi? Waxa la dhahayaa: waa kuwii Ilaahay dartii isu jeclaa"

Qofka Ilaahay dartii u jeclaada qof kale oo ay diinta ku walaaloobeen, wuxuu kamid yahay sadexda qof ee rasuulkii Ilaahay sheegay inay dhadhamiyeen iimaanka.

## Guriga qofka tukada laba iyo toban rakcadood oo sunnada ah

Salaadaha sunnooyinka ah ee ka horreeya ama ka danbeeya salaadaha faralka ah oo tiradoodu tahay laba iyo toban rakcadood, qofkii ilaaliya ee u dhabar adayga waxa loo dhisayaa guri jannada ku yaala. Laba iyo tobanka rakcadood waxay kala yihiin: laba rakcadood oo ka horreysa salaada Subaxa, afar ka horreeya Duhurka, laba ka danbeeya Duhurka, laba ka danbeeya Maqribka iyo laba ka danbeeya Cishaha.

عن أم حبيبة زوج النبي صلى الله عليه وسلم أنها قالت سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول ما من عبد مسلم يصلي لله كل يوم ثنتي عشرة ركعة تطوعا غير فريضة إلا بنى الله له بيتا في الجنة أو إلا بني له بيت في الجنة[208]

Umu Xabiiba sawjadii nabiga (scw) waxa laga wariyey inay tiri: waxaan maqlay rasuulkii Ilaahay (scw) oo leh: "Majiro adoon muslima oo tukada maalin kasta laba iyo toban

[207] Axmed: 11420
[208] Muslim: 728

rakcadood oo sunne ah oo aan faral ahayn, (haduu tukadaba) waxa Ilaahay u dhisaa guri jannada ku yaala ama waxa loo dhisaa guri jannada ku yaala"

## Guriga qofka dadka quudiya ee hadalkana wanaajiya

Hadalka in la wanaajiyo waa mid kamida akhlaaqda wanaagsan, rasuulkii Ilaahayna wuxuu yiri: "Khayr ku hadal ama iska aamus"[209] Hadii waxa afkaaga kasoo baxayaa uu yahay khayr iyo wanaag, waxa guri lagaaga dhisayaa jannada:

قال النبي صلى الله عليه وسلم إن في الجنة غرفا ترى ظهورها من بطونها وبطونها من ظهورها فقام أعرابي فقال لمن هي يا رسول الله قال لمن أطاب الكلام وأطعم الطعام وأدام الصيام وصلى لله بالليل والناس نيام[210]

Nabigu (scw) wuxuu dhahay: "Jannada waxa ahaaday guryo dushooda laga arko hoostooda, hoostoodana laga arko dushooda" waxa istaagay nin reer baadiye ah, wuxuuna yiri: yaa iska leh rasuulkii Ilaahayow? Wuxuu yiri: "Qofkii wanaajiyey hadalka, dadkana quudiyey, soonkana daayimay, salaadana Ilaahay u tukaday habeenkii ayadoo dadku ay hurdaan"

## Guriga qofka Ilaahay dartii u dhisay masaajid

عن النبي صلى الله عليه وسلم أنه قال من بنى لله مسجدا صغيرا كان أو كبيرا بنى الله له بيتا في الجنة[211]

Nabiga (scw) waxa laga wariyey inuu yiri: "Qofkii Ilaahay u dhisay masaajid, ha yaraado ama ha waynaadee, waxa Ilaahay u dhisayaa guri ku yaala jannada"

---

[209] Bukhaari: 5672
[210] Tirmadi: 1984
[211] Tirmadi: 319

## Guriga qofka soo booqday walaalkii ama qof xanuusanaya

Camalada khayrka badan ku jiro ee dad badan mooganyihiin waxa kamida in lasoo booqdo qof xanuusanaya. Cidii soo booqata maalin, waxa u ducaynaya todobaatan kun oo malag ilaa habeenka laga gaadhayo, cidii soo booqata habeena waxa u ducaynaya todobaatan kun oo malag ilaa waagu ka baryayo.

عن أبي هريرة قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم من عاد مريضا أو زار أخا له في الله ناداه مناد أن طبت وطاب ممشاك وتبوأت من الجنة منزلا[212]

Abihurayra waxa laga wariyey inuu dhahay: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Qofkii booqda ruux buka ama u siyaarta walaalkii dar Ilaahay, waxa u dhawaaqa mid dhawaaqaya (oo leh) waad wanaagsantahay, socodkaaguna wuu fiicanyahay, jannada waxa laguugu diyaariyey guri”

## Guriga uu leeyahay waalidka ilmihiisu ka saqiiro

Waalidka aduunyada wuxuu ugu jecelyahay caruurtiisa, waliba marka ay yaryihiin ee ay qoslaan ayagoon ilko lahayn, waxa qosolkoodu kala qaalisanyahay aduunyada oo dhan, sidaa darteed, ayuu aabuhu maalin oo dhan u maqanyahay si uu ufarxad galiyo ubadkiisa.

Haddaba waalidka ilmihiisii ka saqiiray waxa kusoo habsatay musiibo, haduu dhibtaa u samro waxa sare loo qaaday ajirkiisa.

عَنْ أَبِي مُوسَى الأَشْعَرِيِّ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : " إِذَا مَاتَ وَلَدُ الْعَبْدِ قَالَ اللَّهُ لِمَلائِكَتِهِ قَبَضْتُمْ وَلَدَ عَبْدِي فَيَقُولُونَ نَعَمْ فَيَقُولُ قَبَضْتُمْ ثَمَرَةَ فُؤَادِهِ

[212] Tirmadi: 2008

فَيَقُولُونَ نَعَمْ فَيَقُولُ مَاذَا قَالَ عَبْدِي فَيَقُولُونَ حَمِدَكَ وَاسْتَرْجَعَ فَيَقُولُ اللَّهُ : " ابْنُوا لِعَبْدِي بَيْتًا فِي الْجَنَّةِ وَسَمُّوهُ بَيْتَ الْحَمْدِ "[213]

Abi Muuse Al-ashcari waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: ”Hadii adoonka ilmo ka dhinto, Ilaahay wuxuu ku dhahaa malaa’iktiisa: miyaad oofsateen adoonkayga ilmihiisii? Waxay leeyihiin: haa. Wuxuu dhahayaa: miyaad oofsateen qalbigiisii? Waxay dhahayaan: haa. Wuxuu leeyahay: muxuu adoonkaygu yiri? Waxay dhahayaan: wuu ku mahadceliyey, waanu kuusoo laabtay, waxa Ilaahay dhahayaa: ”Uga dhisa adoonkayga guri jannada, una bixiya guriga mahadnaqa”

# Dhirta Jannada iyo Midhaheeda:

Jannada waxa ereygan janno loogu bixiyey waa dhirteeda oo fara badan oo is dhex gashay, kuwaaso midabkoodu yahay cagaar madoobaaday. Dhirta Jannada way badantahay, waxase kamida:

## Sidriga (Gobka)

Geedka Sidriga la dhaho ama Gobku waa geed kamida dhirta aduunyada, wuxuu leeyahay qodxaan iyo midho macaan. Gobka jannadu malaha qodxaan, waanu ka macaanyahay gobka aduunyada:

فِي سِدْرٍ مَّخْضُودٍ ﴿٢٨﴾

”Waxay helayaan geedka Sidriga (Gobka) oo aan qodax lahayn.”[214]

[213] Tirmadi: 942
[214] Suuratu Al-waaqica: 28

Waxa rasuulkii Ilaahay lagasoo wariyey in nin reer baadiye ahaa u yimid oo uu ku yiri: Rasuulkii Ilaahayow; quraanka, Ilaahay wuxuu ku sheegay geed dhib leh, umana malaynayo in jannada dhexdeeda dhibaato jirto. Wuxuu yiri: muxuu yahay geedkaasi? Wuxuu yiri: waa geedka gobka, wuxuu leeyahay qodxaan dhib leh. Wuxuu ku yiri: ”Ilaahay miyaanu dhihin qodax malaha, ilaahaybaa ka gooyey qodxaantii, kuna badalay booskoodii midho”[215]

## Geedka Dalxiga (Muuska)

Dalxigu waa geed wayn oo qodxaan leh, waxa kale oo la dhahay waa geedka muuska ama mooska.

وَطَلْحٍ مَّنضُودٍ ﴿٢٩﴾

”Iyo Dalxiga (Muuska) oo isdul saaran”[216]

## Cinabka

Cinabku waa faakiho macaan oo xidhmooyin u xidhan, waxa quraanka lagu sheegay marar badan.

حَدَائِقَ وَأَعْنَابًا ﴿٣٢﴾

”Waxay helayaan beero iyo cinabyo”[217]

## Geedka Duuba

Geedka duubaa waxa lagasoo gooyaa hoostiisa dharka jannada ee xariirta ah:

عن أبي سعيد الخدري عن رسول الله صلى الله عليه وسلم أن رجلا قال له يا رسول الله طوبى لمن رآك وآمن بك قال طوبى لمن رآني وآمن بي ثم طوبى ثم

---

[215] صحيح الترغيب والترهيب 3742 وقال الالباني صحيح لغيره

[216] Suuratu Al-waaqica: 29

[217] Suuratu Naba’: 32

طوبى ثم طوبى لمن آمن بي ولم يرني قال له رجل وما طوبى قال شجرة في الجنة مسيرة مائة عام ثياب أهل الجنة تخرج من أكمامها

Abi Saciid Al-khudriyy waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw): nin ayaa yiri: rasuulkii Ilaahyow wanaagsanaa ka ku arkay ee ku rumeeyey. Wuxuu yiri: ”Duubaa ayaa u sugan qofkii i arkay ee i rumeeyey, haddana Duuba ayaa u sugan, haddana Duuba ayaa u sugan, haddana Duuba ayaa u sugan ka i rumeeyey ee aan i arkin” nin ayaa dhahay: Waa maxay Duubaa? Wuxuu yiri: ”Waa geed jannada ku yaala oo la socda boqol sanadood (hadhkiisa), dharka ehelka jannada ayaa lagasoo saaraa hoosteeda”[218]

## Geedka Sidratu Al-muntahaa

Geedka sidaratu al-muntahaa wuxuu ku yaala Jannada Hoyga ah agteeda, waana geedkii rasuulku (scw) arkay habeenkii la dheelmiyey.

عِندَ سِدْرَةِ الْمُنتَهَىٰ ﴿١٤﴾ عِندَهَا جَنَّةُ الْمَأْوَىٰ ﴿١٥﴾ إِذْ يَغْشَى السِّدْرَةَ مَا يَغْشَىٰ ﴿١٦﴾

Geedka Sidratu Al-muntahaa agtiisa (14) agteeda waxa ahaaday jannadii hoyga ahayd (15) markii geedka Sidaradu daboolmay (16)[219]

Geedkan waxa daboolay amarkii Ilaahay, markaasay isbadashay (quruxdeedu) mana jiro cid sifayn karta quruxdeeda waxa rasuulkii Ilaahay (scw) yiri:

ثُمَّ رُفِعَتْ إِلَيَّ سِدْرَةُ الْمُنْتَهَى فَإِذَا نَبْقُهَا مِثْلُ قِلالِ هَجَرَ وَإِذَا وَرَقُهَا مِثْلُ آذَانِ الْفِيَلَةِ قَالَ هَذِهِ سِدْرَةُ الْمُنْتَهَى

[218] Musnadu Axmed: 11276
[219] Suuratu Najmi: 14,15,16

”Kadibna waxa sare la iigu soo qaada Sidratu Almuntahaa, mise midhaheedu waa kuwo waayn, caleemaheeduna waa sida dhagaha maroodiga, waxa la igu yiri: waa sidratu almuntaha”

Geedkan waa meesha ugu danbaysa ee makhluuq gaadho, waana meesha ay ku dhamaadaan camalada sare loo qaado.

## Dhirta jannadu waa cagaar daran

Caleemaha dhirta jannadu midabkoodu waa cagaar aad u daran oo madow sii xiga:

مُدْهَامَّتَانِ ﴿٦٤﴾

“Labadan janno waa cagaar daran oo madow sii xiga”[220]

## Hadhka ama Hooska Jannada

Jannada hadhkeedu waa mid daayima, waana hadh fidsan oo aan bacad iyo kulayl toona lahayn.

وَنُدْخِلُهُمْ ظِلًّا ظَلِيلًا ﴿٥٧﴾

“Waxaan galinaynaa hadh ama hoos fidsan”[221]

وَظِلٍّ مَّمْدُودٍ ﴿٣٠﴾

”Waa hoos fidsan”[222]

---

[220] Suuratu Arraxmaan: 64
[221] Suuratu Nisaa: 57
[222] Suuratu Al-waaqica: 30

## Uduga dhirta Jannada:

Dhirta jannadu way udgoontahay, waxaana la ursiiyey dadka muqarrabiinta ah markay sii dhimanayaan, si ay u jeclaystaan la kulanka rabbigooda:

فَأَمَّا إِن كَانَ مِنَ الْمُقَرَّبِينَ ﴿٨٨﴾ فَرَوْحٌ وَرَيْحَانٌ وَجَنَّتُ نَعِيمٍ ﴿٨٩﴾

"Haduu kamid yahay Muqarrabiinta (kuwa Rabbi u dhow) (88) waxa u sugan raaxo iyo rayxaan iyo jannada naciima"

Rayxaan waa geed kamida dhirta jannada oo loo keenayo muqarrabiinta Ilaahay u dhow si ay carafteeda u ursadaan.

## Jirridaha dhirta Jannada:

Dhirta Jannadu waxay leeyihii jirrido waawen oo ka ahaaday macdanta Dahabka. Subxaana Allah, geedkasta jirridiisu waa dahab.

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَا فِي الْجَنَّةِ شَجَرَةٌ إِلَّا وَسَاقُهَا مِنْ ذَهَبٍ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: "Geed kasta oo jannada ku yaala jirridiisu waa dahab"[223]

## Waynida dhirta Jannada:

Dhirta jannadu sida ay u wayntahay waxa ina tusaya xadiiskan:

عن أبي هريرة عن رسول الله صلى الله عليه وسلم أنه قال إن في الجنة لشجرة يسير الراكب في ظلها مائة سنة

Abihurayra waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) inuu yiri: "Jannada waxa ahaaday geed farda-

[223] Tirmadi: 2524

fuuluhu soconayo hadhkeeda (hooskeeda) boqol sanadood"[224]

# Faakihooyinka Jannada

## Timir iyo Rummaanka:

Geedka timirtu waa geed barakaysan oo rasuulkii Ilaahay ku tilmaamay inay lamid tahay qofka mu'minka ah, caleenteedu ma dhacdo xilliyad xagaaga iyo jiilaalkaba, midhaheedu waa macaan, jirrideeduna faa'ido badan ayay leedahay. Rummaankuna waa faakiho laga sameeyo casiir aad u macaan.

فِيهِمَا فَاكِهَةٌ وَنَخْلٌ وَرُمَّانٌ ﴿٦٨﴾

"Waxa jannada dhexdeeda ahaaday faakiho, timir iyo rummaan"[225]

## Faakihooyin laba nooca

Faakiho kasta oo jannada ka baxdaa waa laba nooc oo dhadhankoodu ka duwanyahay kan kale.

فِيهِمَا مِن كُلِّ فَاكِهَةٍ زَوْجَانِ ﴿٥٢﴾

"Faakiho kasta waa laba nooc"[226]

## Faakihooyin badan

Ehelka jannada waxa la siinayaa faakihooyin badan oo ay kala dooranayaan iyo faakiho kasta oo ay naftoodu doonto.

---

[224] Saxiix Muslim: 2829
[225] Suuratu Arraxmaan: 68
[226] Suuratu Arraxmaan: 52

مُتَّكِئِينَ فِيهَا يَدْعُونَ فِيهَا بِفَاكِهَةٍ كَثِيرَةٍ وَشَرَابٍ ﴿٥١﴾

"Dhexdeeda way ku dangiigaan (jiifaan) waxayna u yeedhanayaan faakihooyin badan iyo cabitaan"[227]

وَفَوَاكِهَ مِمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٤٢﴾

"Waxay cuni faakihooyin (kay naftoodu) doonto"[228]

## Faakihooyin la helayo xilli kasta

Dhirta jannadu waa mid midho leh sanadka oo dhan, maaha sida dhirta aduunyada ee xilli gaara midho leh. Jannada midhaheedu waa daayim, mana go'ayaan oo ma dhamaanayaan.

أُكُلُهَا دَائِمٌ وَظِلُّهَا ۚ

"Midhaheedu waa daayim iyo hadhkeeduba"[229]

وَفَاكِهَةٍ كَثِيرَةٍ ﴿٣٢﴾ لَّا مَقْطُوعَةٍ وَلَا مَمْنُوعَةٍ ﴿٣٣﴾

"Iyo faakihooyin badan (32) oo aan go'ayn loomana diidayo (33)"[230]

## Midhaha Jannada goosashadoodu way dhowyihiin

Dhirta jannada oo aad u waawayn, dhererkooduna aad u dheeryahay, ayaa haddana goosashada midhaheedu aad u dhowyihiin:

---

227 Suuratu Saad: 51
228 Suuratu Al-mursalaat: 42
229 Suuratu Arracdi: 35
230 Suuratu Al-Waaqica: 32,33

وَجَنَى الْجَنَّتَيْنِ دَانٍ ﴿٥٤﴾

"Midhaha labada janno way dhowyihiin"[231]

قُطُوفُهَا دَانِيَةٌ ﴿٢٣﴾

"Goosashadeedu way dhowdahay"[232]

## Midhaha Jannadu way kala duwanyihiin xaga dhadhanka

Midhaha jannadu waa kuwa is shabaha, haddana kala dhadhan duwan. Ehelka Jannada marka loo keeno faakihooyin waxay u malaynayaan inay yihiin kuwo hadda kahor lagu arsaaqay, markay dhadhamiyaan ayay ogaanayaan inay kala duwanyihiin.

كُلَّمَا رُزِقُوا مِنْهَا مِن ثَمَرَةٍ رِّزْقًا ۙ قَالُوا هَٰذَا الَّذِي رُزِقْنَا مِن قَبْلُ ۖ وَأُتُوا بِهِ مُتَشَابِهًا ۖ

"Markasta oo lagu arsaaqo midho risqiya, waxay dhaheen kan hadda kahor ayaa nalgu arsaaqay, waxa la siiyey ayadoo is shabahaysa"[233]

Isla marka ay dhadhamiyaan ayay ogaanayaan inay kala duwanyihiin, xitaa hadii ay isku magac iyo muuq ahaayeenba. Jannadu maadaama ay raaxaysi tahay waxa mar kasta loo keenayaa cuntooyin iyo cabitaano oo isla markay dhadhamiyaan ayay ogaanayaan inay ka duwanyihiin kuwii hadda kahor lagu arsaaqay sababtuna waa si xiisaha cuntadu u kordho.

---

[231] Suuratu Arraxmaan: 54
[232] Suuratu Alxaaqah: 23
[233] Suuratu Al-baqarah: 25

## Nabadgalyo ayay wax ku cunayaan

Ehelka jannadu markay cunayaan faakihooyinka iyo irsaaqada kale ee Ilaahay ku arsaaqay, waxay ku cunayaan si nabada oo aamina.

يَدْعُونَ فِيهَا بِكُلِّ فَاكِهَةٍ آمِنِينَ ﴿٥٥﴾

"Waxay u yeedhanayaan faakiho kasta ayagoo aamina"[234]

[234] Suuratu Dukhaan: 55

## Darajooyinka Jannada

Ilaahay wuxuu yiri:

وَمَن يَأْتِهِ مُؤْمِنًا قَدْ عَمِلَ الصَّالِحَاتِ فَأُولَـٰئِكَ لَهُمُ الدَّرَجَاتُ الْعُلَىٰ ﴿٧٥﴾

”Cidii u timaada (rabbigii) isagoo mu'mina oo camal saalixa la yimid kuwaasi waxay mudan darajooyinka sare”[235]

انظُرْ كَيْفَ فَضَّلْنَا بَعْضَهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ وَلَلْآخِرَةُ أَكْبَرُ دَرَجَاتٍ وَأَكْبَرُ تَفْضِيلًا ﴿٢١﴾

”Fiiri sida aan ukala fadilnay badhkoodba badhka kale (irssaqada aduunyada), aakhiraase ka darajo wayn kana fadli badan”[236]

### Mu'miniitu way kala darajo sarreeyaan

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ ، قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " الْمُؤْمِنُ الْقَوِيُّ خَيْرٌ وَأَحَبُّ إِلَى اللَّهِ مِنَ الْمُؤْمِنِ الضَّعِيفِ ، وَفِي كُلٍّ خَيْرٌ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Mu'minka xoogan ayaa ka khayr badan, ilaahay agtiisana looga jacayl badanyahay mu'minka tamarta yar, kulligoodna waxa ku jira khayr”[237]

Ilaahayna wuxuu yiri:

لَّا يَسْتَوِي الْقَاعِدُونَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ غَيْرُ أُولِي الضَّرَرِ وَالْمُجَاهِدُونَ فِي سَبِيلِ اللَّـهِ بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ ۚ فَضَّلَ اللَّـهُ الْمُجَاهِدِينَ بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ عَلَى الْقَاعِدِينَ دَرَجَةً ۚ وَكُلًّا وَعَدَ اللَّـهُ الْحُسْنَىٰ ۚ وَفَضَّلَ اللَّـهُ الْمُجَاهِدِينَ عَلَى الْقَاعِدِينَ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٩٥﴾

Ma simna kuwa mu'miniinta ah ee ka hadhay (jihaadka) marka laga reebo dadka cudurdaarka haysta iyo mujaahidiintii jidka Ilaahay u huray xoolahooda iyo

[235] Suuratu Daaha: 75
[236] Suuratu Israa: 21
[237] Saxiix Muslim: 4822

nafahoodaba, Ilaahaybaa ka fadilay mujaahidiinta xoolahoodda iyo nafahoodaba kuwa ka hadhay darajo, kulligoodna Ilaahay janno ayuu ugu ballan qaaday, Ilaahay mujaahdiinta ayuu ka fadilay kuwa ka hadhay ajar aad u wayn (95)[238]

Sida xadiiskii Abihurayraba tilmaamay mu'miniintu ayagoo dhamaantood khayrku ka buuxo ayay hadana kala darajo sareeyaan. Aayadan sharafta lehna waxay inoo cadeysay in mujaahidiinta u huray diinta Islaamka naftooda iyo maalkoodaba ay ka darajo sareeyaan kuwa ayagu aan jihaadka ka qaybgalin, ayadoo dhamaantoodba janno loogu yaboohay.

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَأَقَامَ الصَّلَاةَ وَصَامَ رَمَضَانَ كَانَ حَقًّا عَلَى اللَّهِ أَنْ يُدْخِلَهُ الْجَنَّةَ هَاجَرَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَوْ جَلَسَ فِي أَرْضِهِ الَّتِي وُلِدَ فِيهَا قَالُوا يَا رَسُولَ اللَّهِ أَفَلَا نُنَبِّئُ النَّاسَ بِذَلِكَ قَالَ إِنَّ فِي الْجَنَّةِ مِائَةَ دَرَجَةٍ أَعَدَّهَا اللَّهُ لِلْمُجَاهِدِينَ فِي سَبِيلِهِ كُلُّ دَرَجَتَيْنِ مَا بَيْنَهُمَا كَمَا بَيْنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ فَإِذَا سَأَلْتُمْ اللَّهَ فَسَلُوهُ الْفِرْدَوْسَ فَإِنَّهُ أَوْسَطُ الْجَنَّةِ وَأَعْلَى الْجَنَّةِ وَفَوْقَهُ عَرْشُ الرَّحْمَنِ وَمِنْهُ تَفَجَّرُ أَنْهَارُ الْجَنَّةِ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Qofkii rumeeya Ilaahay iyo rasuulkiisa ee tukada salaada ee sooma ramadaan, waxa Ilaahay uu xaq ugu leeyahay inuu galiyo jannada, haduu jidka Ilaahay u hijroodo iyo haduu dhulkiisii uu ku dhashay fadhiyo” waxay dhaheen: rasuulkii Ilaahayow, miyaanan dadka u sheegaynin arrintaas? Wuxuu yiri: ”Jannada waxa ahaaday boqol darajo oo Ilaahay u diyaariyey mujaahidiinta ku jihaaday jidaka Ilaahay, labadii darajo waxay isu jiraan inta samada iyo dhulku isu jiraan ee hadaad Ilaahay waydiisataan, waydiista Firdawsa maxaayeelay ayadu waa

[238] Suuratu Nisaa: 95,96

Jannada badhtankeeda iyo jannada ugu sarreysa, dusheedana waxa ahaaday carshiga raxmaanka, isagayna kasoo burqataa wabiyada jannadu”[239]

عن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال إن أهل الجنة يتراءون أهل الغرف من فوقهم كما يتراءون الكوكب الدري الغابر في الأفق من المشرق أو المغرب لتفاضل ما بينهم قالوا يا رسول الله تلك منازل الأنبياء لا يبلغها غيرهم قال بلى والذي نفسي بيده رجال آمنوا بالله وصدقوا المرسلين

Abi Saciid Al-khudriyy (Rc) waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Ehelka Jannadu waxay u arkayaan ehelka sare (ee jannada) siday u arkaan xidigaha iftiima ee taga samada bari iyo galbeed si loo kala fadilo dhexdooda” waxay dhaheen: kuwaasi ma guryaha nabiyadaa oo cid aan ayaga ahayn gaadhi mayso? Wuxuu yiri: ”Haa, Ilaahbaan ku dhaartee rag aaminay Ilaahay oo rumeeyey rusushiisa (ayaa gaadhaya)”[240]

## Camalada Darajooyinka sare lagu gaadho.

### Jihaadka ama in jidka Ilaahay loo diriro

عن أبي سعيد الخدري أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال يا أبا سعيد من رضي بالله ربا وبالإسلام دينا وبمحمد نبيا وجبت له الجنة فعجب لها أبو سعيد فقال أعدها علي يا رسول الله ففعل ثم قال وأخرى يرفع بها العبد مائة درجة في الجنة ما بين كل درجتين كما بين السماء والأرض قال وما هي يا رسول الله قال الجهاد في سبيل الله الجهاد في سبيل الله

[239] Bukhaari: 6987
[240] Bukhaari: 3083

Abi Saciid Al-khudriyy waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: ”Aba Saciidow, qofka Ilaahay raali uga noqda rabbinimo, islaamkana diin ahaan, Muxamedna nabinimo, waxa u waajibay Jannada” Abu Saciid wuu la cajabay, wuxuuna yiri: iigu soo celi rasuulkii Ilaahayow, waanu ugu celiyey. kadibna wuxuu yiri: ”Mid kale (camal kale) ayaa adoonka sare loogu qaadaa boqol darajo oo jannada ah oo labadii darjaba ay isu jiraan inta samada iyo dhulku isu jiraan” wuxuu yiri: waa tee rasuulkii Ilaahayow? Wuxuu yiri: ”Waa jidka Ilaahay oo lagu jihaado, Waa jidka Ilaahay oo lagu jihaado”[241]

## Is dul dhiga

عن أبي هريرة عن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال ما نقصت صدقة من مال وما زاد الله عبدا بعفو إلا عزا وما تواضع أحد لله إلا رفعه الله

Abihurayra waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: ”Sadaqo ma nuqsaamiso maalka, Qofna Ilaahay wax uma cafiyo ilaa sharaf ayuu Ilaahay u kordhiyaa, Qofna Ilaahay isuma dul dhigo ilaa sare ayuu Ilaahay u qaadaa”[242]

## Akhrinta Quraanka

عن عبد الله بن عمرو رضي الله عنهما قال : قال رسول الله صلى الله عليه وسلم : ( يُقَالُ لِصَاحِبِ الْقُرْآنِ : اقْرَأْ وَارْتَقِ وَرَتِّلْ ، كَمَا كُنْتَ تُرَتِّلُ فِي الدُّنْيَا ، فَإِنَّ مَنْزِلَكَ عِنْدَ آخِرِ آيَةٍ تَقْرَؤُهَا )

Cabdilaahi binu Camaru (Rc) waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Qofka quraanka akhriya waxa lagu dhahayaa: akhri oo fuul oo tartiili (quraanka

[241] Saxiix Muslim: 1884
[242] Saxiix Muslim: 2588

tajwiid ku akhri), sidii aad aduunyada u akhrin jirtay, gurigaagu waa aayada ugu danbaysa ee aad akhrido” [243]

## Aadida Masaajidka oo aad badsato

عن أبي هريرة أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال ألا أدلكم على ما يمحو الله به الخطايا ويرفع به الدرجات قالوا بلى يا رسول الله قال إسباغ الوضوء على المكاره وكثرة الخطا إلى المساجد وانتظار الصلاة بعد الصلاة فذلكم الرباط

Abihurayra waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) dhahay: ”Ma idin tusiyaa waxyaalaha Ilaahay ku tirtiro danbiyada, darajooyinkana sare ugu qaado? waxay dhaheen: haa, rasuulkii Ilaahayow. Wuxuu yiri: waa waysada ood ku xeel dheeraato xilliyada la karaahiyeysto (xilliga qabowga), tallaabooyinka badan ee masaajida lagu aado, iyo salaadaha kadib oo aad ku sugto salaada kale, waa kaas jihaadku”[244]

## Safka oo aad awdo

مَنْ سَدَّ فُرْجَةً فِي صَفٍّ رَفَعَهُ اللَّهُ بِهَا دَرَجَةً أَوْ بَنَى لَهُ بِهَا بَيْتًا فِي الْجَنَّةِ "

”Cidii awda daloolka safka, Ilaahay darajo ayuu sare ugu qaadaa, ama guri ayuu uga dhisaa jannada”[245]

## In dhibaatada loo samro.

ما من مسلم يشاك شوكة فما فوقها إلا كتبت له بها درجة ومحيت عنه بها خطيئة

”Majiro qof muslima oo ay qodax mudo iyo wax ka sareeyaba (hadiiba ay dhibtaasi soo gaadho) waxa loo qoraa darajo, waxaana laga tirtiraa danbi”[246]

---

[243] Tirmadi: 2914
[244] Saxiix Muslim: 251
[245] Ibnu Abi Shayba: 3725
[246] Saxiix Muslim: 2572

## Cilmiga iyo Aqoonta

يَرْفَعِ اللَّـهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنكُمْ وَالَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ دَرَجَاتٍ ۚ

"Sare ayuu Ilaahay u qaaday kuwiina iimaanka laga helay, kuwa cilmiga la siiyayna darajooyin (ayuu sare u qaadaa)"[247]

## Cirrada ama timahaaga oo ku cadaada islaamnimo

لا تنتفوا الشيب ما من مسلم يشيب شيبة في الإسلام إلا كانت له نورا يوم القيامة
وقال في حديث يحيى إلا كتب الله له بها حسنة وحط عنه بها خطيئة

"Ha jarina cirrada, majiro qof muslima oo ku cirraysta islaamnimada, (haduu jiraba) waxay u noqotaa nuur maalinta Qayaame. Wuxuu yiri: xadiiskii Yaxye, waxa loo qoraa xasano, waxa laga tirtiraa danbi" [248]

## Dawaafka badan

مَنْ طَافَ بِهَذَا الْبَيْتِ أُسْبُوعًا ( أي سبعة أشواط ) فَأَحْصَاهُ كَانَ كَعِتْقِ رَقَبَةٍ ، لا يَضَعُ قَدَمًا وَلا يَرْفَعُ أُخْرَى إِلا حَطَّ اللَّهُ عَنْهُ خَطِيئَةً وَكَتَبَ لَهُ بِهَا حَسَنَةً

"Qofkii ku dawaafa gurigan (kacbada) todoba jeer oo dhamaysta waxay u tahay sidii inuu xoreeyey adoon, cag ma dhigo midna sare uma qaado ilaa waxa lagu tirtiraa danbi, waxa la qoraana xasano"[249]

## Sujuuda

عليك بكثرة السجود لله فإنك لا تسجد لله سجدة إلا رفعك الله بها درجة وحط عنك بها خطيئة

[247] Suuratu Al-Mujaadalah: 11
[248] Abudaawuud: 4202
[249] Tirmadi: 959

”Waa inaad badsataa sujuuda, maxaa yeelay ma sujuudid (hadaad sujuudaba) waxa Ilaahay sare kuugu qaaday darajo, waxaanu kaa tirtiray danbi”[250]

## Akhlaaqda Wanaagsan

عن عائشة رحمها الله قالت سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول إن المؤمن ليدرك بحسن خلقه درجة الصائم القائم

”Caasha Ilaahay ha unaxariistee waxa laga wariyey inay tidhi: ”Waxaan maqlay rasuulkii Ilaahay oo leh: qofka mu’minka ah wuxuu akhlaaqdiisa wanaagsan ku gaadhaa darajada qofka sooman ee taagan”[251]

## Ducada waalidka loogu duceeyo

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم إن الرجل لترفع درجته في الجنة فيقول أنى هذا فيقال باستغفار ولدك لك

Wuxuu yiri rasuulkii Ilaahay (scw): ”Ninka waxa sare loo qaadaa darajadiisa jannada, wuxuuna dhahaa: xagee ka timid (darajadan)? Waxa lagu dhahaa: ”waxa kuusoo duceeyey wiilkaagii”[252]

## Jacaylka nabiga

Rasuulka Ilaahay (scw) wuxuu jannada ka galayaa darajada ugu sarreysa, hadii aad rabto inaad la jirkiisa noqoto waa in lagaa helaa jacayl dhaba oo aad jeclaato rasuulkii Ilaahay (Scw)

عن أنس بن مالك أن رجلا سأل النبي صلى الله عليه وسلم متى الساعة يا رسول الله قال ما أعددت لها قال ما أعددت لها من كثير صلاة ولا صوم ولا صدقة ولكني أحب الله ورسوله قال أنت مع من أحببت

[250] Saxiix Muslim: 488
[251] Abudaawuud: 4798
[252] Ibnu Maajah: 3660

Anas ibnu Maalik waxa laga wariyey in nin waydiiyey nabiga (scw): goormay dhacaysaa saacada (Qayaame) rasuulkii Ilaahayow? Wuxuu yiri: ”Maxaad u diyaarsatay?” wuxuu yiri: umaan diyaarsan wax badan oo salaada, soon iyo sadaqo ah, hase ahaatee waxaan jeclahay Ilaahay iyo rasuulkiisa. Wuxuu yiri: ”Adigu cidii aad jeceshahay ayaad la jirtaa”[253]

## Ninka ugu danbeeya ee Jannada galaya:

Ibnu Mascuud (I.R.H) wuxuu ka warinayaa Nabiga (scw) inuu yidhi: Ma idiin ka warramaa Ninka ugu danbeeya ee Jannada galaya? Waa nin ay Cadaabka Naareed leefayso oo marna ku dhacaya marna kasoo baxaya illamaayo ugu danbayn Ilaahay kasoo badbaadinayo, markaasuu dhahayaa: Ilaahybaa barako badan, Ilaahaybaa mahad iska leh isiiyey waxaanu siinin caalamiinta! Kadibna wuxuu arkayaa geed wayn oo hadh (hoos) qabow leh, markaasuu dhahayaa: Rabiyoow, geedkaas hadhkiisa i gee aan hadhsado hooskiisa, sidoo kalena aan ka cabo biyihiisa. Ilaahay wuxuu dhahaya: Adoonkaygoow, hadaan ku siiyo waxaad rabto miyaad wax kale i waydiisanaysaa? Adoonkii wuxuu leeyahay: Ilaahayoow, sharaftaadaan ku dhaartee wax kale kuma waydiisanayo, kolkaasbaa loo soo dhoweynayaa geedkii oo uu cabayaa biyihii sidoo kalena uu hadhsanayaa hooskii geedka. Hadana wuxuu arkayaa geed kale oo aad uga wanaagsan kii hore markaasuu dhahayaa: Ilaahayoow, geedkaas i gee. Ilaahayna wuxuu dhahayaa: Bani-aadamoow maxaa kaa ballan burin badan, sawdigii

253 Saxiix Muslim: 5819

lahaa Ilaahayoow, wax kale kuma waydiisanayo. Adoonkii wuxuu leeyahay; Ilaahayoow, hayga dhigin ka ugu hoogsan makhluuqaadkaaga, Ilaahayna waa u cudur daarayaa oo wuxuu arkayaa Adoonku wuxuu la samri waayo, kolkaasbaa la keenayaa geedkii oo wuu hadhsanayaa waanu ka cabayaa biyaheeda. Hadana Adoonkii waxa la tusayaa geed kale oo ka qurux badan labadii hore oo ku yaal Albaabka Jannada, subxaanAllah kadibna Adoonkii waa adkaysan kari waayey oo wuxu dhahayaa: Ilaahayoow, Geedkaas igee, waligayna wax danbe kuma waydiisanayo, sidii hore oo kale ayuu Allah dhahayaa: Bani-aadamoow, maxaa kaa ballan burin badan! Sawdigii hadda kahor lahaa wax danbe kuma waydiisanayo, hadana Ilaahay waa u cudur daarayaaa oo Adoonku wuxuu arkay waxaanu adkaysan karayn. Adoonkii ayaa la keenayaa geedkii Jannada u dhowaa, markaasaa la odhanayaa gal Jannada! Adoonkii waa yaabayaa, markaasuu galayaa oo wuxuu arkayaa Jannadii oo dadkeedii buuxiyeen wuxuuna dhahayaa: Rabbiyoow, Jannadu way buuxdaa oo waa lakala qaatay boosaskii, kolkaasbuu Allah dhahayaa: Adoonkaygoow, waxaan ku siiyey Aduunyadii iyo mid lamid ah!! Adoonkii wuxuu leeyahay: Rabiyoow, miyaad igu cayaaraysaa adigoo ah Rabbiga Caalamiinta? Kolkaas ayaa waxa qoslay Ibnu Mascuud oo warinayaa Xadiiska, waxa la waydiiyey Ibnu Mascuud maxaad la qoslaysaa? Wuxuu yidhi: Rasuulkii Ilaahay ayaa qoslay markuu halkan marayey oo waxaanu waydiinay maxaad ku qoslaysaa Rasuulkii Ilaahayoow? Wuxuu yidhi: Ilaahay ayaa qoslay markuu Adoonkii dhahay : Miyaad igu cayaaraysaa Adigoo ah Rabbiga Caalamiinta! Rabbina wuxuu dhahay: Kuguma

cayaarayo, kugumana dheelayo ee waxaan ahay ku wax kasta kara.[254]

# Wada Sheekaysiga Ehelka Jannada iyo ehelka Naarta:

## Wada sheekaysiga ehelka Jannada dhexdooda:

Marka ehelka Jannadu ay galaana Jannadii oo badhkoodba badhka kale u xiisoodo inuu la kulmo, waxa duulaya sariirtoodii ay ku fadhiyeen, wayna wada kulmayaan. Waxay ka wada sheekaysanayaan maalintii Ilaahay u danbi dhaafay iyo nicmada ay ku haystaan jannada dhexdeeda.

Markay kala tagayaan isuma jeedinayaan dhabarka ee ayagoo wajiyadoodu is eegayaan ayay sariirtoodu la duulaysa.

مُّتَّكِئِينَ عَلَيْهَا مُتَقَابِلِينَ (16)

”Korkeeda ayay ku dingiigaan ayagoo iskasoo horjeeda (16)”[255]

## Nin kamida ehelka Jannada oo saaxiibkii raadinaya:

Ilaahay wuxuu yiri:

فَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ يَتَسَاءَلُونَ ﴿٥٠﴾ قَالَ قَائِلٌ مِّنْهُمْ إِنِّي كَانَ لِي قَرِينٌ ﴿٥١﴾
يَقُولُ أَإِنَّكَ لَمِنَ الْمُصَدِّقِينَ ﴿٥٢﴾ أَإِذَا مِتْنَا وَكُنَّا تُرَابًا وَعِظَامًا أَإِنَّا لَمَدِينُونَ ﴿٥٣﴾
قَالَ هَلْ أَنتُم مُّطَّلِعُونَ ﴿٥٤﴾ فَاطَّلَعَ فَرَآهُ فِي سَوَاءِ الْجَحِيمِ ﴿٥٥﴾ قَالَ تَاللَّهِ إِن كِدتَّ

[254] Saxiix Muslim: 187
[255] Suuratu Al-Waaqicah: 16

لَتُرْدِينِ ﴿٥٦﴾ وَلَوْلَا نِعْمَةُ رَبِّي لَكُنتُ مِنَ الْمُحْضَرِينَ ﴿٥٧﴾ أَفَمَا نَحْنُ بِمَيِّتِينَ ﴿٥٨﴾
إِلَّا مَوْتَتَنَا الْأُولَىٰ وَمَا نَحْنُ بِمُعَذَّبِينَ ﴿٥٩﴾ إِنَّ هَٰذَا لَهُوَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿٦٠﴾ لِمِثْلِ
هَٰذَا فَلْيَعْمَلِ الْعَامِلُونَ ﴿٦١﴾

”Way is qaabileen badhkoodba badhka kale ayagoo is waydiinaya (50) Wuxuuna dhahay mid hadlay oo ka mid ah (ehelka jannada) waxaan kulahaa (adduunkii) saaxiib. (51) Dhihi jiray adigu ma waxaad ka mid tahay kuwa rumeeyay (soobixinta). (52) Ma markaan dhimano oon ciid noqono iyo lafo yaa nala abaalmarin (53) Wuxuuna dhahay mayla dayeysaan (raadinaysaan) (54) Waanu raadiyey kuna arkay jaxiima dhexdeeda. (55) Wuxuuna yiri Ilaahbaan ku dhaartayee waxaad u dhoweyd inaad i halaagto . (56) Haddayna Nicmada Allah jirinna (way jirtaaye) waxaan ahaan lahaa kuwa lagu soo kulmiyay (naarta). (57) (Waxayna dhahaan Ehelu -jannuhu) miyaan dhimanaynaa. (58) Geerideenii hore mooyee, nalamana cadaabayo. (59) Taasina waa liibaanta wayn. (60) Ee taasoo kale ha faleen kuwa camal fali. (61)”[256]

Culumada mufasiriintu markay fasirayaan aayadahan sharafta leh, waxay soo wariyaan qiso cajiiba oo dhex martay laban nin oo saaxiibo ahaa, midna mu’min ayuu ahaa ka kalena gaal aan rumaysnayn maalinta Qayaame.
Labada nin waxay ahaayeen shuraako, waxayna wada lahaayeen lacag dhan lixdan kun oo diinaar. kadibna way is qabteen, waxayna kala qaybsadeen lacagtii oo waxay u kala heleen nin walba sadex kun oo Dirham.
Mudo markay soo wareegtay ayay is arkeen labadii nin markaasuu ninkii gaalka ahaa ku dhahay Mu’minkii: Maxaad

[256] Suuratu Saaffaat: 50-61

lacagtaadii ku samaysay? Wuxuu yiri: Waxba, ee adigu maxaad ku qabsatay xoolihii? Gaalkii wuxuu yiri: waxaan Kun diinaar ku iibsaday Beer ay ka baxaan Timir iyo Midho oo wabina dhex socdo.

Dabadeedna Mu'minkii ayaa habeenkii salaad tukaday wuxuuna baryey Rabbigiis, wuxuuna ydhi: Ilaahayoow, ninkii gaalka ahaa ee aanu saaxibada ahayn wuxuu iibsaday beer wabi leh oo ay ka baxaan Timir iyo Midho oo uu ka dhimanayo ee anigu waxaan kaaga iibsaday kun diinaar Beer wabi leh oo ay kabaxaan Timir iyo Midho oo ku taalada Jannada, isla subaxiina xoolihiisii ayuu kun diinaar ka bixiyey, wuxuuna ku sadaqaystay masaakiinta.

Mudo kadib ayaa ninkii gaalka ahaa hadana la kulmay ninkii Mu'minka ahaa wuxuuna ku dhahhay: Xoolahaagii maxaad ku samaysay? Wuxuu dhahay: waxaba, ee adigu maxaad ku qabsatay? Wuxuu yiri: Kun diinaar ayaan kusoo iibsaday adoomo ii adeega.

Ninkii Mu'minka ahaana wuxuu kacay habeenkii waanu tukaday, wuxuuna dhahay: Ilaahayow, saaxibkay wuxuu iibsaday adoomo ee aniguna waxaan ku waydiistay dad iigu adeega Jannada, waxaanu sadaqaysatay kun diinaar oo kale.

Mudo kadib ayaa ninkii gaalka ahaa la kulmay Mu'minkii oo ku dhahay: Xoolihii maxaad ku qabsatay? Wuxuu dhahay: Waxba, ee adigu maxaad ku iibsatay? Wuxuu yiri: waxaan

maqlay in ninkii hebel dhintay kadibna naagtiisii ayaan ku guursady kun diinaar iyo mid kale.

Sidii oo kale ayuu ninkii Muslimka ahaa habeenkii tukaday wuxuuna yiri; Ilaahayoow, ninkii aanu saaxiibxada ahayn wuxuu ku guursaday kun diinaar gabadh aduunyo ee anigu waxaan ku waydiisay gabadh xuural-cayn ah oo Jannada joogta, waxaanu sadaqaystay kunkii ugu danbeeyey xoolihiisii.

Ninkii Mu'minka ahaa wuxuu ku shaqaysan jiray shaqo xammaala oo tuurta ayuu alaabo ku qaadi jiray oo uu kasoo saari jiray nolol maalmeedkiisa. Maalintii danbe ninbaa u yimid oo ka shaqaysiiyey fardihiisa, wuxuuna ku yiri: Fardahan ayaad daajinaysaa oo aad carbinaysaa.

Hase ahaatee ninka Fardaha leh subax kasta wuxuu fuuli jiray fardihiisa, haduu arko fardaha oo mid kamida caato tahay, wuxuu u yeedhi jiray ninkii, wuxuuna ciijin jiray madaxiisa isagoo ku leh: xalay waxaad cuntay qamandidii faraska!
Markuu ninkii mu'minka ahaa arkay ad-adayga ninkuu u shaqaynayey ayuu isakaga tagay, wuxuuna shaqo u doontay saaxiibkiisii gaalka ahaa.

Ninkii mu'minka ahaa waa soo baxay wuxuuna yimid qasrigii ninkii gaalka ahaa, waxaase joojisay ilaaladii qasriga, wuxuuna dhahay: ninka qasrigan iska leh waanu is naqaanaa haduu i arkana wuu farxayaa ee iigu yeedh.

Ilaaladii qasriga ayaa u yeedhay ninkii gaalka ahaa oo faras saaran, markaasuu gartay ninkii ay saaxiibada ahaayeen oo ay ka muuqato faqri iyo saboolnimo.

Ninkii mu'minka ahaa wuxuu yidhi: waxaan rabaa inaad i shaqo galiso oo aad isiiso nolol maalmeedkayga iyo inaad iga badasho dharkan baaliyoobay.

Ninkii gaalka ahaa ayaa yiri: oo meeye xoolahaagii? Wuxuu dhahay Mu'minkii: waxaan amaahiyey ku ii oofinaaya! Wuxuu yiri: waa kuma? Wuux dhahay: waa Allah oo ah Rabigay.
Gaalkii wuxuu dhahay: Miyaad rumaysanaysaa? Ma markaan dhimano ee aan ciid iyo lafo noqono ayaa layna soo saarayaa? Ninkii gaalka ahaana wuu ka dhaqaaqay ninkii mu'minka ahaa.
Ninkii Mu'minka ahaa aduunyada wuxuu ku noolaa nolol adag halka gaalkii ku noolaa nolosha ugu wanaagsan.

Maalinta Qayaame ayaa Ilaahay galiyey ninkii mu'minka ahaa Jannada, waxaana la siiyey beer wabi dhex soconayo oo timir iyo midho jannaysan ka baxaan oo ku taala Jannada. Markaasuu dhahay: SubxaanAllah, oo ma camalkaygii ayaa ii jaray waxan oo dhan. Hadana waxa la siiyey dad badan oo ugu adeegaya Jannada, kadibna waxa la hormarinayaa guri ka samaysan Jawharad iyo marajaan oo ay ku jirto xuurul-cayn nuuraysa waxaana la yiri: waa xaaskaagii Jannada, ninkiina wuxuu yiri: SubxaanAllah, oo ma camalkaygii ayaa ii gooyey waxaan oo nicmo ah.

Ninkii mu'minka ahaa oo ku raaxaysanaya jannada ayaa xasuusanaya saaxiibkiisii gaalka ahaa, wuxuuna ka raadinayaa jannada waanu ka waayayaa. Kadibna wuxuu ka daydayaa cadaabka Jaxiima, wuxuuna ku dhex arkayaa saaxiibkii oo badhtanka naarta ku jira, markaasuu dhahayaa: "Ilaahbaan ku dhaartee, marbaad i halaagi gaadhay, hadii aanay jirin nicmada Ilaahay waxaan maanta kamid noqon lahaa kuwa lagusoo xaadiriyo caadaabka naareed.[257]

## Suuqa Jannada iyo wadasheekaysiga mu'miinta iyo Rabbigood:

Waxa Imaamu Tirmadi kusoo saaray sunankiisa xadiiskan oo warramaya suuqa jannada iyo wada sheekaysiga dhex mari doona mu'miniinta iyo rabbigood.

عن سعيد بن المسيب أنه لقي أبا هريرة فقال أبو هريرة أسأل الله أن يجمع بيني وبينك في سوق الجنة فقال سعيد أفيها سوق قال نعم أخبرني رسول الله صلى الله عليه وسلم أن أهل الجنة إذا دخلوها نزلوا فيها بفضل أعمالهم ثم يؤذن في مقدار يوم الجمعة من أيام الدنيا فيزورون ربهم ويبرز لهم عرشه ويتبدى لهم في روضة من رياض الجنة فتوضع لهم منابر من نور ومنابر من لؤلؤ ومنابر من ياقوت ومنابر من زبرجد ومنابر من ذهب ومنابر من فضة ويجلس أدناهم وما فيهم من دني على كثبان المسك والكافور وما يرون أن أصحاب الكراسي بأفضل منهم مجلسا قال أبو هريرة قلت يا رسول الله وهل نرى ربنا قال نعم قال هل تتمارون في رؤية الشمس والقمر ليلة البدر قلنا لا قال كذلك لا تمارون في رؤية ربكم ولا يبقى في ذلك المجلس رجل إلا حاضره الله محاضرة حتى يقول للرجل منهم يا فلان بن فلان أتذكر يوم قلت كذا وكذا فيذكر ببعض غدراته في الدنيا فيقول يا رب أفلم تغفر لي فيقول بلى فسعة مغفرتي بلغت بك منزلتك هذه فبينما هم على ذلك غشيتهم سحابة من فوقهم فأمطرت عليهم طيبا لم يجدوا مثل ريحه

---

[257] Tafsiirka Suuratu Saaffaat ee Ibnu Kathiir.

شيئا قط ويقول ربنا تبارك وتعالى قوموا إلى ما أعددت لكم من الكرامة فخذوا ما اشتهيتم فنأتي سوقا قد حفت به الملائكة فيه ما لم تنظر العيون إلى مثله ولم تسمع الآذان ولم يخطر على القلوب فيحمل لنا ما اشتهينا ليس يباع فيها ولا يشترى وفي ذلك السوق يلقى أهل الجنة بعضهم بعضا قال فيقبل الرجل ذو المنزلة المرتفعة فيلقى من هو دونه وما فيهم دني فيروعه ما يرى عليه من اللباس فما ينقضي آخر حديثه حتى يتخيل إليه ما هو أحسن منه وذلك أنه لا ينبغي لأحد أن يحزن فيها ثم ننصرف إلى منازلنا فيتلقانا أزواجنا فيقلن مرحبا وأهلا لقد جئت وإن بك من الجمال أفضل مما فارقتنا عليه فيقول إنا جالسنا اليوم ربنا الجبار ويحقنا أن ننقلب بمثل ما انقلبنا

Waxa laga wariyey Saciid ibnu Musayib inuu la kulmay Abahurayra (Rc), Abuhurayrana wuxuu ku dhahay: “Ilaahay waxan waydiisanayaa inuu inagu kulmiyo suuqa Jannada!” Markaasuu Saciid dhahay: Oo ma suuq ayey Jannadu leedahay? wuxuu yiri: “Haa, wuxuu rasuulkii Ilaahay (scw) ii sheegay in ehelka Jannadu markay galaan Jannad in la dajin doono booska camaladoodii, markaasna waxa loo ogolaanaya ehelka Jannada qiyaas ahaan maalin la eeg Jimcaha aduunyada (oo looga jeedo todobaadka aduunyada), kolkaasay booqanayaan Rabigood (swt), waxaana u muuqanaya Carshigiisa, wuxuuna uga muuqanayaa beer kamid ah beeraha Jannada, waxaana ehelka Jannada loo dhigayaa kuraas nuura, kuraas dheemana, kuraas Yaaquut ah, kuraas Zabarjad ah, kuraas dahab ah, iyo kuraas qalin ah (waxay ugu fadhiisanayaan sida ay ukala fadli badan yihiin), wuxuuna fadhiisanayaa kooda ugu hooseeya-mana laha cid hoosaysee- meel taago ah oo ka ahaaday miski iyo kaafuur, kuwaasina uma arkayaan in asxaabta kuraasta ku fadhidaa ay ka fadli badan yihiin, wuxuu dhahay Abuhurayra: Rasuulkii Ilaahayow miyaan arkaynaa Rabbigeen (swt)? wuxuu dhahay: “Haa, miyaad ka shakisantihiin araga qorraxda iyo dayaxu markuu

dhamayska yahay?" waxaanu nidhi: Maya, wuxuu dhahay Rasuulku (scw): "Sidaas oo kale kama shakiyeysaan aragga Rabbigiin. Golahaasna nin kamid ah majoogo haduuba joogaba waxa la hadlaya Ilaahay, illamaa uu ku dhaho nin kamid ah ehelka Jannada: hebelow ina hebelow, ma xasuusataa maalintii aad samaysay sidaas iyo sidaas, wuxuuna Alle sheegaya qaar kamid ah ballan burintoodii aduunyada, markaasuu adoonkii dhahayaa: Rabbiyow miyaanad ii danbi dhaafin? wuxuu Allah leeyahay: Haa, oo naxariistayda balaadhan awgeed ayaad booskaagan kusoo gaadhay. Ayagoo sidaas ku jira ayaa waxa imanaysa dushooda daruur, markaasay da'aysaa udgoon aanay waligood udogeeda oo kale urin, markaasuu Rabbigeen subxaanahu wa tacaalaa dhahayaa: "U kaca waxaan idiin diyaariyey oo karaamooyin ah, kana qaata waxaad ishtihootaan (jeceshihiin)." Waxaynu tagaynaa suuq ay ka buuxaan Malaa'iktu, oo ay ku jiraan waxaan indho arkin, oo aanay dhagona maqlin oo aan qalbina kusoo dhicin, waxaana laynoo keenayaa wixii aan jeclaysanay ayadoon la gadaynin lana iibsanaynin. Suuqaasna waxa ku wada kulmaya ehelka Jannada, wuxuuna ninku la kulmayaa nin kamida dadka boosaska sare iyo nin kamid ah kuwa booskooda laga sareeyo mana jirto cid hoosaysa, wuxuuna la cajabayaa wuxuu sito oo maryo ah, mana dhamaysanayo hadalkiisii illamaa loo sawiro kuwo ka qurxoon maryahaas, sababtuna waxa weeye ma haboono in qofna uu ku murugoodo dhexdeeda, markaasaan aadaynaa guryaheenii, waxaana naga hor imanaysa haweenkeena waxayna dhahayaan Maraxaba, soo dhowaada, waxaad timid adigoo ka qurxoon sidii aad nagaga tagtay, markaasuu

dhahayaa maanta waxaan la fadhiisanay Rabbigayo oo ah Al-jbbaar, wayna noo qalantaa inaan kusoo laabano sidaan kusoo laabanay. [258]

## Ragga iyo Dumarka keebaa Jannada ku badan?

Su'aashan waxa la is waydiiyey xilligii saxaabadii, waxa Imaamu Muslim saxiixiisa kusoo saaray xadiis uu kasoo warinayo Muxamed ibnu siiriin:

عَنْ مُحَمَّدٍ قَالَ إِمَّا تَفَاخَرُوا وَإِمَّا تَذَاكَرُوا الرِّجَالُ فِي الْجَنَّةِ أَكْثَرُ أَمْ النِّسَاءُ فَقَالَ أَبُو هُرَيْرَةَ أَوَ لَمْ يَقُلْ أَبُو الْقَاسِمِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِنَّ أَوَّلَ زُمْرَةٍ تَدْخُلُ الْجَنَّةَ عَلَى صُورَةِ الْقَمَرِ لَيْلَةَ الْبَدْرِ وَالَّتِي تَلِيهَا عَلَى أَضْوَإِ كَوْكَبٍ دُرِّيٍّ فِي السَّمَاءِ لِكُلِّ امْرِئٍ مِنْهُمْ زَوْجَتَانِ اثْنَتَانِ يُرَى مُخُّ سُوقِهِمَا مِنْ وَرَاءِ اللَّحْمِ وَمَا فِي الْجَنَّةِ أَعْزَبُ

Muxamed Ibnu siiriin waxa laga wariyey inuu yiri: Waa la isu faanay ama way xasuusteen, nimanka iyo gabdhaha kuweebaa ku badan jannada? Markaasuu Abuhurayra yiri: miyaanu Abu Al-Qaasim (scw) dhihin: "Kooxda ugu horeysa ee jannada galaysa waxay ku galaysaa sawirka dayaxu markuu dhamaystiranyahay, ta ku xigtaan iftiinka xidiga samada, nin kasta wuxuu leeyahay laba xaas oo dhuuxq lugtooda laga dhex arkayo hilibkooda, jannadana majiro qof guurdoona (aan xaas lahayn)"[259]

Abuhurayra, Ilaahay raali haka ahaadee wuxuu xadiiskan ka qaatay in dumarku jannada ku badanyihiin maadaama ninkii kasta laba xaas leeyahay, taasoo macnaheedu tahay in haweenka jannadu kusoo laba laabmayaan nimanka.

[258] Tirmadi: 2549
[259] Saxiix Muslim: 2834

Xitaa way ka badnaanayaan, sababtoo shahiidku wuxuu guursanaya todobaatan iyo labo xuural cayna, waxa kale oo jooga dumarkii siyaadada ahaa.

Dhanka kale rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu sheegay in dumarku ku badanyihiin ehelka naarta. Rasuulkii Ilaahayna wuxuu yiri:

اطَّلَعْتُ فِي الْجَنَّةِ فَرَأَيْتُ أَكْثَرَ أَهْلِهَا الْفُقَرَاءَ وَاطَّلَعْتُ فِي النَّارِ فَرَأَيْتُ أَكْثَرَ أَهْلِهَا النِّسَاء

”Waxaan arkay Jannada mise dadka ugu badan fuqarada, waxaan kale oon arkay naarta waxaana ugu badan dumarka”[260]

Haddaba inagoo ka duulayna labadan xadiis, waxa inoo cadaatay in dumarku jannada iyo naartaba u badanyihiin.

Dhanka kale waxa la is waydiin karaa; dumarka jannadu waa xuural cayntii Ilaahay jannada ku abuuray, waxaan rabnaa in la is barbardhigo dumarka aduunyada iyo nimanka aduunyada.

Hadii aan su’aashana ka jawaabno, xadiiska tilmaamaya in dumarku yihiin kuwa ugu badan ee naarta galaya, wuxuu sheegay in sababta ay cadaabka ku galeen ay tahay ayagoo aan ka mahad celin abaalkii raggoodu u sameeyeen.

Dabcan danbigaasi maaha mid keensanaya inay cadaabka naareed ku waaraan ee ugu danbayn way kasoo baxayaan oo masiirkoodu waa jannada. Markaa waxaad qiyaastaa dumarkii (xuural caynta) oo Jannada markii hore ku badnaa

---

[260] Bukhaari: 3241

ayaa waxa kusoo darsamaya haweenkii cadaabka naareed lagasoo saaray ee Ilaahay u naxariistay.

Guntii iyo gabogabadii dumarku way ka badanyihiin nimanka, ayagaana ah kuwa u badan jannada iyo naartaba.

## Xaaskaaga Aduunyadu waa xaaskaaga Jannada

Ninka mu'minka ah hadii Ilaahay u nicmeeyo oo uu jannada geeyo oo xaaskiisii aduunyaduna gabadh mu'minada ahayd, waxa la isugu guurinayaa jannada. Hadii ninka darajadiisu sarreyso waxa loo keenayaa xaaskiisii aduunyada iyo durriyadiisii si loo farxad galiyo.

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَاتَّبَعَتْهُمْ ذُرِّيَّتُهُم بِإِيمَانٍ أَلْحَقْنَا بِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ وَمَا أَلَتْنَاهُم مِّنْ عَمَلِهِم مِّن شَيْءٍ

"Kuwa Ilaahay rumeeyey ee durriyadooduna ku raacday iimaanka waxaan raacinaynaa durriayadoodii (jannada darajadii sare xitaa hadii ay aabahood ka darajo hooseeyeen) camalkoodana waxba kama aanan nuqsaamin"[261]

Aayada sharafta leh waxay cadaynaysaa in aabaha wanaagsan ee jannada halka sare ka galay in durriyadiisii iyo xaasaskii aduunyada ee ayaguna muslimiinta ahaa ee ka darajo hooseeyay in sare loogu qaadi doono si aabahaasi ugu indho doogsado ubadkiisii iyo xaaskiisii.

---

[261] Suuratu Duur: 21

## Gabadhii soo guursatay niman badan yaa jannada ku guursaya?

Gabadhii aduunyada ku guursatay niman badan oo dhamaantood ay ahaayeen niman mu'miniina, cida jannada ku guursanaysa waa la isku khilaafay, waxaana jirta sadex fikradood oo kala ah:

- Ninka ugu akhlaaqda wanaagsana ayaa guursanaya.
- Waa la kala doorad siinayaa.
- Ninkii ugu danbeeyey ayey guursanaysa.

Sadexdaas qawl waxa ugu saxiixsan ka ugu danbeeya ee ah inay guursanayso ninkii ugu danbeeyey. Waxaana jira xadiis loo rafcinayo rasuulka (scw) oo leh:

" أيما امرأة تُوفي عنها زوجها ، فتزوجت بعده ، فهي لآخر أزواجها "

"Gabadh kasta oo ninkeedu ka dhinto oo guursata isaga kadib waxa yeelanaya ninkii ugu danbeeyey"[262]

Sidaa darteed, haweenkii rasuulka (scw) oo dhamaantood niman hore soo guursaday marka laga reebo Caasha, waxa jannada ku guursanaya rasuulkii Ilaahay (scw). Haweenkii nabiguna (scw) waxay mu'miinta u yihiin hooyooyin, markuu rasuulku (scw) geeriyooday cid kale oo uga danbaysay may jirin.

---

262 صححه الألباني رحمه الله في صحيح الجامع 2704 وفي السلسلة الصحيحة 1281

## Caruurta Islaamka ee saqiirtay xagay tagayaan?

Caruurta yaryar ee muslimiinta ka saqiirta waxa kafaalo qaatay nabi Ibraahiim iyo xaaskiisii Saara, maalinta Qayaamena waxay u celinayaan waalidkood. Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

" أَوْلادُ الْمُؤْمِنِينَ فِي جَبَلٍ فِي الْجَنَّةِ يَكْفُلُهُمْ إِبْرَاهِيمُ وَسَارَةُ حَتَّى يَرُدَّهُمْ إِلَى آبَائِهِمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ "

”Caruurta mu'miniintu waxay joogaan buur jannada ku taala, waxa kafaalo qaadanaya Ibraahiim iyo Saara illamaa ay usoo celiyaan aabayaashood maalinta Qayaame”[263]

Sidoo kale caruurta gaalada ayagana waxa kafaalo qaadanaya nabi Ibraahiim iyo haweenaydiisii Saara Ilaahay nabadgalyo kokooda ha yeelee.

Nabiga (scw) wuxuu ka sheekeeyey inuu arkay riyo, waxaana u yimid laba nin oo geeyey meel beer ah oo midbyo kala duwan leh, beertaasna waxa joogay nin dheer oo madixiisa aanu arkin, hareertiisana ay joogto caruurtii ugu badnaa. Kadibna labadii nin ayaa riyadii u fasiray waxayna ku dhaheen:

وَأَمَّا الرَّجُلُ الطَّوِيلُ الذي فِي الرَّوضَةِ فَإِنَّه إبراهِيمُ ، وَأَمَّا الوِلدَانُ الذِينَ حَولَه فَكُلُّ مَولُودٍ مَاتَ عَلَى الفِطْرَةِ ، فَقَالَ بَعضُ المُسلِمِين : يَا رَسُولَ اللهِ ! وَأَوْلَادُ المُشْرِكِين ؟ فَقَالَ : وَأَوْلَادُ المُشرِكِين )

”Ninkii dheeraa ee beerta joogay waa Ibraahiim, caruutii hareertiisa joogtayna waa ilmo kasta oo fidrada

[263] Xaakim: 1350

(islaamnimada) ku dhashay. Muslimiintii qaar kamida ayaa dhahay: Rasuulkii Ilaahayow iyo caruurta gaalada? Wuxuu yiri: iyo caruurta gaalada”[264]

Sida ka muuqata xadiiska caruurta ka saqiirtay gaalada ayaguna waxa kafaalo qaatay nabi Ibraahiim iyo xaaskiisii Saara.

## Caruurta saqiirtay waxay u shafaaco qaadayaan waalidkood

Ilmaha yar ee ka saqiiray waalidkii, gaar ahaan ilmaha soo baxay isagoo ruuxda lagu afuufay kadibna dhintay, wuxuu u shafaaco qaadayaa waalidkii.

عَنْ أَبِي حَسَّانَ قَالَ قُلْتُ لِأَبِي هُرَيْرَةَ إِنَّهُ قَدْ مَاتَ لِيَ ابْنَانِ فَمَا أَنْتَ مُحَدِّثِي عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِحَدِيثٍ تُطَيِّبُ بِهِ أَنْفُسَنَا عَنْ مَوْتَانَا قَالَ قَالَ نَعَمْ صِغَارُهُمْ دَعَامِيصُ الْجَنَّةِ يَتَلَقَّى أَحَدُهُمْ أَبَاهُ أَوْ قَالَ أَبَوَيْهِ فَيَأْخُذُ بِثَوْبِهِ أَوْ قَالَ بِيَدِهِ كَمَا آخُذُ أَنَا بِصَنِفَةِ ثَوْبِكَ هَذَا فَلَا يَتَنَاهَى أَوْ قَالَ فَلَا يَنْتَهِي حَتَّى يُدْخِلَهُ اللَّهُ وَأَبَاهُ الْجَنَّةَ

Abi Xasaan waxa laga wariyey inuu yiri: waxaan Abuhurayra ku dhahay: ”waxa iga dhintay laba wiil ee maxaad nooga sheegi kartaa rasuulkii Ilaahay (scw) xadiis naftayada uga bishaareeya caruurtii naga dhimatay? Wuxuu yiri: haa, caruurtoodu waxay galayaan jannada (meel kasta), midkood wuxuu la kulmayaa aabihii ama labadiisa waalid, wuxuuna qabanayayaa maradiisa ama wuxuu yiri gacantiisa sida aan iminka u hayo maradaada dacalkeeda, mana sii daynayo illamaa Ilaahay galiyo isaga iyo aabihiiba jannada”[265]

---

[264] Bukhaari: 7047

[265] Saxiix Muslim: 2635

## Jannada caruur malagu dhalayaa?

Qaar kamida culumada islaamku waxay dhaheen: Adoonku markuu jannada galo oo naftiisu ay doonto inuu caruur dhalo waa la siinayaa, waxayna daliishadeen xadiiskan:

عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ رضي الله عنه قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : الْمُؤْمِنُ إِذَا اشْتَهَى الْوَلَدَ فِي الْجَنَّةِ كَانَ حَمْلُهُ وَوَضْعُهُ وَسِنُّهُ فِي سَاعَةٍ ، كَمَا يَشْتَهِي

Abi Saciid Al-khudriyy (Rc) waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu dhahay: ”Mu’minku markuu ku doono caruur jannada dhexdeeda, uurka inta uu ku jiro dhalidiisa iyo cumrigiisa (oo ah sadex iyo sodon jir) waa hal saac kaliya, siduu rabay (wiil ama gabadh kii uu rabay)”[266]

Hal ilbidhiqsi oo kaliya ayaa loogu dhalay ilmihii uu rabay, subxaana Allah.

Culumadii kale waxay daciifiyeen xadiiskan waxayna ku doodeen in jannada uur iyo dhalmo aanay jirin, dumarkana laga daahiriyey xaydkii iyo nifaaskii. Ta labaad hadii ay caruur dhalayaan ma mid waligeedba soconaysaa mise way istaagaysaa?

Sidoo kale Ilaahay markuu quraanka ku sheegay in aabaha meel sare gaadhay sare loogu qaadayo durriyadiisii, lama sheegin in durriyad cusub lagu siinayo jannada.

Si kastaba ha ahaatee jannadu waa meel lagu raali galinayo mu’miniintii gashay, mana jirto cid baahi u qabta caruur u adeegta. Qof kastana wuxuu helayaa wixii uu rabay ee uu jeclaa. Ilahay ehelka jannada hanaga yeele.

[266] Tirmadi: 2563

# Nicmada ugu wayn ee Jannada

## Raali ahaanshaha Rabbi

Ruuxa mu'minka ah markuu jannada galo ee uu arko nicmooyinka Ilaahay ku manaystay, waxa loogu darayaa nicmo kale oo sii dhamaystiraysa barwaaqada iyo farxada ehelka jannada, nicmadaasina waa raali ahaanshaha Ilaahay iyo inaanu waligood ka cadhoonaynin.

Si kasta aduunyada hadii aad nicmooyin u haysato oo Ilaahay aanu raali ka ahayn waa mid la isaga daba imanayo oo durabdii dhamaanaysa. Ilaahay (swt) isagoo ka warramaya raali ahaanshihiisa wayn wuxuu yiri:

وَعَدَ اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا وَمَسَاكِنَ طَيِّبَةً فِي جَنَّاتِ عَدْنٍ ۚ وَرِضْوَانٌ مِّنَ اللَّهِ أَكْبَرُ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ (72)

"Waxa Ilaahay ugu yaboohay mu'miniinta (nimanka) iyo mu'minaatka (haweenka) jannooyin ay soconayso hoosteeda wabiyoyaalkii ayagoo ku waaraya dhexdeeda iyo deegaan wanaagsan oo ku yaala jannada cadan, iyo raali ahaanshaha rabbi ee wayn, taasi waa guul aad u wayn"[267]

Sidoo kale Ilaahay wuxuu yiri:

جَزَاؤُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ جَنَّاتُ عَدْنٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا ۖ رَّضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ ۚ ذَٰلِكَ لِمَنْ خَشِيَ رَبَّهُ (8)

"Abaalgudkooda Ilaahay agtiisa ay ku leeyihiin waa jannooyinka cadan ee ay soconayso hoostooda wabiyoyaalkii ayagoo ku waaraya dhexdooda waligood,

[267] Suuratu Tawbah: 72

Ilaahay raalibuu ka noqday ayaguna raalibay ku noqdeen, taasna waxa iska leh cidii rabbigooda ka cabsata”[268]

Rasuulkii Ilaahay (scw) waxa lagasoo wariyey:

عن أبي سعيد الخدري أن النبي صلى الله عليه وسلم قال إن الله يقول لأهل الجنة يا أهل الجنة فيقولون لبيك ربنا وسعديك والخير في يديك فيقول هل رضيتم فيقولون وما لنا لا نرضى يا رب وقد أعطيتنا ما لم تعط أحدا من خلقك فيقول ألا أعطيكم أفضل من ذلك فيقولون يا رب وأي شيء أفضل من ذلك فيقول أحل عليكم رضواني فلا أسخط عليكم بعده أبدا

Abi saciid al-khudriyy waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Ilaahay wuxuu ku dhahayaa ehelka jannada: ehelkii jannadow, waxay dhahayaan: waan ku ajiibnay rabbiyoow, khayrkuna gacantaada ayuu ku jiraaye, wuxuu dhahayaa: ”raali ma noqoteen?” waxay odhanayaan: oo simaanan raali u ahayn rabbiyow, waxaad na siisay wax aanad siinin cid kamida khalqigaagee, wuxuu dhahayaa: ma idin siiyaa wax ka fadli badan? Waxay dhahayaan: rabbiyow, maxaa ka fadli badan? Wuxuu dhahayaa: raali ayaan idinka noqday oo idiinma cadhoonayo waligiin.”[269]

Maxaa ka wanaagsan oo nafta uga macaan inay maqasho go’aanka rabbi ee ah ”raalibaan idinka ahay, idiinmana cadhoonayo waligay” Ilaahay hanaga yeelo kuwa Ilaahay raalida ka noqdo ee aan loo cadhoonin.

## Ilaahay oo la arkayo

Caqiidada dadka mu’miniinta ah waxa kamida inay rumaysanyihiin in rabbigood ay arkayaan maalinta qayaame.

---

[268] Suuratu Albayyinah: 8
[269] Muslim: 2829

Aduunyada inta aynu joogno waxa rabbi inoogu nicmaystay hadalkiisii oo ah kitaabka Ilaahay ee quraanka, halka jannadana dib naloogu dhigay muuqaalka rabbi subxaanahu wa tacaala.

Sida caadiga ah hadii aad maqasho cod kaliya waxaad jeclaanaysa inaad aragto codkaas muuqaalkiisa sidii nabi Muuse (scw) markuu maqlay ee uu dhagaystay hadalkii rabbi u waxyoonayey ayuu doonay inuu ku darsado muuqaal, wuxuuna rabbigii ka codsaday inuu istuso.

وَلَمَّا جَاءَ مُوسَىٰ لِمِيقَاتِنَا وَكَلَّمَهُ رَبُّهُ قَالَ رَبِّ أَرِنِي أَنظُرْ إِلَيْكَ ۚ قَالَ لَن تَرَانِي وَلَٰكِنِ انظُرْ إِلَى الْجَبَلِ فَإِنِ اسْتَقَرَّ مَكَانَهُ فَسَوْفَ تَرَانِي ۚ فَلَمَّا تَجَلَّىٰ رَبُّهُ لِلْجَبَلِ جَعَلَهُ دَكًّا وَخَرَّ مُوسَىٰ صَعِقًا ۚ فَلَمَّا أَفَاقَ قَالَ سُبْحَانَكَ تُبْتُ إِلَيْكَ وَأَنَا أَوَّلُ الْمُؤْمِنِينَ (143)

”Markuu Muuse u yimid ballantanadii oo rabbigiina uu la hadlay ayuu yiri (Muuse) rabbiyow iskay tus aan ku arkee, wuxuu yiri (rabbi) ima arkaysid ee waxaad fiirisaa xaga buurta hadii ay sideeda ahaato waad i arki doontaa, markuu rabbigii isu muujiyey buurtii ayuu ka dhigay burbur oo Muusana wuu suuxay, markuu soo kacay ayuu yiri adigaa xumaan ka nasahan (rabbiyow) waan kuu toobad keenay waxaanan ahay ka u horeeya ee rumeeya”[270]

Sida aan kor kusoo sheegnay nabi Muuse hadalkii uu maqlay ayuu doonay inuu ku darsado muuqaal, hase ahaatee waxa u cadaatay in Ilaahay aduunyada aan lagu arkaynin, waanu toobad keenay oo Ilaahay usoo laabtay.

[270] Suuratu Al-acraaf: 143

Aayadan waxaan ka faaidaynaa:

- Inay suurtagal tahay in rabbi la arki karo, sababtoo ah hadii aanay suurtagal ahayn nabi Muuse kamuu codsan lahayn rabbigii.
- Nabi Muuse wuxuu rumaysan yahay inaanu Ilaahay arkaynin illamaa Ilaahay isagu awoodiisa uu isku tuso.
- Ilaahay wuxuu isu muujiyey buurta oo ah wax kamida makhluuqaadkiisa, kadibna way burburtay. Maadaama aduunyada xeerarkeedu ka duwanyihiin aakhiro markaa waa suurtagal in la arko rabbiga wayn subxaanahu wa tacaala.

Aayad kale rabbi wuxuu yiri:

( وجوه يومئذ ناضرة . إلى ربها ناظرة )

”Wajiyayaal ayaa faraxsan. Xaga rabbigood ayay eegayaan”[271]

Wajiyadan farxsan waxay daawanayaan rabbigood subxaanahu wa tacaala, waana sababta barwaaqadu uga muuqato wajiyadooda.

Waxa kale oo Ilaahay yiri:

( لهم ما يشاءون فيها ولدينا مزيد )

[271] Suuratu Al-Qiyaamah: 22, 23

“Waxay helayaan wax kasta oo ay doonaan waxaan haynaana dheeraad”[272]

Dheeraadku waa eegmada wajiga Ilaahay subxaanahu, sida uu ku fasiray Anas ibnu Maalik ilaahay raali haka ahaadee.

Waxa kale oo rabbi yiri:

( للذين أحسنوا الحسنى وزيادة )

”Kuwa samo falayaasha waxa u sugnaatay janno iyo dheeraad” [273]

Dheeraadkuna waa eegmada rabbi subxaanahu wa tacaala, waana sida uu ku fasiray rasuulkii Ilaahay (scw):

عَنْ صُهَيْبٍ رضي الله عنه عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : " إِذَا دَخَلَ أَهْلُ الْجَنَّةِ الْجَنَّةَ قَالَ: يَقُولُ اللَّهُ تَبَارَكَ وَتَعَالَى: تُرِيدُونَ شَيْئًا أَزِيدُكُمْ فَيَقُولُونَ أَلَمْ تُبَيِّضْ وُجُوهَنَا أَلَمْ تُدْخِلْنَا الْجَنَّةَ وَتُنَجِّنَا مِنْ النَّارِ قَالَ فَيَكْشِفُ الْحِجَابَ فَمَا أُعْطُوا شَيْئًا أَحَبَّ إِلَيْهِمْ مِنْ النَّظَرِ إِلَى رَبِّهِمْ عَزَّ وَجَلَّ وهي الزيادة ثُمَّ تَلَا هَذِهِ الْآيَةَ ( لِلَّذِينَ أَحْسَنُوا الْحُسْنَى وَزِيَادَةٌ )

Suhayb (Rc) waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”marka ehelka jannadu ay galaan jannada, wuxuu yiri: Ilaaha barkada badan ee sarreeya ayaa odhanaya: ma rabtaan dheeraad? Waxay dhahayaa: miyaanad noo nuurinin wajiyadayadii? Miyaanad na galinin jannadii? Miyaanad naga badbaadin naartii? Wuxuu yiri: wuxuu faydayaa (rabbi) xijaabkii, lamaba siinin wax ay ka jeceliyihiin eegmada rabbigooda sharafta leh, waana dheeraadka. Wuxuuna akhriyey ” ”Kuwa samo falayaasha waxa u sugnaatay janno iyo dheeraad”[274]

[272] Suuratu Qaaf: 35
[273] Suuratu Yuunus: 26
[274] Saxiix Muslim: 266

Hadii aad ogtaatay in ehelka jannada wixii la siiyey ay ugu jecelyihiin eegmada ama daawashada rabbiga wayn, waxa kuu cadaatay dhibta ay leedahay iyo khasaaraha wayn ee u sugan gaaladii Ilaahay u diiday inay arkaan isaga, wuxuu Rabbi yiri;

( كلا إنهم عن ربهم يومئذ لمحجوبون )

”Sidaas maahee ayagu rabbigood maalintaas waa laga xijaabay”[275]

قال الشافعي ، رحمه الله : ما حجب الفجار إلا وقد علم أن الأبرار يرونه عز وجل

Imaamu Shaafici (AHU) wuxuu yiri: ”Faajiriinta xijaab ayaa la saaray (hadii la saarayna) waxa la ogaanayaa in samo falayaashu ay arkayaan rabbigood”[276]

Waxa kale oo u daliila in rabbi la arkayo maalinta Qayaame, xadiisyada saxiixa ah ee kusoo arooray saxiixa Imaamu Al-Bukhaari iyo Imaamu Al-Muslim.

عن أبي هريرة رضي الله عنه أن ناسا قالوا : يا رسول الله هل نرى ربنا يوم القيامة ؟ فقال رسول الله : " هل تضارون في رؤية القمر ليلة البدر ؟ " قالوا : لا يا رسول الله . قال : " هل تضارون في الشمس ليس دونها سحاب ؟ " قالوا : لا . قال : " فإنكم ترونه كذلك ...الحديث ".

Abihurayra (Rc) waxa laga wariyey in dad ay dhaheen: rasuulkii Ilaahayow ma arki doonaa rabbigeen maalinta Qayaame? Rasuulkii Ilaahayna wuxuu yiri: ”Miyaad arki kari waayeysaan dayaxu habeenka uu dhamayska yahay? Waxay dhaheen: Maya, rasuulkii Ilaahay. Wuxuu yiri: Miyaad ka arki kari waayeysaan qorraxda marka daruur

[275] Suuratu Mudaffifuun: 15
[276] Tafsiirka Ibnu Kathiir

aanay jirin? Waxay dhaheen: maya. Wuxuu yiri: ”sidaasoo kale ayaad u arkaysaan.[277]

عن جرير بن عبد الله البجلي قال: كنا جلوسا مع النبي صلى الله عليه وسلم فنظر إلى القمر ليلة أربع عشرة فقال إنكم سترون ربكم عيانا كما ترون هذا لا تضامون في رؤيته " .

Jariir ibnu Cabdilaahi Al-bajali waxa laga wariyey inuu yiri: waxaan la fadhinay nabiga (scw), wuxuuna fiiriyey dayaxa habeen uu dhamaytiranyahay, wuxuuna yiri: ”Idinku waxaad rabbigiin u arkaysaan si dhaba sida aad u aragtaan kaas (dayaxii) ee aydaan isugu qabsanayn daawayshiisa”[278]

عن أبي موسى أن النبي صلى الله عليه وسلم قال : "جنتان من فضة آنيتهما وما فيهما، وجنتان من ذهب آنيتهما وما فيهما، وما بين القوم وبين أن يروا ربهم تبارك وتعالى إلا رداء الكبرياء على وجهه في جنة عدن

Abi Muuse waxa laga wariyey in nabiga (scw) dhahay: ”Laba Janno waa fidho, weelkooda iyo waxa yaalaaba, laba jannana waa dahab weelkooda iyo waxa dhex yaalaaba, umana dhaxayso qoomka iyo rabbigooda khayrka iyo barakada badan marka laga reebo huga kibirka ee wajigiisa ahaaday ee jannada cadan”[279]

[277] Bukhaari: 6088
[278] Bukhaari: 6883
[279] Bukhaari: 4500

## Maxaa Janno lagu galaa?

Camalada Jannada lagu galo way badanyihiin, lagumana soo koobi karo kitaabkan ee qaar kamida ayaan soo qaadanaynaa:

1. Iimaan iyo Camal Saalixa:

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ كَانَتْ لَهُمْ جَنَّاتُ الْفِرْدَوْسِ نُزُلًا ﴿١٠٧﴾

"Kuwa Ilaahay rumeeyey ee camal saalixa la yimid waxa jannada firdawsa ugu sugan degenaansho (martiqaad)"[280]

2. Daacada Ilaahay iyo Rasuulka:

In la adeeco Ilaahay iyo rasuulkiisa Muxamed (scw). Ilaahay wuxuu yiri:

وَمَن يُطِعِ اللَّـهَ وَرَسُولَهُ يُدْخِلْهُ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ۖ وَمَن يَتَوَلَّ يُعَذِّبْهُ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٧﴾

"Qofkii adeeca Ilaahay iyo rasuulkiisa wuxuu galinayaa jannooyin ay soconayso hoosteeda wabiyoyaalkii, cidii jeesata wuxuu u cadaabayaa cadibaad daran"[281]

Sidoo kale, rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

كُلُّ أُمَّتِي يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَنْ أَبَى قَالُوا يَا رَسُولَ اللَّهِ وَمَنْ يَأْبَى قَالَ مَنْ أَطَاعَنِي دَخَلَ الْجَنَّةَ وَمَنْ عَصَانِي فَقَدْ أَبَى

"Dhamaan ummadaydu jannada ayay galaysaa kii diida mooyee, waxay dhaheen: rasuulkii Ilaahayow, yaa diidaya? Wuxuu yiri: qofkii i adeecaa jannaduu galayaa kii i caasiyana wuu diiday"[282]

---

[280] Suuratu Al-Kahfi: 107

[281] Suuratu Al-Fatxi: 17

[282] Bukhaari: 6851

### 3. Cabsida Ilaahay:

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

من خاف أدلج ومن أدلج بلغ المنزل ألا إن سلعة الله غالية ألا إن سلعة الله الجنة

”qofkii cabsada wuu galab carraaba, qofkii galab carraabaana wuu gaadhaa guriga, hooy! Silcada (ganacsiga) Ilaahay waa qaali, silcada Ilaahayna waa jannada”[283]

وَلِمَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِ جَنَّتَانِ ﴿٤٦﴾

”Qofkii ka cabsada hor istaaga rabbigii wuxuu mudan laba janno”[284]

### 4. Sujuuda Badan:

حدثني ربيعة بن كعب الأسلمي قال كنت أبيت مع رسول الله صلى الله عليه وسلم فأتيته بوضوئه وحاجته فقال لي سل فقلت أسألك مرافقتك في الجنة قال أو غير ذلك قلت هو ذاك قال فأعني على نفسك بكثرة السجود

Rabiica ibnu Kacab Al-aslami waxa laga wariyey inuu yiri: ”waxaan u hooyan jiray rasuulka Ilaahay (scw) waxaanan u keenay waysadiisii iyo xaajooyinkiisii, markaasuu igu yiri: i waydiiso. Waxaan iri: jannada inaan kugula rafiiqo. Wuxuu yiri: taas ma waxaan ahayn, waxaan iri: maya taas un. Wuxuu yiri: igu kaalmee naftaadu inay badsato sujuuda”[285]

### 5. Naxariista Ilaahay:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ ، قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " قَارِبُوا وَسَدِّدُوا وَاعْلَمُوا ، أَنَّهُ لَنْ يَنْجُوَ أَحَدٌ مِنْكُمْ بِعَمَلِهِ " ، قَالُوا : يَا رَسُولَ اللَّهِ ، وَلَا أَنْتَ ؟ ، قَالَ : " وَلَا أَنَا إِلَّا أَنْ يَتَغَمَّدَنِيَ اللَّهُ بِرَحْمَةٍ مِنْهُ وَفَضْلٍ "

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Dhodhoweeya, awda oo shaqeeya, qofna

[283] Tirmadi: 2450
[284] Suuratu Arraxmaan: 46
[285] Saxiix Muslim: 489

kuma badbaadayo camalkiisa" waxay dhaheen: xataa adigu? Wuxuu yiri: "xataa anigu, illamaa Ilaahay iigu naxariisto raxmadiisa iyo fadligiisa"[286]

## 6. Jihaadka:

Ilaahay wuxuu yiri:

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا هَلْ أَدُلُّكُمْ عَلَىٰ تِجَارَةٍ تُنجِيكُم مِّنْ عَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿١٠﴾ تُؤْمِنُونَ بِاللَّـهِ وَرَسُولِهِ وَتُجَاهِدُونَ فِي سَبِيلِ اللَّـهِ بِأَمْوَالِكُمْ وَأَنفُسِكُمْ ۚ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١١﴾ يَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَيُدْخِلْكُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ وَمَسَاكِنَ طَيِّبَةً فِي جَنَّاتِ عَدْنٍ ۚ ذَٰلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿١٢﴾

"Kuwa Ilaahay rumeeyow ma idin tusaa ganacsi idinka badbaadinaya cadaab daran (10) Ilaahaybaad rumaynaysaan iyo rasuulkiisa iyo inaad ku jihaadaan jidka Ilaahay xoolihiina iyo nafahiinaba, taasbaana idiin khayr badan hadaad ogtihiin (11) wuxuu dhaafayaa (Ilaahay) danbiyadiina wuxuuna idin galinayaa jannooyin ay soconayso hoosteeda wabiyoyaalkii iyo deegaan wanaagsan oo ahaaday jannooyinka cadan, waa taas guusha wayni (12)"[287]

## 7. Shahiidka:

" لِلشَّهِيدِ عِنْدَ اللَّهِ سِتُّ خِصَالٍ : يُغْفَرُ لَهُ فِي أَوَّلِ دَفْعَةٍ ، وَيَرَى مَقْعَدَهُ مِنَ الْجَنَّةِ ، وَيُجَارُ مِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ ، وَيَأْمَنُ مِنَ الْفَزَعِ الْأَكْبَرِ ، وَيُوضَعُ عَلَى رَأْسِهِ تَاجُ الْوَقَارِ الْيَاقُوتَةُ مِنْهَا خَيْرٌ مِنَ الدُّنْيَا وَمَا فِيهَا ، وَيُزَوَّجُ اثْنَتَيْنِ وَسَبْعِينَ زَوْجَةً مِنَ الْحُورِ الْعِينِ ، وَيُشَفَّعُ فِي سَبْعِينَ مِنْ أَقَارِبِهِ "

"Shahiidku ilaahay agtiisa wuxuu ku leeyahay todoba arrimood: danbigiisa loo dhaafa dhibicda u horeysa (dhiigiisa), booskiisa jannadana wuu arkaa, cadaabka qabrigana waa laga badbaadiyaa, argagaxa wayna wuu ka

[286] Saxiix Muslim: 5046
[287] Suuratu Assaff: 10,11,12

aamin noqdaa, madixiisana waxa la dhigaa taajka qadarinta, yaaquutkiisu uu ka khayr badanyahay aduunyada iyo waxa dhex yaalaba, waxa loo guuriyaa todobaatan iyo labo dumar oo xuural cayna, wuxuuna u shafeeco qaadaa todobaatan qaraabadiisa ah”[288]

### 8. Quraanka Akhrinta:

عن جابر عن النبي صلى الله عليه وسلم قال : ( الْقُرْآن شَافِع مُشَفع وَمَاحِل مُصَدَّقٌ مَنْ جَعَلَهُ إِمَامَهُ قَادَهُ إِلَى الْجَنَّةِ وَمَنْ جَعَلَهُ خَلْفَ ظَهْرِهِ سَاقَهُ إِلَى النَّارِ) .

Jaabir waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”Quraanku waa ergo shafaaco qaadaysa iyo mid kula doodaya, cidii hogaamiye ka dhigata wuxuu u hogaaminayaa Jannada, cidii dhabarkiisa ka tuurana wuxuu gaynayaa naarta”[289]

### 9. Xajka baariga ah:

عن أبي هريرة قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم العمرة إلى العمرة تكفر ما بينهما والحج المبرور ليس له جزاء إلا الجنة

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”cumradu cumradeeda kale kafaaro gud ayay u tahay, xajka lagu samo falayna abaal aan janno ahayn malaha”[290]

### 10. Soonka sunnaha ah:

من صام يوما في سبيل الله باعد الله وجهه عن النار سبعين خريفا

”Qofkii sooma hal maalin ilaahay dartii waxa Ilaahay wajigiisa ka fogeeya naarta todobaatan sanadood”[291]

---

[288] Tiramdi: 1584
[289] Ibnu Maajah: 124 waxa saxiixiyey Albaani
[290] Tirmadi: 933
[291] Saxiix Muslim: 1153

### 11. Tawxiidka oo la xaqiijiyo:

Malaku Jibriil (cs) wuxuu ku yiri rasuulkii Ilaahay (scw)

بشر أمتك أنه من مات لا يشرك بالله شيئا دخل الجنة فقلت يا جبريل وإن سرق وإن زنى قال نعم قال قلت وإن سرق وإن زنى قال نعم قال قلت وإن سرق وإن زنى قال نعم وإن شرب الخمر

Ummadaada ugu bishaaree cidii dhimata ayadoon Ilaahay shirki ula imanin waxay galayaan jannada, waxaan iri: jibriilow, haduu wax xaday oo uu sinaystana? Wuxuu yiri: haa. Waxaan iri: haduu wax xaday oo uu sinaystayna? Wuxuu yiri: haa. Waxaan iri: haduu wax xaday oo uu sinaystayna? Wuxuu yiri: haa, xataa haduu khamri cabo.[292]

### 12. Shanta salaadood:

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

اتقوا الله ربكم وصلوا خمسكم وصوموا شهركم وأدوا زكاة أموالكم وأطيعوا ذا أمركم تدخلوا جنة ربكم

”Ilaahay ka cabsada rabbigiina oo tukada shantiina, sooma bishiina, bixiya zakada xoolihiina oo adeeca madaxdiina waxaad galaysaan jannada rabbigiine”[293]

### 13. Salaada Casar iyo Subaxa:

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

من صلى البردين دخل الجنة

[292] Saxiix Muslim: 94

[293] Tirmadi: 616

”cidii tukata labada qabow (salaada fajriga iyo casarka) jannada way gashay”[294]

## 14. Salaadaha Naafilooyinka ah:

عن أم حبيبة زوج النبي صلى الله عليه وسلم أنها قالت سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول ما من عبد مسلم يصلي لله كل يوم ثنتي عشرة ركعة تطوعا غير فريضة إلا بنى الله له بيتا في الجنة أو إلا بني له بيت في الجنة

Umu Xabiiba sawjadii nabiga (scw) waxa laga wariyey inay tiri: waxaan maqlay rasuulkii Ilaahay (scw) oo leh: ”Majiro adoon muslima oo tukada maalin kasta laba iyo toban rakcadood oo sunne ah oo aan faral ahayn, (haduu tukadaba) waxa Ilaahay u dhisaa guri jannada ku yaala ama waxa loo dhisaa guri jannada ku yaala”[295]

## 15. Qofka jamaaco ku tukada afartan maalmood:

قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ( مَنْ صَلَّى لِلَّهِ أَرْبَعِينَ يَوْمًا فِي جَمَاعَةٍ يُدْرِكُ التَّكْبِيرَةَ الْأُولَى كُتِبَتْ لَهُ بَرَاءَتَانِ بَرَاءَةٌ مِنْ النَّارِ وَبَرَاءَةٌ مِنْ النِّفَاقِ )

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Qofkii Ilaahay u tukada afartan maalmood jamaaco ee soo gaadha takbiirta koowaad waxa loo qoraa inuu bari ka yahay laba arrimood, bari ayuu ka yahay naarta (ma galayo) barina wuxuu ka yahay munaafaqadnimada”.”[296]

## 16. Qofka Ilaahay dartii u dhisa Masaajid:

---

[294] Bukhaari: 549
[295] Muslim: 728
[296] Tirmadi: 241

عن النبي صلى الله عليه وسلم أنه قال من بنى لله مسجدا صغيرا كان أو كبيرا بنى الله له بيتا في الجنة

Nabiga (scw) waxa laga wariyey inuu yiri: ”Qofkii Ilaahay u dhisay masaajid, ha yaraado ama ha waynaadee, waxa Ilaahay u dhisayaa guri ku yaala jannada”[297]

### 17. Runta in la sheego:

قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " عَلَيْكُمْ بِالصِّدْقِ ، فَإِنَّ الصِّدْقَ يَهْدِي إِلَى الْبِرِّ ، وَإِنَّ الْبِرَّ يَهْدِي إِلَى الْجَنَّةِ ،

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Waa inaad runta sheegtaa, maxaayeelay runtu waxay kugu hanuuninaysaa baarinimada, baarinimaduna waxay kugu hanuuninaysaa jannada”[298]

### 18. Agoonta in la caawiyo:

عن النبي صلى الله عليه وسلم قال أنا وكافل اليتيم في الجنة هكذا وقال بإصبعيه السبابة والوسطى

Nabiga (scw) waxa laga wariyey inuu yiri: ”Aniga iyo ka agoonka kafaalo qaataa jannada waxaan isku nahay sidaas, wuxuuna yiri: labadiisa farood, farta muridisada iyo farta dhexe (ayuu isku qabtay)”[299]

---

[297] Tirmadi: 319
[298] Saxiix Muslim: 4727
[299] Bukhaari: 5659

### 19. Afar rakacadood oo ka horeeya Duhurka iyo afar ka danbeeya

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم من صلى قبل الظهر أربعا وبعدها أربعا حرمه الله على النار

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”qofkii tukada duhurka kahor afar iyo afar ka danbeeya, waxa Ilaahay ka xarrimay naarta”[300]

### 20. Aadaanka oo laga daba akhriyo:

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم إذا قال المؤذن الله أكبر الله أكبر فقال أحدكم الله أكبر الله أكبر ثم قال أشهد أن لا إله إلا الله قال أشهد أن لا إله إلا الله ثم قال أشهد أن محمدا رسول الله قال أشهد أن محمدا رسول الله ثم قال حي على الصلاة قال لا حول ولا قوة إلا بالله ثم قال حي على الفلاح قال لا حول ولا قوة إلا بالله ثم قال الله أكبر الله أكبر قال الله أكبر الله أكبر ثم قال لا إله إلا الله قال لا إله إلا الله من قلبه دخل الجنة

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”marka mu’adinku dhaho (Allahu akbar) ee midkiina dhaho (Allahu akbar), hadana uu dhaho (ash-hadu an-laa ilaaha ilaa Allah) ee dhaha (ash-hadu an-laa ilaaha ilaa Allah) hadana uu dhaho (ash-hadu anna muxamadan rasuulu Allah) ee dhaha (ash-hadu anna muxamadan rasuulu Allah) hadana uu dhaho (xayya calaa assalaah) ee dhaha (laa xawla walaa quwwata illaa billah) hadana uu dhaho (xayya calaa alfalaax) ee dhaha (laa xawla walaa quwwata illaa billah) hadana uu dhaho (Allahu akbar) ee dhaha (Allahu akbar) hadana uu dhaho (laa ilaaha ilaa Allah) ee qalbigiisa ka dhaha (laa ilaaha ilaa Allah) wuxuu galayaa Jannada”[301]

---

[300] Tirmadi: 427

[301] Saxiix Muslim: 385

### 21. Sunnada nabiga oo lagu dhaganaado:

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

والذي نفس محمد بيده لتفترقن أمتي على ثلاث وسبعين فرقة واحدة في الجنة وثنتان وسبعون في النار قيل يا رسول الله من هم قال الجماعة

”Ilaahbaan ku dhaartee ummadaydu waxay u kala baxaysaa todobaatan iyo sadex kooxood, mid kaliya ayaa jannada galaysa, todobaatan iyo labada kalena naarta ayay galayaan, waxa lagu yiri: Rasuulkii Ilaahayow waa kuwama? Wuxuu yiri: waa jamaacada.”[302]

Xadiis kale ayuu nabigu ku cadeeyey in kooxdaasi ay ku dhaqmayso sunnadiisa iyo sunnadii saxaabadiisa, wuxuuna yiri: ”Waa kuwa ku sugan waxaan ku suganahay aniga iyo saxaabadaydu”[303]

### 22. Qof buka oo lasoo booqdo:

عن أبي هريرة قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم من عاد مريضا أو زار أخا له في الله ناداه مناد أن طبت وطاب ممشاك وتبوأت من الجنة منز

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Qofki booqda ruux buka ama u siyaarta walaalkii dar Ilaahay, waxa u dhawaaqa mid dhawaaqaya (oo leh) waad wanaagsantahay, socodkaaguna wuu fiicanyahay, jannada waxa laguugu diyaariyey guri”[304]

### 23. Qofka dadku uga markhaati kacaan wanaaga:

Rasuulkii Ilaahay (scw) waxa laga wariyey inuu yiri:

أيما مسلم شهد له أربعة بخير أدخله الله الجنة فقلنا وثلاثة قال وثلاثة فقلنا واثنان قال واثنان ثم لم نسأله عن الواحد

[302] Ibnu Maajah: 3992
[303] Tirmadi: 2641
[304] Tirmadi: 2008

”Qof kasta oo muslima oo afar ay uga markhaati kacdo khayr waxa Ilaahay galiyaa Jannada, waxaanu nidhi: sadexna? Wuxuu yiri: sadexna, waxaanu nidhi: labana, wxuu yiri: labana, manaanaan waydiin hal”[305]

## 24. Qofka dadka ka saamaxa daymaha:

عَنْ حُذَيْفَةَ ، عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ، " أَنَّ رَجُلًا مَاتَ ، فَدَخَلَ الْجَنَّةَ ، فَقِيلَ لَهُ : مَا كُنْتَ تَعْمَلُ ؟ قَالَ : فَإِمَّا ذَكَرَ ، وَإِمَّا ذُكِّرَ ، فَقَالَ : إِنِّي كُنْتُ أُبَايِعُ النَّاسَ ، فَكُنْتُ أُنْظِرُ الْمُعْسِرَ ، وَأَتَجَوَّزُ فِي السِّكَّةِ ، أَوْ فِي النَّقْدِ ، فَغُفِرَ لَهُ "

Xudayfa waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw): ”nin ayaa dhintay oo wuxuu galayaa jannada, waxa lagu yiri: maxaad qaban jirtay? Wuxuu yiri: wuu xasuustay ama waa la xasuusiyey, waxaan ahaa nin ganacsade ah, waxaan cafin jiray qofka daynta lagu leeyahay (darhamka iyo diinaarka) ama lacagta, waana loo danbi dhaafay”[306]

## 25. Indho Ilaahay dartii u ooyey:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لَا يَلِجُ النَّارَ رَجُلٌ بَكَى مِنْ خَشْيَةِ اللَّهِ حَتَّى يَعُودَ اللَّبَنُ فِي الضَّرْعِ وَلَا يَجْتَمِعُ غُبَارٌ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَدُخَانُ جَهَنَّمَ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu dhahay: “ma galayo naarta nin u ooyay cabsida Ilaahay illamaa caanuhu ay ku noqdaan candhada (adhiga), mana kulmaan boodhka jidka Ilaahay iyo qiiqa naarta jahannama”[307]

---

[305] Bukhaari: 1302

[306] Saxiix Muslim: 2927

[307] Tirmadi: 2311

## 26. Ilaahay waydiiso jannada sadex jeer:

قال النبي صلى الله عليه وسلم : " من سأل الله الجنة ثلاث مرات قالت الجنة اللهم أدخله الجنة ، ومن استجار من النار ثلاث مرات قالت النار اللهم أجره من النار " .

Nabigu (scw) wuxuu yiri: "cidii Ilaahay waydiisata jannada sadex jeer, waxay jannadu tidhaahdaa: Ilaahow gali jannada, qofkii sadex jeer ka magangala naarta waxay naartu tidhaahdaa: Ilaahow ka magangali naarta"[308]

## 27. Jidka oo dhibta laga qaado:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : ( لَقَدْ رَأَيْتُ رَجُلًا يَتَقَلَّبُ فِي الْجَنَّةِ فِي شَجَرَةٍ قَطَعَهَا مِنْ ظَهْرِ الطَّرِيقِ كَانَتْ تُؤْذِي النَّاسَ )

Abihurayra waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: "waxaan arkay nin gadgadoomaya jannada dhexdeeda, (kuna galay) geed uu ka gooyey wadada badhtankeeda taasoo dadka dhibaysay"[309]

## 28. Magacyada Ilaahay oo la xifdiyo:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : ( إِنَّ لِلَّهِ تِسْعَةً وَتِسْعِينَ اسْمًا مِائَةً إِلا وَاحِدًا مَنْ أَحْصَاهَا دَخَلَ الْجَنَّةَ ) .

Abihurayra waxa laga wariyey ilaahay raali haka ahaadee in rasuulkii Ilaahay (scw) dhahay: "Ilaahay wuxuu leeyahay sagaal iyo sagaashan magac, boqol laga jaray hal, cidii koobtaa jannada ayuu galay"[310]

---

[308] Tirmadi: 2572

[309] Saxiix Muslim: 1914

[310] Bukhaari: 2736

### 29. Gabadha ninkeeda adeecda:

عَنْ عَبْدِ الرَّحْمَنِ بْنِ عَوْفٍ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا صَلَّتْ الْمَرْأَةُ خَمْسَهَا وَصَامَتْ شَهْرَهَا وَحَفِظَتْ فَرْجَهَا وَأَطَاعَتْ زَوْجَهَا قِيلَ لَهَا ادْخُلِي الْجَنَّةَ مِنْ أَيِّ أَبْوَابِ الْجَنَّةِ شِئْتِ

Cabdiraxmaan ibnu Cawf waxa laga wariyey inuu yiri: Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu dhahay: ”Hadii gabadhu ay tukato shanteeda, ay soomto bisheeda, ay dhawrto xubinkeeda, ay adeecdo ninkeeda, waxa lagu dhahaa ka gal jannada albaabkii aad doonto”[311]

### 30. Ballan oofinta iyo Amaanada:

عَنْ عُبَادَةَ بْنِ الصَّامِتِ ، أَنّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ، قَالَ : " اضْمَنُوا لِي سِتًّا مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَضْمَنْ لَكُمْ الْجَنَّةَ : اصْدُقُوا إِذَا حَدَّثْتُمْ ، وَأَوْفُوا إِذَا وَعَدْتُمْ ، وَأَدُّوا إِذَا اؤْتُمِنْتُمْ ، وَاحْفَظُوا فُرُوجَكُمْ ، وَغُضُّوا أَبْصَارَكُمْ ، وَكُفُّوا أَيْدِيَكُمْ " .

Waxa laga wariyey Cubaada ibnu Saamit in nabigu (scw) yiri: “iiga damaanad qaada lix nafihiina aan idiin damaanad qaado jannadee: run sheega markaad warramaysaan, oofiya markaad ballantaan, bixiya amaanadiina marka wax la idinku aamino, xubnihiinana ilaashada, indhihiinana laabta iyo gacmihiinaba”[312]

### 31. Qofka sadex gabdhood kafaalo qaatay:

عن أبي سعيد الخدري أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال لا يكون لأحدكم ثلاث بنات أو ثلاث أخوات فيحسن إليهن إلا دخل الجنة

Abi Saciid Al-khudriyy waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) dhahay: ”Ma lahaado midkiin sadex gabdhood (oo uu dhalay) ama sadex gabdhood oo ay walaalo yihiin, oo

---

[311] Axmed: 1664

[312] Axmed: 22144

wanaajiya (hadiiba uu wanaajiyo) wuxuu galayaa jannada”[313]

## 32. Qofka ku samra indho la’aanta:

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

إذا ابتليت عبدي بحبيبتيه فصبر عوضته منهما الجنة يريد عينيه

”hadii aan ku imtixaamo adoonkayga labadiisa uu jecelyahay oo uu ku samro, waxaan ugu badalaa jannada (waxa loo jeeda labada indhood)”[314]

## 33. Akhrinta aayada Kursida:

قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : ( مَنْ قَرَأَ آيَةَ الْكُرْسِيِّ فِي دُبُرِ كُلِّ صَلَاةٍ مَكْتُوبَةٍ لَمْ يَمْنَعْهُ مِنْ دُخُولِ الْجَنَّةِ إِلَّا أَنْ يَمُوتَ )

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Qofkii akhriya aayada kursida salaad kasta oo waajiba gadaasheeda, uma diidayso inuu jannado galo wax aan dhimasho ahayn”[315]

## 34. Akhrinta suuratu Tabaarak (Al-mulk)

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ إِنَّ سُورَةً مِنْ الْقُرْآنِ ثَلَاثُونَ آيَةً شَفَعَتْ لِرَجُلٍ حَتَّى غُفِرَ لَهُ وَهِيَ سُورَةُ تَبَارَكَ الَّذِي بِيَدِهِ الْمُلْكُ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”suurad quraanka kamida ah oo sodon aayadooda ayaa u shafeeco qaaday nin illamaa loo danbi dhaafay, waana suurada tabaaraka alladii biyadihii almulku”[316]

---

[313] Tirmadi: 1912
[314] Bukhaari: 5329
[315] Dabaraani (Alkabiir): 7532
[316] Tirmadi: 2891

## 35. Qofka kulansada afar camal hal maalin

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَنْ أَصْبَحَ مِنْكُمْ الْيَوْمَ صَائِمًا قَالَ أَبُو بَكْرٍ أَنَا قَالَ فَمَنْ تَبِعَ مِنْكُمْ الْيَوْمَ جَنَازَةً قَالَ أَبُو بَكْرٍ أَنَا قَالَ فَمَنْ أَطْعَمَ مِنْكُمْ الْيَوْمَ مِسْكِينًا قَالَ أَبُو بَكْرٍ أَنَا قَالَ فَمَنْ عَادَ مِنْكُمْ الْيَوْمَ مَرِيضًا قَالَ أَبُو بَكْرٍ أَنَا فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَا اجْتَمَعْنَ فِي امْرِئٍ إِلَّا دَخَلَ الْجَنَّةَ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”maanta yaa ku waabariistay isagoo sooman? Abubakar ayaa yiri: aniga. Wuxuu yiri: yaa maanta raacay janaaso? Abubkar ayaa yiri: Aniga. Wuxuu yiri: yaa maanta miskiin quudiyey? Abubakar ayaa yiri: aniga. Wuxuu yiri: yaa maanta soo booqday qof buka? Abubakar ayaa yiri: aniga. Markaasuu dhahay rasuulkii Ilaahay (scw): ”Qofna kuma kulanto arrimaahaasi (hadii ay ku kulantaba) jannada ayuu galaa.”[317]

## 36. Jacaylka nabiga, saxaabadiisa iyo kuwa wanaaga ku raacay:

عن أنس بن مالك أن رجلا سأل النبي صلى الله عليه وسلم متى الساعة يا رسول الله قال ما أعددت لها قال ما أعددت لها من كثير صلاة ولا صوم ولا صدقة ولكني أحب الله ورسوله قال أنت مع من أحببت

Anas ibnu Maalik waxa laga wariyey in nin waydiiyey nabiga (scw): goormay dhacaysaa saacada (Qayaame) rasuulkii Ilaahayow? Wuxuu yiri: ”Maxaad u diyaarsatay?” wuxuu yiri: umaan diyaarsan wax badan oo salaada, soon iyo sadaqo ah, hase ahaatee waxaan jeclahay Ilaahay iyo rasuulkiisa. Wuxuu yiri: ”Adigu cidii aad jeceshahay ayaad la jirtaa”[318]

---

[317] Saxiix Muslim: 1028

[318] Saxiix Muslim: 5819

## 37. Qofka akhriya ducada Sayyidu Al-istiqfaar:

عن شداد بن أوس رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم سيد الاستغفار أن تقول اللهم أنت ربي لا إله إلا أنت خلقتني وأنا عبدك وأنا على عهدك ووعدك ما استطعت أعوذ بك من شر ما صنعت أبوء لك بنعمتك علي وأبوء لك بذنبي فاغفر لي فإنه لا يغفر الذنوب إلا أنت قال ومن قالها من النهار موقنا بها فمات من يومه قبل أن يمسي فهو من أهل الجنة ومن قالها من الليل وهو موقن بها فمات قبل أن يصبح فهو من أهل الجنة

Shadaad ibnu Aws ilaahay raali haka ahaadee waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) "ducada sayidka u ah istiqfaartu waa inaad dhahdo**: (**Ilaahayow waxaad adigu tahay Rabigay, Ilaah xaq lagu caabudaana ma jiro adiga mooyee, waad i abuurtay aniguna adoonkaagiibaan ahay, waxaanan ku suganahay ballantaada iyo axdigaaga intaan awoodo, waxaan (Rabbiyow) kaa magan galayaa sharka aan falo, waxaan kuu qirayaa nicmadaada korkayga ahaatay, waxaan kale oon qirayaa danbigayga ee ii danbi dhaaf, sababtoo ah cid danbi dhaaftaa ma jirto adiga mooyee.) wuxuu yiri: cidii ku ducaysata maalin isagoo yaqiinsan oo dhinta isla maalintaas kahor intaanu galabaysan wuxuu kamid yahay ehelka jannada, cidii tidhaahda habeena isagoo yaqiinsan oo dhinta kahor intaanu waabariisan wuxuu kamida yahay ehelka jannada"[319]

## 38. Todobada Carshiga raxmaanka hadhsanaya:

عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال سبعة يظلهم الله تعالى في ظله يوم لا ظل إلا ظله إمام عدل وشاب نشأ في عبادة الله ورجل قلبه معلق في المساجد ورجلان تحابا في الله اجتمعا عليه وتفرقا عليه ورجل دعته امرأة ذات منصب وجمال فقال إني أخاف الله ورجل تصدق بصدقة فأخفاها حتى لا تعلم شماله ما تنفق يمينه ورجل ذكر الله خاليا ففاضت عيناه

[319] Bukhaari: 5947

Abihurayra waxa laga wariyey ilaahay raali haka ahaadee inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: ”todoba ayaa Ilaahay u hadhinayaa maalinta meel la hadhsado aanay jirin hadhkiisa mooyee, imaam caadila, dhalinyaro ku barbaaray cibaadada Ilaahay, nin qalbigiisu ku xidhanyahay masaajidka, laba nin oo Ilaahay dartii isu jeclaaday kuna kulmay sidaas kuna kala tagay, nin ay gabadh qurux iyo qaayo leh u yeedhatay oo ku yiri: ilaahbaan ka cabsanayaa, nin wax sadaqaystay oo qariyey illamaa bidixdiisu aanay ogaanin waxa midigtiisu ay bixinayso iyo nin Ilaahay xusay oo indhihiisu ooyeen”[320]

### 39. Samofalka Waalidka:

عَنْ عَائِشَةَ ، قَالَتْ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " نِمْتُ فَرَأَيْتُنِي فِي الْجَنَّةِ فَسَمِعْتُ صَوْتَ قَارِئٍ يَقْرَأُ ، فَقُلْتُ : مَنْ هَذَا ؟ " ، فَقَالُوا : هَذَا حَارِثَةُ بْنُ النُّعْمَانِ ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " كَذَلِكَ الْبِرُّ ، كَذَلِكَ الْبِرُّ ، وَكَانَ أَبَرَّ النَّاسِ بِأُمِّهِ " .

Caasha waxa laga wariyey inay tidhi: Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: “Waan seexday oo waxaan isku arkay angoo jooga Jannada, waxaan maqlay cod quraan akhrinaya, waxaan idhi: waa kuma? Waxay dhaheen: waa Xaarith binu Nucmaan, rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: “Waa taas baarinimado, waa taas baarinimado, wuxuuna ahaa dadka ka ugu baarisan hooyadii”[321]

### 40. Ardayga baranaya cilmiga

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

ومن سلك طريقا يلتمس فيه علما سهل الله له به طريقا إلى الجنة

[320] Saxiix Muslim: 1712
[321] Musnadu Axmed: 1332

”Qofkii raaca jid uu ku raadsanayo cilmi waxa Ilaahay u fududeeyaa jidkii jannada”[322]

## 41. Gabadha jacaylka iyo dhalmada badan

Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

ألا أخبركم بنسائكم من أهل الجنة ؟ " ، قالوا : بلى يا رسول الله ، قال : " الودود الولود التي إن ظلمت أو ظلمت قالت : هذه ناصيتي بيدك ، لا أذوق غمضا حتى ترضى " .

”Ma idiinka warramaa xaasaskiina ehelka jannada? Waxay dhaheen: haa, rasuulkii Ilaahayow. Wuxuu yiri: waa gabadha ninkeeda jecel ee dhalmada badan ee hadii ay wax dulmido ama ayada la dulmiyo tidhaahda: waa tan foodaydii, mana isku keenayo il iyo baal intaad raali ka noqonayso”[323]

## 42. Qofka ka tagay beenta iyo ka wanaajiyey akhlaaqdiisa

عن أنس بن مالك قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم من ترك الكذب وهو باطل بني له في ربض الجنة ومن ترك المراء وهو محق بني له في وسطها ومن حسن خلقه بني له في أعلاها

Anas ibnu Maalik waxa lagasoo wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: ”Qofkii ka taga beenta baadilka waxa loo dhisaa guri ku yaala jannada hareerteeda (guri hoose), qofkii ka taga istusnimada isagoo xaq sheegaya waxa loo dhisaa guri ku yaala jannada badhtankeeda, qofkii

---

[322] Muslim: 2699

[323] Dabaraani (Alkabiir): 307

waanaajiya akhlaaqdiisana waxa looga dhisaa guryaha sare"[324]

## 43. Ilmaha kaa saqiiray ood ku samirto

عَنْ أَبِي مُوسَى الأَشْعَرِيِّ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ : " إِذَا مَاتَ وَلَدُ الْعَبْدِ قَالَ اللَّهُ لِمَلائِكَتِهِ قَبَضْتُمْ وَلَدَ عَبْدِي فَيَقُولُونَ نَعَمْ فَيَقُولُ قَبَضْتُمْ ثَمَرَةَ فُؤَادِهِ فَيَقُولُونَ نَعَمْ فَيَقُولُ مَاذَا قَالَ عَبْدِي فَيَقُولُونَ حَمِدَكَ وَاسْتَرْجَعَ فَيَقُولُ اللَّهُ : " ابْنُوا لِعَبْدِي بَيْتًا فِي الْجَنَّةِ وَسَمُّوهُ بَيْتَ الْحَمْدِ "

Abi Muuse Al-ashcari waxa laga wariyey in rasuulkii Ilaahay (scw) yiri: "Hadii adoonka ilmo ka dhinto, Ilaahay wuxuu ku dhahaa malaa'iktiisa: miyaad oofsateen adoonkayga ilmihiisii? Waxay leeyihiin: haa. Wuxuu dhahayaa: miyaad oofsateen qalbigiisii? Waxay dhahayaan: haa. Wuxuu leeyahay: muxuu adoonkaygu yiri? Waxay dhahayaan: wuu ku mahadceliyey, waanu kuusoo laabtay, waxa Ilaahay dhahayaa: "Uga dhisa adoonkayga guri jannada, una bixiya guriga mahadnaqa"[325]

## 44. Ilaahay dartii in la isu siyaarto:

عن أبي هريرة عن النبي صلى الله عليه وسلم أن رجلا زار أخا له في قرية أخرى فأرصد الله له على مدرجته ملكا فلما أتى عليه قال أين تريد قال أريد أخا لي في هذه القرية قال هل لك عليه من نعمة تربها قال لا غير أني أحببته في الله عز وجل قال فإني رسول الله إليك بأن الله قد أحبك كما أحببته فيه

Abihurayra waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw): in nin ku booqday walaalkii magaalo kale, Ilaahayna wuxuu fadhiisiyey jidkiisii malag, markuu u yimidna wuxuu ku yiri: xagaad ku socotaa? Wuxuu yiri: waxaan aadayaa walaal aan ku leeyahay magaaladan. Wuxuu yiri: oo ma

[324] Tirmadi: 1993

[325] Tirmadi: 942

abaal ayaad u gudaysaa? Wuxuu yiri: maya, ee kaliya Ilaahay dartii ayaan u jeclaaday. Wuxuu yiri (malagii): aniga, Ilaahay ayaa ii kaasoo diray, Ilaahayna wuu ku jeclaaday sidaad u jeclaatay"[326]

### 45. In diinta lagu toosnaado:

Ilaahay (swt) wuxuu yiri:

إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّـهُ ثُمَّ اسْتَقَامُوا فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿١٣﴾ أُولَـٰئِكَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ خَالِدِينَ فِيهَا جَزَاءً بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٤﴾

"kuwa dhahay rabbigayo waaa Allah ee ku toosnaaday, korkooda ma saarno cabsi mana murugoonayaan (11) Kuwaasina waa asxaabta jannada ee ku waaraya dhexdeeda wixii ay camal faleen ayadoo laga abaalmarinayo (12)"[327]

### 46. Kuwa cadhadooda qarsada ee dadkana cafiya:

Ilaahay (swt) wuxuu leeyahay:

وَالْكَاظِمِينَ الْغَيْظَ وَالْعَافِينَ عَنِ النَّاسِ ۗ وَاللَّـهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ ﴿١٣٤﴾

"kuwa cadhadooda qarsada ee cafiya dadka, ilaahayna wuu jecelyahay samofalayaasha (134)"[328]

Samo-falayaashii dadka cafiyey ee cadhadoodana qarsaday waxa loogu ballanqaaday jannada, wuxuu Ilaahay leeyahay:

لِّلَّذِينَ أَحْسَنُوا الْحُسْنَىٰ وَزِيَادَةٌ ۖ

"Kuwa samaha falay waxay mudan janno iyo dheeraad (aragga rabbi)"[329]

---

[326] Muslim: 2567
[327] Suuratu Al-axqaaf: 13,14
[328] Suuratu Al-Cimraan: 134
[329] Suuratu Yuunus: 26

## 47. Sharciga Ilaahay oo la fuliyo

Rabbi wuxuu ku leeyahay Quraankiisa:

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ الْكِتَابِ آمَنُوا وَاتَّقَوْا لَكَفَّرْنَا عَنْهُمْ سَيِّئَاتِهِمْ وَلَأَدْخَلْنَاهُمْ جَنَّاتِ النَّعِيمِ ﴿٦٥﴾

"Hadii ehelu kitaabku (yahuuda iyo nasaarada) rumayn lahaayeen oo Alle ka cabsina la iman lahaayeen waxaan u dhaafi lahayn xumaanahooda, waxaan galin lahayn jannooyinkii nicmaysnaa (65)"[330]

## 48. Ruuxa toobad keena:

Ilaahay wuxuu yiri:

إِلَّا مَن تَابَ وَآمَنَ وَعَمِلَ عَمَلًا صَالِحًا فَأُولَـٰئِكَ يُبَدِّلُ اللَّـهُ سَيِّئَاتِهِمْ حَسَنَاتٍ ۗ وَكَانَ اللَّـهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٧٠﴾

"Marka laga reebo qofkii toobad keena ee (la yimaada) iimaan iyo camal saalixa, kuwaas waxa Ilaahay xumaanahoodii ugu badalayaa wanaag, Ilaahayna waa danbi dhaaf badane naxariista (70)"[331]

---

[330] Suuratu Al-Maa'idah: 65

[331] Suuratu Al-Furqaan: 70

## Sideen u toobad keenaa?

Marka hore ogsoonow in qof kasta oo bani aadama ay ka dhacayso danbiyo iyo gafafba, ku yar iyo ku waynba. Rasuulkii Ilaahay (scw) waxa laga wariyey:

عَنْ أَنَسٍ أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ كُلُّ ابْنِ آدَمَ خَطَّاءٌ وَخَيْرُ الْخَطَّائِينَ التَّوَّابُونَ

Anas waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu yiri: "Ibnu Aadam kasta wuu danbaaba, kuwa danbaabana waxa ugu khayr badan kuwa toobad keena"[332]

Mar walba waxa inaga dhacaya danbi, sidaa darteed ayaa Ilaahay ina faray inaan isaga waydiisano danbi dhaaf markasta iyo naxariis.

### Shuruudaha Toobada:

Toobadu waxay u baahantahay dhawr shuruudood oo la rabo inaad la timaado, si toobadaadu u noqoto tawbadii nasuuxa ahayd:

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا تُوبُوا إِلَى اللَّهِ تَوْبَةً نَّصُوحًا

"Kuwa Ilaahay rumeeyow u toobad keena Ilaahay tawbad nasuuxa (run ah oo go'aan la socdo)"[333]

Tawbada nasuuxa ah waxay leedahay dhawr shuruudoo oo culumadu ay ka qaateen aayadaha quraanka iyo sunnada nabiga, waxayna kala yihiin:

- Inaad danbigii joojiso, hadii adigoo danbigii ku gudo jira aad afka ka tidhaahdo (astaqfiru Allah) oo aanad

[332] Tirmadi: 2499

[333] Suuratu Taxriim: 8

joojinin danbigii, ma noqonayso toobadii nasuuxa ahayd. Sidaa darteed ayuu Ilaahay leeyahay:

وَأَنِ اسْتَغْفِرُوا رَبَّكُمْ ثُمَّ تُوبُوا إِلَيْهِ

"Danbi dhaaf waydiista rabbigiin oo isaga u toobad keena"[334]

Markaad istiqfaarta la timaado ee aad toobad keento, ku soco toobadaada oo haku noqonin danbigii.

- Inaad go'aansato inaanad dib ugu laabanin danbigii.
- Inaad ka shallayso ama aad ka murugooto danbigii. Murugaduna waa tiirka ugu wayn ee toobadu leedahay, sababtoo ah waxay koobsanaysaa in la joojiyo danbigii iyo in la go'aansado inaan dib loogu noqonin xumaantii. Rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri:

"النَّدَمُ تَوْبَةٌ"

"Shallayntu (murugadu) waa Tawbada"[335]

Hadii qofku ku faraxsanyahay danbigii oo markuu soo xasuustaba uu ku raaxaysanayo, qofkaa tawbadiisii uma dhamaystirna, waxa ka maqan tiirkii ugu waynaa toobada oo ah inuu ka shalleeyo xumaantii ka dhacday.

- In wixii xaq aadamuhu lahaayeen loo celiyo, sida nin guri xaaraan ku bililiqaystay waa inuu u celiyaa cidii gurigaa lahayd. Dadkii lahaa hadii ay dhinteen waxa

[334] Suuratu Huud: 3
[335] Axmed: 4012

loo celinayaa dadka dhaxalkiisa leh. Hadii aan la garanayn qofkii guriga lahaa, waa loo sadaqaynayaa.

## In la toobad keeno sida ugu dhakhsaha badan:

Ilaahay wuxuu Quraankiisa ku yiri:

إِنَّمَا التَّوْبَةُ عَلَى اللَّـهِ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ السُّوءَ بِجَهَالَةٍ ثُمَّ يَتُوبُونَ مِن قَرِيبٍ فَأُولَـٰئِكَ يَتُوبُ اللَّـهُ عَلَيْهِمْ ۗ وَكَانَ اللَّـهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١٧﴾

"Tawbadu waxay Ilaahay uga ahaatay (ilaahay ka aqbalayaa) kuwa xumaanta la imanaya ayagoo jaahil ah (ciqaabka Ilaahay ka jaahila) markaana toobad keena waqti dhow (kahor intaanu dhiman) kuwaa Ilaahay wuu ka toobad aqbalayaa, Ilaahayna waa Alle cilmi iyo xikmad badan"[336]

Qofka muslimka ah waa inuu toobad keenaa kahor intaanu dhimanin ama cadceedu galbeed kasoo bixin. Xilligaas waxa la xidhayaa albaabka toobada, ruuxii toobad keenana waxba uma qabanayso tawbadii, sidoo kale ruuxii isagoon toobad keenin dhintay lagama aqbalayo tawbadaas dhimashada kadib.

Sidaa darteed, waa muhiim in la toobad keeno sida ugu dhakhsaha badan. Waxa Ilaahay mahaddiiya inaad haysato mudo gaadhaysa lix saacadood kahor intaanu malagu kugu qorin danbigii aad la timid, hadii lixdaa saacadood kahor aad toobad keento waxa laguu qorayaa xasanaad iyo wanaagyo.

عَنْ أَبِي أُمَامَةَ ، عَنْ رَسُولِ اللَّهِ – صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ – قَالَ : " إِنَّ صَاحِبَ الشِّمَالِ لِيَرْفَعُ الْقَلَمَ سِتَّ سَاعَاتٍ عَنِ الْعَبْدِ الْمُسْلِمِ الْمُخْطِئِ أَوِ الْمُسِيءِ ، فَإِنْ نَدِمَ وَاسْتَغْفَرَ اللَّهَ مِنْهَا أَلْقَاهَا ، وَإِلَّا كُتِبَتْ وَاحِدَةً .[337] والحديث حسنه الشيخ الألباني في صحيح الجامع الصغير, وأورده ضمن السلسلة الصحيحة.

---

[336] Suuratu Nisaa: 17

[337] Dabaraani (Alkabiir): 7765

Abi Umaama waxa laga wariyey (Ilaahay raali haka ahaadee) inuu kasoo wariyey rasuulkii Ilaahay (scw) inuu yiri: ”Saaxiibka bidixda (Malagu) wuxuu qalinkiisa sare uga qaadayaa lix saacadood adoonka muslimka ee danbaabay ama gafay, hadii uu ka shalleeyo oo Ilaahay uu danbi dhaaf waydiisto wuu tuurayaa, hadii kalena waxa la qorayaa hal (danbi).[338]

## Qaabka aad u toobad keenayso:

Marka danbi kaa dhaco waa inaad qirataa danbigii aad gashay iyo inaad naftaada ku gardarrootay, kadibna Ilaahay u tuko laba rakcadood oo aad qalbigaaga soo xaadirinayso adigoon arrimo aduunyo ugu sheekaynayn, kadibna Ilaahay waydiiso danbi dhaaf. Nabigii Ilaahay (scw) waxa lagasoo wariyey inuu yiri:

" مَا مِنْ رَجُلٍ يُذْنِبُ ذَنْبًا ثُمَّ يَقُومُ فَيَتَطَهَّرُ ثُمَّ يُصَلِّي ثُمَّ يَسْتَغْفِرُ اللَّهَ إِلَّا غَفَرَ اللَّهُ لَهُ” ثُمَّ قَرَأَ هَذِهِ الْآيَةَ “وَالَّذِينَ إِذَا فَعَلُوا فَاحِشَةً أَوْ ظَلَمُوا أَنْفُسَهُمْ ذَكَرُوا اللَّهَ فَاسْتَغْفَرُوا لِذُنُوبِهِمْ وَمَنْ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ إِلا اللَّهُ وَلَمْ يُصِرُّوا عَلَى مَا فَعَلُوا وَهُمْ يَعْلَمُونَ” سورة آل عمران آية 135

“Majiro nin danbaabay (haduu jiraba) oo uu kaco, isna daahiriyo (wayso qaata) oo tukada markaana Ilaahay waydiista danbi dhaaf, Ilaahay wuu u danbi dhaafaa” wuxuuna akhriyey (nabigu) aayadan: “Kuwa sameeyey faaxishada ama naftooda dulmiyey ee xasuustay Ilaahay oo waydiistay inuu dhaafo danbigooda, oo yaa dhaafa

[338] [Mucjamka Wayn ee Dabaraani: 7765 ] Xadiiskana waxa taxsiiniyey Albaani [Saxiixu Aljaamic: xadiiska lanbarkiisu yahay 2097 ]

danbiyada cidaan Ilaahay ahayn, oo aan ku adkaysanin wixii ay sameeyeyen ayagoo ogsoon"[339] [340]

## Sifiican u wayso qaado:

Kahor intaanad tukanin labada rakcadood, ku dadaal inaad si wanaagsan u wayso qaadato, si danbiyadaadu u raacaan biyaha waysada. Waxa rasuulkii Ilaahay (scw) laga wariyey:

عَنْ عُثْمَانَ بْنِ عَفَّانَ قَالَ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ "مَنْ تَوَضَّأَ فَأَحْسَنَ الْوُضُوءَ خَرَجَتْ خَطَايَاهُ مِنْ جَسَدِهِ حَتَّى تَخْرُجَ مِنْ تَحْتِ أَظْفَارِهِ".

Cusmaan ibnu Caffaan waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: "qofkii wayso qaata ee wanaajiya waysada, waxa danbiyadiisu ka baxaan jidhkiisa illamaa ay ka baxaan cidiyihiisa hoostooda"[341]

## Camal wanaagsan ka danbaysii xumaantii:

Ruuxa toobadiisu ay ka runtahay wuxuu xumaantii booskeedii ku badalaa wanaag, danbigiina wuxuu ka danbaysiiya camalo wanaagsan. Ilaahay wuxuu yiri:

إِنَّ الْحَسَنَاتِ يُذْهِبْنَ السَّيِّئَاتِ ۚ

"Xasanaadku waxay tirtiraan xumaanhihii"[342]

Sidoo kale rasuulkii Ilaahay (scw) waxa lagasoo wariyey inuu yiri:

اتق الله حيثما كنت وأتبع السيئة الحسنة تمحها وخالق الناس بخلق حسن

[339] Tirmadi: 371
[340] Suuratu Al-Cimaraan: 135
[341] Muslim: 245
[342] Suuratu Huud: 114

“Ilaahay ka cabso meel kasta oo aad joogto, xumaantana raaci wanaag way tirtiraysaaye, dadkana kula dhaqan akhlaaq wanaagsan”[343]

Sidoo kale Ilaahay waxa quraankiisa inoogu cadeeyey in marka la toobad keeno la raaciyo iimaan iyo camal saalixa si Ilaahay xumaanihii kaa dhacay uu booskoodii kuugu badalo wanaagyo.

Subxaana Allah, waxaad qiyaastaa ruuxii khamriga cabay ama sinaystay ama daroogo isticmaalay ee toobada keenay waxa meeshii danbiga wayn ku qornaa lagu badalayaa wanaag iyo xasanaad. Ilaahay wuxuu yiri:

إِلَّا مَن تَابَ وَآمَنَ وَعَمِلَ عَمَلًا صَالِحًا فَأُولَـٰئِكَ يُبَدِّلُ اللَّـهُ سَيِّئَاتِهِمْ حَسَنَاتٍ ۗ وَكَانَ اللَّـهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٧٠﴾

“Marka laga reebo qofkii toobad keena ee (la yimaada) iimaan iyo camal saalixa, kuwaas waxa Ilaahay xumaanahoodi ugu badalayaa wanaag, Ilaahayna waa danbi dhaaf badane naxariista (70)”[344]

## Ogsoonow, Ilaahay naxariistu way balaadhantahay:

Naxariista Ilaahay way balaadhantahay, waanu kuu dhaafayaa danbigaaga intuu doono xajmigiisu hala ekaado. Hadii dhulka xajmigiisa oo danbiyo ah aad la timaado oo aad usoo noqoto xaga Ilaahay, rabbiga wayn wuu kuu dhaafayaa danbigaagii, Ilaahay wuxuu yiri:

وَرَحْمَتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ ۚ فَسَأَكْتُبُهَا لِلَّذِينَ يَتَّقُونَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَالَّذِينَ هُم بِآيَاتِنَا يُؤْمِنُونَ (156)

---

[343] Tirmadi: 1987

[344] Suuratu Al-Furqaan: 70

“Naxariistaydu waxay u waasac noqotay shay kasta, waxaanan u qorayaa kuwa taqwada la yimaada ee bixiya zakada ee aayaadkayga rumaynaya (156)”[345]

Sidoo kale Rabbi wuxuu yiri:

وَإِذَا جَاءَكَ الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِآيَاتِنَا فَقُلْ سَلَامٌ عَلَيْكُمْ ۖ كَتَبَ رَبُّكُمْ عَلَىٰ نَفْسِهِ الرَّحْمَةَ ۖ أَنَّهُ مَنْ عَمِلَ مِنكُمْ سُوءًا بِجَهَالَةٍ ثُمَّ تَابَ مِن بَعْدِهِ وَأَصْلَحَ فَأَنَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ (54)

“Markay kuu yimaadaan kuwa rumaynaya aayaadkayga waxaad ku dhahdaa nabadgalyo korkiina ha ahaato, waxa rabbigiin naftiisa ku waajibiyey naxariis (inuu u naxariisto) kuwa idinka mida ee la imanaya xumaan ayagoo jaahila markaana toobad keenaya (danbigii) kadib ee hagaagsanaada isagu waa u danbidhaaf badanyahay waanu u naxariisan (54)”[346]

Rasuulkii Ilaahay (scw) waxa isagana laga wariyey:

عن أبي ذر قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول الله عز وجل من جاء بالحسنة فله عشر أمثالها وأزيد ومن جاء بالسيئة فجزاؤه سيئة مثلها أو أغفر ومن تقرب مني شبرا تقربت منه ذراعا ومن تقرب مني ذراعا تقربت منه باعا ومن أتاني يمشي أتيته هرولة ومن لقيني بقراب الأرض خطيئة لا يشرك بي شيئا لقيته بمثلها مغفرة

Abi Darr waxa laga wariyey inuu yiri: rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: “Ilaaha sharafta iyo waynidu u sugnaatay wuxuu leeyahay: qofkii wanaag la yimaadaa wuxuu mudan toban lamida waanan u kordhin, qofkii xumaan la yimaadaana waxa lagu abaal marin hal xumaan oo lamida ama waan u dhaafi, cidii iisoo dowaata hal taako waxaan u dhowaada diraac (dhudhdun), cidii diraac iisoo dhowaata waxaan u dhowaada baac, cidii socod iigu timaada waxaan ugu tagaa

[345] Suuratu Al-acraaf: 156
[346] Suuratu Al-Ancaam: 54

guclayn (orod), qofkii ila kulma isagoo (xanbaarsan) dhulka oo danbiya oo aan shirki iila imanin waxaan kula kulmaa mid (dhulka) la eeg oo danbi dhaafa”[347]

## Malo fiican ka filo Rabbigaa:

Ruuxa muslimka ah waa inuu Rabbigii ka malaysto malo fiicn, sababtoo ah qof kasta wuxuu rabbigii kula kulmayaa malihiisa. Qofkii malo fiican ka malaystay wax fiican ayuu kala kulmi, kii malo xun ka filanayayna wuu la kulmi malihii xumaa ee uu rabbigii ka malaystay.

عن أبي هريرة رضي الله عنه قال قال النبي صلى الله عليه وسلم يقول الله تعالى أنا عند ظن عبدي بي وأنا معه إذا ذكرني فإن ذكرني في نفسه ذكرته في نفسي وإن ذكرني في ملإ ذكرته في ملإ خير منهم وإن تقرب إلي بشبر تقربت إليه ذراعا وإن تقرب إلي ذراعا تقربت إليه باعا وإن أتاني يمشي أتيته هرولة

Abihurayra Ilaahay raali haka ahaadee waxa laga wariyey inuu yiri: nabigu (scw) wuxuu yiri: “Ilaaha sarreeya wuxuu leeyahay: anigu malaha adoonkayga ayaan ahaaday, waanan la jiraa markuu i xusayo, haduu naftiisa igu xuso anigu naftaydaan ku xusaa (ku amaana), haduu meel dad joogaan igu xuso waxaan ku xusaa (ku amaanaa) meel koox ka khayr badan joogto, haduu taako iisoo dhowaado waxaan u dhowaadaa dhudhun, haduu dhudhun iisoo dhowaadana baac ayaan u dhowaadaa, haduu socod iigu yimaadana guclayn ayaan ugu tagaa”[348]

## Ha quusanin waligaa:

In laga quusto naxariista Ilaahay waa astaanta iyo sumadaha lagu yaqaano dadka gaalada ah. Shaydaanku wuxuu isku dayayayaa inuu ku gaadhsiiyo heerka ah inaad ka quusato naxariista Rabbi, kadibna aad xalaashato

---

[347] Muslim: 2687

[348] Bukhaari: 6970

danbigii oo aad sidaa ku gaalowdo, iska ilaali tallaabooyinka shaydaanka. Ilaahay isagoo inooga warramaya nabi Ibraahiim ayuu yiri:

قَالَ وَمَن يَقْنَطُ مِن رَّحْمَةِ رَبِّهِ إِلَّا الضَّالُّونَ (56)

“Wuxuu yiri (Ibraahiim) oo yaa ka quusta naxariista rabbigii kuwa baadiyoobay mooyee (56)”[349]

Sidoo kale rabbi isagoo inooga warramaya nabi Yacquub (scw) wuxuu yiri:

يَا بَنِيَّ اذْهَبُوا فَتَحَسَّسُوا مِن يُوسُفَ وَأَخِيهِ وَلَا تَيْأَسُوا مِن رَّوْحِ اللَّهِ ۖ إِنَّهُ لَا يَيْأَسُ مِن رَّوْحِ اللَّهِ إِلَّا الْقَوْمُ الْكَافِرُونَ (87)

“Ubadkaygiiyow taga oo raadiya Yuusuf iyo walaalkii hana ka quusanin naxariista Ilaahay, kamana quusto naxariista Ilaahay qoom gaalo ah mooyee (87)”[350]

## Hadii danbigii kaa dhaco mar kale:

Hadii shaydaanka iyo naftaadu kaa adkaadaan mar kale oo aad ku dhacdo isla danbigii ama mid kaleba, ku celi toobada oo Ilaahay usoo laabo sababtoo ah Ilaah kale malihid oo toobada kaa aqbalaya.

Iska ilaali shaydaanku inuu ku dhaho: hadda kahor ayaad toobad keentay waanad ku laabatay danbigii, waxna toobadu kuuma tarayso ee danbiga iskaga jir, sidaasbaa Ilaahay kuu qoraye!!

349 Suuratu Al-Xijri: 56
350 Suuratu Yuusuf: 87

Arrintaasi waa tallaabooyinka shaydaanka ee la ina faray inaynaan raacin, marka hore intuu danbiga ku galiyo ayuu haddana kaa quusinayaa naxariista Ilaahay.

Waa inaad shaydaanka ku dhahdaa: malcuunbaad tahay! Rabbigay toobada wuu aqbalayaa, naxariistiisuna way ballaadhantahay, albaabka toobaduna wuu ii furanyahay, Ilaahayna wuu i jeclyahay waanan u toobad keenayaa oo ku laabanayaa xaga Rabbigayga Sharafta leh.

Midna ogsoonow, qofka toobada badan ee mar kasta kasoo laabta danbigii uu galay, Ilaahay wuu jecelyahay ruuxaas. Rabbi wuxuu yiri:

إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ التَّوَّابِينَ وَيُحِبُّ الْمُتَطَهِّرِينَ (222)

”Ilaahay wuu jecelyahay kuwa [351]

Dabcan qofka toobad keenka badan waa qof danbigiisu badanyahay, hase ahaatee rabbigii usoo laabanaya oo aan ka daalaynin inuu rabbigii waydiisto danbi dhaaf. Rasuulkii Ilaahay (scw) waxa laga wariyey:

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنْ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِيمَا يَحْكِي عَنْ رَبِّهِ عَزَّ وَجَلَّ قَالَ أَذْنَبَ عَبْدٌ ذَنْبًا فَقَالَ اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى أَذْنَبَ عَبْدِي ذَنْبًا فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ ثُمَّ عَادَ فَأَذْنَبَ فَقَالَ أَيْ رَبِّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى عَبْدِي أَذْنَبَ ذَنْبًا فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ ثُمَّ عَادَ فَأَذْنَبَ فَقَالَ أَيْ رَبِّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى أَذْنَبَ عَبْدِي ذَنْبًا فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ اعْمَلْ مَا شِئْتَ فَقَدْ غَفَرْتُ لَكَ

Abihurayra waxa laga wariyey inuu kasoo wariyey nabiga (scw) inuu ka sheekeeyey rabbigiisa sharafta iyo waynida iska leh wuxuuna yiri: ”Adoon ayaa danbaabay markaasuu yiri: Ilaahow danbigayga ii dhaaf, markaasuu Rabbiga

[351] Suuratu Al-Baqarah: 222

barakada badan dhahay: adoonkaygii wuu danbaabay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay rabbi u dhaafaya danbigii kana joojinaya danbiga, haddana wuu ku laabtay oo wuu danbaabay wuxuuna yiri: Ilaahow danbigayga ii dhaaf, markaasuu Rabbiga barakada badan dhahay: adoonkaygii wuu danbaabay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay rabbi u dhaafaya danbigii kana joojinaya danbiga, haddana wuu ku laabtay oo wuu danbaabay wuxuuna yiri: Ilaahow danbigayga ii dhaaf, markaasuu Rabbiga barakada badan dhahay: adoonkaygii wuu danbaabay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay rabbi u dhaafaya danbiga kana joojinaya danbigii. Waxaad doonto samee waan kuu danbi dhaafay."[352]

Maadaama aad markasta oo aad danbaabto aad u toobad keenayso Rabbi subxaanahu wa tacaala, wuu kuu dhaafayaa danbigii.

## Waxyaalaha kaa caawinaya inaad toobad keento:

- Inaad la timaado ikhlaas oo aad Ilaahay dartii u toobad keento. Hadii danbiga aad u joojisay adigoo awood u waayay: tusaale; ninbaa cabida khamriga iska daayey markuu heli waayay lacag uu kusoo gato, ninkaasi muu toobad keenin.

- Camalo saalixa inaad badsato si ay u tirtiraan xumaanihii iyo si miisaanka Qayaamada wanaagaagu uga cuslaado xumaanaha.

- Inaad dareento foolxumada danbiga iyo ciqaabkiisa aduun iyo aakhiro.

[352] Bukhaari: 7068 iyo Muslim: 2758

- Inaad ka fogaato meelaha danbiga kuu horseedaya, sida marfashyada qaadka, kalaabyada lagu tunto, meelaha dadka lagu xanto, qolka madow ee kalida aad ku tahay.
- Inaad yeelato saaxiibo wanaagsan oo kugu kaalmeeya wanaaga.
- Inaad badsato ducada iyo xuska ilaahay.
- In waqtiga firaaqada ah ee danbiyadu kaa dhacaan inaad ku mashquusho wax ku anfacaya aduun iyo aakhiro.

## Furaha Ereyada lasoo gaabiyey:

| Ereray lasoo gaabiyey | Ereygii oo dhamaystiran |
|---|---|
| (scw) | Waxa lagasoo gaabiyey salla Allahu calayhi wa sallam, macnaheeduna waa nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaato nabiga. |
| (Rc) | Waxa lagasoo gaabiyey Radiya Allahu canhu ama canhaa. Macnaheeduna waa Ilaahay raali haka ahaado saxaabigan ama saxaabiyadan. |
| (swt) | Subxaana wa tacaala, macnaheeduna waa Ilaaha ka nasahan xumaanta iyo nuqsaanta. |
| (AHU) | Alle ha u naxariisto. |

WA BILLAAHI TAWFIIQ

## Tusmo


Gogoldhig ........................................................................ 2

HIBEYN ........................................................................ 4

Jannada Raxmaanka ........................................................................ 5

Waynida Jannada ........................................................................ 6

Farqiga u dhaxeeya Dhaldhalaaka Aduunka iyo Raaxada Aakhiro ........................................................................ 8

Qaar kamida waxyaalaha ay ku kala duwanyihiin aduunyada iyo jannadu ........................................................................ 10

Dadkii u xiisooday Jannada Raxmaanka ........................................................................ 11

Cumayr ibnu Alxamaam (Rc) ........................................................................ 11

Thaabit ibnu Qays ........................................................................ 11

Bilaal ibnu Rawaaxa ........................................................................ 12

Jacfar ibnu Abudaalib ........................................................................ 13

Camru ibnu Jamuux (Rc) ........................................................................ 14

Anas ibnu Nadhar ........................................................................ 14

Xaraam ibnu Malxaan ........................................................................ 15

Caamir ibnu Fahiira ........................................................................ 15

Sacad ibnu Khaythamah ibnu Xaarith ........................................................................ 15

Mucaad ibnu Jabal ........................................................................ 16

Cusmaan ibnu Cafaan ........................................................................ 16

Cumar ibnu Khadaab ........................................................................ 17

Xandalah ibnu Caamir ........................................................................ 17

Julaybiib ..................................................................17
Raggii loogu bishaareeyey Jannada: ........................................18
Tobanka saxaabi ee hal mar loogu bishaareeyey ..................18
Sacad ibnu Mucaad .........................................................19
Bilaal ibnu Rabaax ..........................................................19
Zayid ibnu Camru ibnu Nufayl.............................................20
Xaaritha ibnu Nucmaan ......................................................20
Waraqa ibnu Noofal.........................................................21
Zayid ibnu Xaaritha .........................................................21
Abudaxdaax.....................................................................22
Jacfar ibnu Abudaalib........................................................23
Cabdilaahi ibnu Salaam.....................................................23
Cukaasha ibnu Muxsin ......................................................23
Cumayr ibnu Xamaam........................................................24
Thaabit ibnu Qays: ..........................................................24
Ninkii Ilaahay runta u sheegay Ilaahayna u rumeeyey ..........25
Ninkii reer baadiyaha ahaa ee faralka ilaaliyey .....................26
Ninkii jeclaaday suuratu al-ikhlaas:.......................................26
Ninkii qalbigiisu wanaagsanaa ..............................................27
Ninkii shaqo yar qabtay ee ajar wayn loogu abaal guday......28
Maaciz ibnu Maalik ..........................................................28
Ninkii madoobaa ee Jannada ku guulaystay ..........................30
Cabdilaahi ibnu Camru ibnu Xaraam: ...................................30
Xaadib ibnu Abi Baltaca .....................................................31
Haweenkii Jannada loogu bishaareeyey ...................................32
Khadiija bintu Khuweylid .....................................................32

Caasha bintu Abibakar ........................................................32
Faadima bintu Muxamed ......................................................32
Umu Suleym Alqumaysaa (hooyadii Anas ibnu Maalik) ........33
Haweenaydii suuxi jirtay Saciira Al-asadiya, ama Umu Zufar 34
Miskiinadii timirta ukala jeexday labadeedii hablood ...........34
Haweenaydii wanaajisay jiiraankeeda ..................................35
Umu Ayman, Barka Alxabashiyah .........................................35
Umu Camaara .......................................................................35
Sumaya bintu Khayaad..........................................................36
Umu Xaraam bintu Malxaan .................................................36
Xafsa bintu Cumar ...............................................................37
Asma bintu Abibakar............................................................37
Faadima bintu Asad: (Cali ibnu Abidaalib hooyadii): .............38
Rubayac bintu Mucawad .....................................................38
Kabshah bintu Raafic: (Sacad ibnu Mucaad hooyadii)...........38
Zaynab bintu Jaxsh ..............................................................39
Jannadu miyey abuurantahay iminka mise waa la abuuri doonaa? ..........................................................................40
Daliilada ku tusinaya jiritaanka Jannada: ..............................41
Daliilka 1aad:.......................................................................41
Daliilka 2aad:.......................................................................41
Daliilka 3aad:.......................................................................42
Daliilka 4aad:.......................................................................42
Daliilka 5aad:.......................................................................42
Nabi Aadam jannadii lagu abuuray xagay ku taalay? ................43
Daliilka 1aad:.......................................................................44

Daliilka 2aad:....................................................................44
Daliilka 3aad:....................................................................45
Daliilka 4aad:....................................................................45
Daliilka 5aad:....................................................................46
Daliilka 6aad:....................................................................46
Noocyada Jannada:.............................................................48
Noocyada Jannada:........................................................48
Sifada labada Janno ee hore:.........................................49
Sifada labada Janno ee danbe: ......................................50
Natiijada isbarbardhiga:...............................................53
Magacyada Jannada iyo macnahooda:..................................55
Jannah (الجنة): ...........................................................55
Daaru Salaam (دار السلام):..............................................55
Daarta lagu waarayo:......................................................56
Daaru Almuqaam (دار المقام):..........................................57
Jannatu Al-ma’waa (جنة المأوى): .....................................57
Jannatu Cadan (جنة عدن): ..............................................57
Daaru al-xayawaan (دار الحيوان):.....................................58
Jannaatu Naciim (جناة النعيم):.........................................58
Firdawsa (الْفِرْدَوْسَ)...............................................................58
Almaqaam al-amiin: (مقام أمين): .....................................58
Maqacadi Sidqi (مَقْعَدِ صِدْقٍ):...........................................59
Albaabada Jannada iyo dadka galaya: ..................................60
Albaabka Jannadu siduu u eegyahay? ............................61
Waynida albaabadeeda ..................................................61
Alabaabada jannada waxa la furaa Isniinta iyo Khamiista:....62

Jannada waxa la furaa bisha barakaysan ee Ramadaan: .......63
Albaabada Jannadu waxa kamida: .......................................64
Albaabka Rayaan: .........................................................64
Albaabka dadka aan la xisaabinayn: ................................65
Dadka looga yeedhayo sideeda albaab ee Jannada: .................65
Ehelka Sadaqada: ...............................................................65
Waysada: ..........................................................................66
Ilmaha saqiiray: .................................................................67
Tawxiidka: .........................................................................67
Gabadha wanaagsan: ..........................................................68
Albaabada la mooganyahay ku dadaal: ................................68
Albaabada Jannada iyo malaa'ikta khasnadooda haya: ........68
Waa tuma ummada u horeysa ee jannada galaysa? ............69
Waa tuma ummada ugu tirada badan jannada? ...................70
Dadka ugu horreeya ee jannada galaya: ...............................71
Masaakiinta ayaa ugu badan dadka jannada galaya .............72
Sifada dadka galaya Jannada: ..............................................74
Soo dhoweynta ehelka Jannada: ..........................................76
Raali ayaa laga noqonayaa ehelka Jannada ...........................76
Aragga Rabbi .......................................................................77
Sifooyinka Xuural Caynta: ......................................................78
1. Khamaarka Xuurul Caynta ...........................................78
2. Wajiga Xuurul Caynta ..................................................79
3. Quruxda wajigeeda ......................................................79
4. Dabaysha Qurxinaysa Wajiga Xuural Caynta .................79
5. Indhaha Xuurul Caynta .................................................80

6. Indhaheedu way laabanyihiin ....................................80
7. Quruxda sankeeda iyo siduu u jilicsanyahay ................81
8. Dhabankeeda iyo siduu nadiifta u yahay .......................81
9. Afkeeda iyo nuurka la socda dhoola cadaynteeda ........82
10. Heesta Xuurul Caynta...............................................82
11. Dhirta Jannada ee heesaysa:....................................84
12. Xuural Cayntu dhalinyaranimo ayay ku waarayaan...84
13. Dumar nimcaysan oo barwaaqadu ka muuqato........85
14. Gabadh Raaliyo ah ...................................................85
15. Gabdho aan guurayn...............................................85
16. Gabdho aan gurigooda ka baxayn.............................86
17. Taandhada Xuural Caynta ........................................86
18. Waa dumar amaanaya nimankooda..........................86
19. Timaha Xuural Caynta .............................................87
20. Laabta Xuural Caynta iyo horraadadeeda.................87
21. Beerka Xuural Caynta..............................................88
22. Gacmaha Xuural Caynta..........................................88
23. Dumar daahira .........................................................88
24. Bikranimada Xuural Caynta......................................89
25. Gogosha lamaanaha jannada...................................89
26. Lugaha Xuural Caynta .............................................90
27. Udugeeda iyo dharkeeda.........................................90
28. Cimriga Xuurul Caynta.............................................91
29. Yaa loo guurinaya Xuurul Caynta ..............................92
30. Shahiidka 72 xuural cayna ayaa loo guuriyaa ...........92

31. Xaaskaaga Xuural Caynta ah ilaahay ayay kaa dalbataa 92
Dumarka ehelka Jannada iyo Xuural Caynta keeba fadli badan? ....94
Abaalmarinta ninka iyo gabadha: ....95
Tusaale: ....96
Cuntada, Cabitaanka, Weelka iyo Dharka Ehelka Jannada ....97
Ninka Jannada ugu darajada hooseeya iyo cuntada la siinayo ....97
Faakihooyinka Jannadu ma idlaadaan mana qaadhaan ....99
Hilibka Jannada ....101
Cabitaanka Jannada ....101
Tasniim ....101
Kaafuur ....102
Salsabiil ....103
Ehelka Jannadu hadii aanay saxaroonayn sidee ayay u xaajo gudanayaan? ....103
Cuntada ugu horreysa ee ehelka jannadu cunayaan ....104
Waa maxay sababta ehelka Jannadu u cunayaan una cabayaan? ....105
Weelka Jannada ....106
Saxamo: ....106
Koobab dhego leh, koob aan dhag lahayn iyo ibriiqyo. ....106
Quraarado ama dhalooyin fidho ah: ....106
Weelku waa Dahab ama waa Fidho: ....106
Dharka ehelka Jannada: ....107
Dharka jannada miyaa la tolayaa mise waa la abuurayaa? .108

Dhar xariira oo cagaaran ....................................................108
Dharkoodu ma duugoobayaan ..........................................109
Marada afka ay marsanayaan ehelka jannadu ....................109
Xijaabka dumarka ehelka Jannada....................................109
Dharka Dumarka ehelka Jannada .......................................110
Guryaha iyo Qasriyada Jannada:..........................................111
Jannadu maxay ka dhisantahay? ........................................111
Qofkasta laba guri ayuu leeyahy........................................112
Qasriyada nabigu ku leeyahay Jannada ..................................113
Qasriga nabiga ee daruurta cad........................................113
Qasriga nabiga ee wabiga Kawthar ku ag yaala..................114
Qasriga nabiga ee Daruurta la moodo................................114
Qasriga Khadiija: ............................................................115
Qasriga Cumar ibnu Khadaab (Rc) .....................................115
Guryaha Shuhadada:........................................................116
Guryaha qofka rumeeyey nabiga (scw) ..............................117
Guriga qofka ka tagay beenta iyo ka wanaajiyey akhlaaqdiisa ..........................................................................117
Guryaha dadka Ilaahay dartii isu jecel ................................118
Guriga qofka tukada laba iyo toban rakcadood oo sunnada ah ..........................................................................119
Guriga qofka dadka quudiya ee hadalkana wanaajiya.........120
Guriga qofka Ilaahay dartii u dhisay masaajid .....................120
Guriga qofka soo booqday walaalkii ama qof xanuusanaya 121
Guriga uu leeyahay waalidka ilmihiisu ka saqiiro ................121
Dhirta Jannada iyo Midhaheeda:............................................122

Sidriga (Gobka) ........................................................ 122
Geedka Dalxiga (Muuska) ................................................ 123
Cinabka ................................................................. 123
Geedka Duuba ............................................................ 123
Geedka Sidratu Al-muntahaa ............................................. 124
Dhirta jannadu waa cagaar daran ........................................ 125
Hadhka ama Hooska Jannada ............................................... 125
Uduga dhirta Jannada: ................................................... 126
Jirridaha dhirta Jannada: ............................................... 126
Waynida dhirta Jannada: ................................................. 126
Faakihooyinka Jannada ................................................... 127
Timir iyo Rummaanka: .................................................... 127
Faakihooyin laba nooca .................................................. 127
Faakihooyin badan ....................................................... 127
Faakihooyin la helayo xilli kasta ....................................... 128
Midhaha Jannada goosashadoodu way dhowyihiin ............................ 128
Midhaha Jannadu way kala duwanyihiin xaga dhadhanka .. 129
Nabadgalyo ayay wax ku cunayaan ......................................... 130
Darajooyinka Jannada .................................................... 131
Mu'miniitu way kala darajo sarreeyaan ................................... 131
Camalada Darajooyinka sare lagu gaadho. ................................. 133
Jihaadka ama in jidka Ilaahay loo diriro ................................ 133
Is dul dhiga ............................................................. 134
Akhrinta Quraanka ....................................................... 134
Aadida Masaajidka oo aad badsato ........................................ 135
Safka oo aad awdo ....................................................... 135

In dhibaatada loo samro. ....................................................135
Cilmiga iyo Aqoonta ..........................................................136
Cirrada ama timahaaga oo ku cadaada islaamnimo ............136
Dawaafka badan ...............................................................136
Sujuuda .............................................................................136
Akhlaaqda Wanaagsan......................................................137
Ducada waalidka loogu duceeyo .......................................137
Jacaylka nabiga.................................................................137
Ninka ugu danbeeya ee Jannada galaya: ................................138
Wada Sheekaysiga Ehelka Jannada iyo ehelka Naarta: ...........140
Wada sheekaysiga ehelka Jannada dhexdooda:..................140
Nin kamida ehelka Jannada oo saaxiibkii raadinaya:...........140
Suuqa Jannada iyo wadasheekaysiga mu'miinta iyo Rabbigood: ..........................................................................145
Ragga iyo Dumarka keebaa Jannada ku badan? ......................148
Xaaskaaga Aduunyadu waa xaaskaaga Jannada ......................150
Gabadhii soo guursatay niman badan yaa jannada ku guursaya? ..........................................................................151
Caruurta Islaamka ee saqiirtay xagay tagayaan? .....................152
Caruurta saqiirtay waxay u shafaaco qaadayaan waalidkood ..........................................................................153
Jannada caruur malagu dhalayaa?....................................154
Nicmada ugu wayn ee Jannada...............................................155
Raali ahaanshaha Rabbi .....................................................155
Ilaahay oo la arkayo ..........................................................156
Maxaa Janno lagu galaa? .......................................................162
1. Iimaan iyo Camal Saalixa:............................................162

2. Daacada Ilaahay iyo Rasuulka: ....................................162
3. Cabsida Ilaahay: ........................................................163
4. Sujuuda Badan: ..........................................................163
5. Naxariista Ilaahay: ......................................................163
6. Jihaadka: ....................................................................164
7. Shahiidka: ...................................................................164
8. Quraanka Akhrinta: .....................................................165
9. Xajka baariga ah: .........................................................165
10. Soonka sunnaha ah: ...................................................165
11. Tawxiidka oo la xaqiijiyo: ..........................................166
12. Shanta salaadood: ......................................................166
13. Salaada Casar iyo Subaxa: ..........................................166
14. Salaadaha Naafilooyinka ah: .....................................167
15. Qofka jamaaco ku tukada afartan maalmood: ........167
16. Qofka Ilaahay dartii u dhisa Masaajid: .....................167
17. Runta in la sheego: .....................................................168
18. Agoonta in la caawiyo: ...............................................168
19. Afar rakacadood oo ka horeeya Duhurka iyo afar ka danbeeya .......................................................169
20. Aadaanka oo laga daba akhriyo: ................................169
21. Sunnada nabiga oo lagu dhaganaado: .......................170
22. Qof buka oo lasoo booqdo: ........................................170
23. Qofka dadku uga markhaati kacaan wanaaga: ........170
24. Qofka dadka ka saamaxa daymaha: ..........................171
25. Indho Ilaahay dartii u ooyey: ......................................171
26. Ilaahay waydiiso jannada sadex jeer: .........................172

27. Jidka oo dhibta laga qaado: ....................................172
28. Magacyada Ilaahay oo la xifdiyo: ............................172
29. Gabadha ninkeeda adeecda:..................................173
30. Ballan oofinta iyo Amaanada: .................................173
31. Qofka sadex gabdhood kafaalo qaatay:...................173
32. Qofka ku samra indho la'aanta: ..............................174
33. Akhrinta aayada Kursida: .......................................174
34. Akhrinta suuratu Tabaarak (Al-mulk).......................174
35. Qofka kulansada afar camal hal maalin ...................175
36. Jacaylka nabiga, saxaabadiisa iyo kuwa wanaaga ku raacay:175
37. Qofka akhriya ducada Sayyidu Al-istiqfaar: .............176
38. Todobada Carshiga raxmaanka hadhsanaya: ..........176
39. Samofalka Waalidka:.............................................177
40. Ardayga baranaya cilmiga .....................................177
41. Gabadha jacaylka iyo dhalmada badan ...................178
42. Qofka ka tagay beenta iyo ka wanaajiyey akhlaaqdiisa 178
43. Ilmaha kaa saqiiray ood ku samirto .........................179
44. Ilaahay dartii in la isu siyaarto: ...............................179
45. In diinta lagu toosnaado: .......................................180
46. Kuwa cadhadooda qarsada ee dadkana cafiya:.......180
47. Sharciga Ilaahay oo la fuliyo...................................181
48. Ruuxa toobad keena: .............................................181

Sideen u toobad keenaa?.....................................................182

Shuruudaha Toobada:.......................................................182

In la toobad keeno sida ugu dhakhsaha badan: ..................184
Qaabka aad u toobad keenayso:........................................185
Sifiican u wayso qaado:....................................................186
Camal wanaagsan ka danbaysii xumaantii:..........................186
Ogsoonow, Ilaahay naxariistu way balaadhantahay:...........187
Malo fiican ka filo Rabbigaa: ...............................................189
Ha quusanin waligaa: ..........................................................189
Hadii danbigii kaa dhaco mar kale: .........................................190
Waxyaalaha kaa caawinaya inaad toobad keento:..............192
Furaha Ereyada lasoo gaabiyey:.........................................193
Tusmo.........................................................................194